Buugga

DILAAGA DAHSOON

DAABACAADDII
1AAD
GAROOWE PUNTLAND
SOOMAALIYA

QORAAGA BUUGGA

Drs. RUUN SICIID FAARAX

Lahaanshaha Buugga

Buuggan waxaa lahaanshihiisa iska leh Drs. Ruun Siciid Faarax

Waa mid udhawran xuquuqda buugga, lama daabicikaro, iyada oo aan fasax laga haysan qoraaga buugga ama mulkiilaha buugga.

Kala xiriir qoraaga buugga:
TELL: 0907555721
Facebook; Wadaniyad najaxa
Gmail=Ruunsaid@gmail.com

HIBAYN

Buuggan waxaan uhibeeyay umadda islaamka ah gaar ahaan inta islawadaagta diinta islaamka, af-ka, diirka iyo dhaqanka umadda Soomaaliyeed oo xidid iyo ood wadaag leh, waa umad firfircoon oo dhinac kasta ku fiican hadday soo jeedaan oo Illaahay hibo usiiyay inta aan kor ku soo xusay.

AFEEF

(Afeef horre lahow ama adkasi danbe yeelo)

Waxaan ka afeefanayaa wixii khalada ama ubaahan sixitaan, waxaan ahay bini'aadam wax waan khaldikaraa. Sidaas oo kale fikirka waan ku kala duwanaan karnaa. Waxaan ka afeef-tay haddii aan wax khaldo ila soowadaag meelaha khaldan oo sixidda ubaahan. (Wixii aan khalday naftayda iyo shaydaan, wixi aan saxayna Illaahay agtiisa ayay ka ahaatay).

Koleyba bini'aadam baan ahay hawl Aadane qabtona khalad waa laga helayaa, marke waxaan rajaynayaa in aad ila sixi doontaaan insha allaah.

Mahadsanidiin dhammaan inta jecel akhriska, qoraalka iyo kaydka dhaqankeena suuban.

MAHADNAQ

Illaahay ayaa mahad dhammaanteed iska leh ii fududeeyay soo saarista dhigganahaan qaaliga ah ama wacyigaliyahaan, waxaan kaloo umahadcelinayaa cid kasta oo igala qayb-qaadatay soo saaristiisa, waxaan idin leeyahay mahadsanidin waalid, walaalo iyo saaxiiba, waxaan sigaara ugu mahad celinayaa hooyo **Xaawo Cabdullaahi** iyo aabbe **Siciid Faarax Nuux (Garas)** waxayna qayb libaaxleh ka qaateen soo saarista buuggan, waxaan kaloo si khaasa ugu mahadcelinayaa walaalkay qoraa **Maxamuud Axmed Muuse Tallman** waaa tafaftiraha buugga, waa walaalkay markaan socod barad ka ahaa ila garab-galay caqabado badan ila soo xaliyey, waxaan kaloo sigaara ugu mahadcelinayaa abtigay aqoonyahan **C/risaaq C/llaahi Nuux** oo isaguna hiil iyo hoo ila garab, waxa ay ii ahaayeen **Maxamuud Axmed Muuse Tallman** iyo **C/risaaq Catoosh** dadka gundhigga u ahaa buuggan qiimaha badan. Waxaan kaloo sigaara ugu mahadcelinayaa walaalkay **Nuux Axmed Siciid** oo ahaa isagana dhiirigaliyaha dhigaalkaan, waxaan sigaara ugu mahadcelinayaa

macallinkaygii oo ah tafaftiraha buuggan iyo wacyigaliyaha **Sakariye Axmed Nuur**.

Waxaan umahadcelinayaa **Saynab Jaamac Cali** oo ahayd saaxiibtay igala garabgalay dhinacyo badan sida dhiirigaeliyaha, caawinta buugta aan ubaah nahay, iwm.

Si guud waxaan umahadcelinayaa cid walba oo qeyb ka ahayd dhigaalkaan taladiisa, tifaftirkiisa, faafintiisa, daabacaadiisa, iyo bandhigistiisa.

Dilaaga Dahsoon

Tusmada Buugga

Cutubka 1aad

Qabyaaladda……11

Dugsi maleh qabyaaladi..... 13

Maanso qurgooyo 17

Qabiil 20

Haddaba anaga maanta sidee u adeeg sanaa qabiilka haddaanahay Soomaali? 30

Maanso dastuurka. 34

Farqiga u dhexeeya qabiilka iyo qabyaaladda 35

Qabyaalad 35

Qabiil……...35

Waxyaallaha ay qabyaaladu saamayanta ku yeelatay 38

Diinta 38

Wadajirka..... 40

Isbar-bar dhiga maanta iyo bari samaadkii midnimada ummada: 47

Qabyaaladu sidee bay ku ahayd dadka Soomaaliyeed dhexdooda barisamaadkii 1960. 50

Waa sideee maanta qabyaaladdu umadda Soomaliyeed dhexdeeda laga soo bilaabo 1991- 2022..... 52

Dhaqanka 65

Dib uhabaynta dhaqamada dadka 70

Dowladnimo 72

Horumar..... 77

Cutubka 2aad

Dilaaga dahsoon 86

Kaxorow dilaaga dahsoon 90

Maanso ka hadlaysa dilaaga dahsoon:- 101

Cutubka 3aad

Guumaysi..... 102

Qeybaha guumaysiga..... 103

Tobanka dhibka ee haysta waddanka……107

Juquraafi ahaan waddanka Soomaaliya…….117

Roobabka Soomaaliya 122

Xeebaha Soomaaliya 123

Diin……125

Xoolo dhaqato 128

Beeraleey 129

Cutubka 4aad

Wadashaqaynta dowladda, culimada iyo duub dhaqameedka. 131

Dowlad goboleedyada iyo dowlada dhexe : 137

Mucaaaradka Soomaaliya iyo waxa lagarabo 139

Aqoonyahanka……...141

Dhalinyarada..... 144

Ganacsatada 151

Hooyooyinka Soomaaliyeed..... 154

Wariyaasha Soomaaliyeed..... 157

Cutubka 5aad

Cafiska 161

Fahamka Waddaniyadda……167

Waddaniyad xumada maxaan ka dhaxalnay……..176

Cutubka 6aad

Aaladaha wax la isugu gudbiyo..... 202

Idaacadaha 204

Tiifiiyada……...205

Baraha bulshada……208

Xigasho……213

Cutubka Koowaad
Qabyaaladda

Waa maxay qabyaalad?

Qabyaaladdu: Waa cuddur aan wali lahelin dawadiisa. Qabyaaladdu Maahan sida cuduradda caadiga ah oo qofka intii dhakhtar lageeyo la dawaynaayo, qabyaaladu waa mida kala kaxaysa ummad, dhaxalsiisana bur-bur, kalatag iyo rafaad aan dhamaanayn.

Waxaan kaloo ku qeexi karnaa qabyaaladdu waa mid kala kaxaysa, kala disha ummad wada dhalatay oo isku diin, isku Af ah iyo isku dhaqan ah. Waxa keena qabyaaladda dagaalo sokeeye, is necayb iyo in ay sii kala durkaan ummadaas wada dhalatay. Qabyaaladdu xaqiiqatan waa cudur aayar udisha kumanaan qof, dhaawacna ugaysatay kumaan kale, waxaa la dhihi karaa qabyaaladdu way ka daran tahay cudurada xun–xun waayo iyagu waxay leeyihiin goobo lagu daweeyo, dhakhtar daweeya iyo waliiba dawadiisi oo la heli karo.

Laakiin qabyaaladdu intaas midna maleh waxayse leedahay dad sii faafiya una shaqeeya cudurkaa isaga ah

maxaayeelay waxyeeladiisa baysan garanayn ee hadday waxyeeladiisa garanayaan, mana ka shaqeeyeen xitaa meeshii lagu sheego way ka carari lahaayeen.

Maantay heer waxay maraysaa ay dhinac kasta ka gashay ummadda aan cudurkaan waxyeeladiisa garanayn.

Qabyaaladdu heer waxay gayaysiisay ummadda Soomaaliyeed soddon sano ku jiraan qaxooti, dagaalo sokeeye iyo dawlad la'aan. Waxay kaloo qabyaaladdu nagaarsiisay in aysan wadda dagi karin dadkii wada dhashay xitaa heer waxay nagaarsiisay in dalalka caalamku dhahaan xagaan ninkii udhashay baa ka talin kara waayo waxay arkeen heerka ay qabyaaladdu Ka taagantahay waddankeena iyo sida ay noogu milantay qabyaaladdu, waxay saamayn kuyeelatay waxyaalo badan.

Dugsi maleh qabyaaladi

Gabaygaan abwaanku wuxuu kaga hadlayaa qabyaaladda iyo dhibaatadeeda, ummadda Soomaaliyeed buuna kaga dhiirigalinayaa Abwaan Cabdullaahi Suldaan Timacade gabaygii lamagac baxay Dugsi maleh qabyaaladi waxay dumiso mooyaane wuxuuna ku bilowday sidatan:

Waxaan gabayga deelkiyo lafta iyo diirka uga qaadday

Dadka waxaan ogaysiinayaa dawgu suu yahaye

Soomaaliday dayaay wannaag, idinka doorsoonye

Docda bari dareeriga baddiyo Saylac darafkeeda

Dusha koon fureed iyo ilaa wabbiga daaciisa

Degmadeena oo idil haddii aan dayay abwaabteeda

Nimaan duubiyadu naafo noqon deelka laga waaye

Dulmi iyo dhac waa waxa qaribay degaladeeniiye

Dul iyo hoosba waan ugu dhiggoo waa dix dhagaxeede

Anunbaa damqanayee, dhaguhu uma daloolaane

Dadkaan la hadlayaa baan lahayn dux iyo iimaane

Bal inay dalfoof tahay caqliga dooni lagasaarye

Wixii hore usoo daashaday bay deegaanshanaysaaye

Doqonnimo kugu baahday baan cidi dabiibayne

Duulkii inkaar qaba jinbaa daasaddow utumo'e

Dab markuu bakhtiyo meel kalaa, doggob ka qiiqaaye

Waagii dilaacaa naxdimo di hin la sheegaaye

Annuunbaa damqanaayee dheguhu uma daloolaane

Dadkaan lahadlayaa baan lahayn dux iyo iimmaane

Dul iyo hoosba waan ugu dhigaye waa dix- dhagaxeede

Bal inay dalfoof tahay caqliga dooni laga saaraye

Wixii horray usoo daashaday bay, degashanaysaaye

Doc hadday uwada jeedsatooy dhawrto daneheeda

Ay duul walaalla ah tahay oy, duunka ka heshiiso

Dadka ka mayaraateene ways dabarjaraysaaye

Dubba madaxa ways kala dhacnaa daa in abidkiise

Goortay is wadda dooxatay baa, daad usoo galaye

Dul iyo hoosba waan ugu dhigaye, waa dix dhagaxeede
Annuun baa damqanayee dhaguhu umadaloo laane

Dadkaan lahad layaa baan lahayn, dux iyo iimmaane

Bal in ay dalfoof tahay caqliga, dooni laga saaray

Wixii horray usoo daashaday bay dugashanaysaaye

Ubaxiini waa daadiseen waana dubateene

Dubaaxdiisii waad wada cunteene duhur dharaareede

Dariiq toosan Soomaaliday waa laga dadaye

Darajada illaahay ninkii doonayaa hela e

Ninka duday dastuurkiyo waxyiga diinti ka carrowye

Duggsi maleh qabyaaladi waxay dumiso mooyaane

Haddaynaan xumaantiyo dilka, daynin kala qaadka

Dibadaan ka joognaa sharciga, daacada Illaahe

Dambarkeedu waa jahanam iyo dogobkiii naareede

Dul iyo hoosba waan ugu dhigaye, waa dix dhagaxeede

Anuun baa damqanaaye dhaguhu uma daloolaane Dadkaan lahadlayaa baan lahayn, dux iyo iimmaane

Bal inay dalfoof tahay caqliga dooni laga saarye

Wixii hore usoo daashaday bay, duggashanaysaaye

Bal inaa qalfoof tahay caqliga dooni laga saaray.

Dir-dir la is ku laayiyo intaan weerar daba joogno

Ay dumarku weerarkii sitaan, danbiyadii waayay

Dabciyaal ahaayey intay midh isu dooxayno

Uu sida dareemada u yaal maydku dabadeede

Kola doogsan maysaan intaad dunidda joogtaane

Dugsi maleh qabyaaladi waxay dumiso mooyaane

Maanso qurgooyo

Abwaan Cabdullaahi Xuseen Bayle waa abwaan da'yar badanaa curiya maansooyinka, gabayada ka hadlaya waddaniyadda iyo dhiirigalinta dadkiisa iyo dalkiis Maansadan isaga ayaa tiriyey, wuxuuna yiri:

Waayadaanba qaaflaydii madhihin qaaciga ahayde

Qalbigaan ka laabtoo ma oran qodobadiisiiye

Caawana tix lagu wada qanciyo maqal qabaarkaaga

Qabyaaladi waxay noo tar tiyo malaha qaamuuse

Qasad li waxay nagu ridaa qar iyo booraane

Qalooc bay hormuud utahay iyo qooqa kibireede

Birmagaydada bay qashaa iyo dhallinta qaan gaadhay

Quman hooyadeen bay dhigataa qabriga iilkiisa

Qalanjadii dadnayd bay ka dhigin qaawan heerana eh

Qaaliga raggeenii ahaa bay qubtaa qorax kulayl wayne

Qiiq bay arlada ka kicisaa iyo qaylo damiwayday

Qawsaaro bay naga dhigtaa gabay qabkoodiiye

Qaw baan dulnaal naa sidii qabar na hoosyaale

Qudha waxaan ka go’aynaa ninkii qiray Illaahaye
Afkay ka qabataa tawbadiyo erayga qaanuune

Waxaan qol–qolka seexsanaa midkii qaraxa tuuraayay

Qadadana waxaan ku doonaa qolo iyo reer –reere

Qorigaan kufaanaa oo xoornay qallinkiiye

Qubuur baan misaalkeeda nahay iyo tiinka qodaxeede

Sidii baa nin qaran duminayaa noo qaribayaaye

Qoon cayra baa naga dhigtoo cidlada qowlaysta

Qool dabina bay nagu xirtaa iyo qalad iyo xeeshiise

Qufac iyo sidii baan darxumo wali qandhoonaaye

Qoontii habtii iyo gar baa lisku qirayaaye

Bulshayahay qajila oo mar qura qariya baa ruuda

Qaabka iyo itaalkiyo mar quba nolasha qaabkaana

Ku quusqaata qaraxa iyo dhibaatada nagu dul qaangadhay

Eexdiyo qiyaanadu waxay dhalaan qoomamiyo ciile

Qaangaaro qayrkood ka haray qaayibaad malehe

Qawl yar haddii aan ka dhoho tixihii qaan gaadhay

Qosol baa haween lagu rinshaa goor qaboona ahe

Qamuunyay dabadeed ku umulaan qoomamiyo ciile

Qadar bil iyo maalmo ah ayay qaxar illaawaane

Iyagaa wixii soo qabsaday qaafilka ahaaye

Annaguna qabadaas baanu nahay wannan qiraynaaye
Qaabka iyo itaalkiyo mar quba nolosha qaabkana

Ku quus qaata qaxa iyo dhibaatadii nagu dul qaan gaadhay

Qabiil

Waa maxay qabiil?

Qabiil waa dad is dhalay, wadda dhashay asalkii horena ka soo bilowday hal oday ilaa ka farac ka farac kaas oo soo mara mar xalado kala duwan oo jiilba -jiil ay sii joogaan.

Muxuu yahay mabda'a loo sameeyay qabiilka?

Qabiilka Illaahay Subxaanahu Watacaalaa wuxuu nooggu sameeyay in aan isku barrano.

Waxaa kaloo jirta in ay ⌊fiicantahay qabiil ahaan marka lafiiriyo in ay iska warqabaan in ay istaakuleeyaan, in ay dhinac kasta iskala qaybqaataan sida diinta in ay magta iyo waxyaalaha qabiilka laga rabo in ay ubixiyaan si guud, in ay kawada qaybqaataan horumarka waddanka dhankooda in ay ka shaqeeyaan si gaara qabiilka isaga ah waxyaalaha danta ah iyo siguud in ay kala qaybqaataan bulshada inteeda kale waxyaalaha ka socda.

Waayo bulshadu marka hore waxay kasoo bilaa banaysaa waa qoys, qabiilkastana leh waxaana kawada dhexeeya waxkasta taas oo ay u ilaasha nayaan si iyaga oo wada jira balse aysan ufiirinayn qabiil gooniya.

Waqtigii Nebiyada ayaan waxan kasoo qaadan saddex Nebi Shucayb Callayhi Sallaam, Nebi Luud Callayhi

Salaam, Afdalul Anbiyaa Nebi Muxamed Sallalaahu Callayhi Wasalim say dhex dooda qabiilku ka ahaa.

Nebi Shucayb wuxuu ka dhashay reer ay dadku aad uqiimeeyaan aadna uga baqaan, Nebi Shucayb CS xaqiiqatan gaaladu in baddan ayay isku dayday in ay dilaan balse waxay dhihi jireen hadduusan reerka ka dhalan mar hore ayaan ku dili lahayn, halka uu Nebi Shucayb Callayhi Salaam diidi jiry arrinkaa, wuxuuna ku dhihi jiray diinta ayaa igala qiimo badan igalana qaalisan qabiilka aad sheegaysaan.

Halkaa waxaad ku baranaysa in uu qabiilku dhanka diinta marka lafaafinayo amaba uu hoggaamiye uu qofku yahay cida marka ugu horraysa garab istaagaysa ay yihiin qabiilkiisa waayo Nebi Shucayb qawmkiisu wuxuu ahaa gaalo misana way difaaci jireen oo diinta ama dacwada in uu gudbiyo waxyaalihii usahlayay ayay kamid ahaayeen.

Nebi Luud Callayhi Salaam waxaa loo diray in uu dacwada gaarsiiyo reerkii uu ka guursaday, Nebi Luud aad bay udhibeen oo xitaa qowmkaas waxaa ka badbaaday isaga iyo gabdhihiisi xitaa xaaskiisii way diiday in ay diinta qaadato. Nebi Luud CS hadalada uu dhihi jiray waxaa kamid ahayd haddii qabiilkaygu meesha joogi lahaa garab

baan heli lahaa. Nebi Luud maalin baa waxa uyimid malaa'ig iska soo dhigtay bini'aadam si ay ugu hiiliyaan Nebi Luud CS, markii ay soo galeen guriga Nebigga ayaa gaaladii soo buux dhaaf sheen si ay wax uyeeleeyaan martida maantay la joogta Nebi Luud Callayhi Salaam, wuxuu ku yiri martida ii dhaafa waxaad rabtaan oo kale sameeya way diideen, Nebi Luud malaa'igtii buu guriga la galay oo la sheekaystay halka ay iyaguna ay isasoo buux dhaaf sheen dayrka iyo qolkii Nebiga iyo maala'igtu ku jirtay, iskaa daa ayay ku dheheen Nebi Luud waxba nagama qaadi karaane.

Waxaa laga malaasay in ay arkaan Maalaa'igtii Illaahay iyo Nebigii, waxay kaloo usheegeen in qowmkaan larogaayo biri xitaa islaantiisa uu ka tago isaga iyo labadiisa gabdhood ay ka baxaan meeshaan dibna aysan soo fiirin.

Waxyaalo badan ayaan ka baran karnaa labadaan Nebi qaabka ay kala ahaayeen qowmamka loo diray waayo waxaa halkaas ka dheehan kartaa in uu qofku dacwad faafiyo ama uu hoggaan qabto in lagu eegi Jirray qabbiilka uu ka dhashay walaw ay ahaayeen qoommam gaalo ah.

Nebigeena Muxamed af-dalul Anbiyaa Sallaalaahu Callayhi Wasalam haddii aan wax kasoo qaadano siiradii

Rasuulka (Sallaahu Callayhi Wasalam) waqtigii la diray Nabigeena waxaa uu jiray **40** sano, wuxuu ku soo barbaaray dadkiisa oo wada gaalo ah. Nebi Muxamed Callayhi Salaatu Wasallaam inta aan Illaahay dooran oo aan loo dirrin Nebi nimada, Nebiggeena wuxuu ku sifoobay sifooyin aad uwanaagsan oo ka mid ahaayeen **amiinkii ummadda** oo Nebigeenu amaanada ayuu aad udhawri jiray.

Waxaa kaloo loo raacin jiray saadiqul ummah oo Nebigeena Sallaahu Callayhi Wasallam wax beena ma sheegi jirin, way israacin jireen **Saadiqul Amiin.** Wuxuu kaloo ku sifoobay Rasuulkeena Callayhi Sallaatu Wasallaam wanaag falista ka dhawr soomidda xumaanta. Wuxuu aadi jiray meel ka baxsan magaalada halkaas oo uu Illaahay ku caabudi jiray waa godkii (Qaarul-xiraa)

Waa meeshii uu jabriil (Callayhi Sallam) uu ugu waxyooday Rasuulka markii ugu horraysay lagu baray Aayaddii ugu horraysay oo ah اقرأ با سم ربك الد ي خلق

Sayidul Anbiyaa markii ugu horaysay wuxuu ugu jawaabay malakul Jibriil (**Maa annaa biqaarii**) oo micneheedu yahay waxba ma aqriyo, waxbana ma qoro. Jibriil Nebiga cunuhuu ku dhagay ilaa uu markii danbe ku

dhawaaqay Aayadihii Nebigeenu Callayhi Sallaatu Wasalaam.

Nebigu wuxuu qabay Khadiijo hooyooyinkii ugu khayrka badnaa bay ku jirtay oo Illaahay Subxaanahu Watacaalaa doortay. Waxay Nebigeena isku barteen ganacsi ay udhiibatay hooyo Khadiija Radiyallaahu Canhu, waxay ku dooratay saadiqul Amiin iyo dabeecad wanaagii uu Rasuulkeenu lahaa. Wuxuu jiray Nebigeenu Callayhi Sallaatu Wasallaam **25** sano, markuu guursaday hooyo Khadiija Radiyallaahu Canhu iyadana waxay jirtay **45** sano, waxay ahayd hooyo aad ufiican aad ula dadaashay Rasuulka Callayhi Sallaatu Wasallaam aad ucaqli badan waxyaalo badan ka caawisay Xabiibkeena Muxamed Sallaahu Callayhi Wasallam.

Markii uu Nebigeena Muxamed Sallaahu Callayhi Wasllam waxyiga lagu soo dajiyay soona argagaxay gurigiisa ayuu yimid hooyo Khadiija Radiyallaahu Canhu ayaa waydiisay waxa ku dhacay, Nebgeena Sallaahu Callayhi Wasallam wuu uga sheekeeyay arrintii ku dhacaday.

Khadiija Alle raali haka noqdee way fahantay in Rasuul la diray uu yahay, waxay ku tiri ina keen waxaan aadaynaa

oday haysta kitaabtii Anbiyadii hore isaga ayaan waydiinaynaa xaaladdaada.

Odayga raahibka waxa lagu magacabi jiray **Waraqata Binu Nawfal** way isku dhawaayeen hooyo Khadiija oo ehel bay ahaayeen, markay utageen wuxu usheegay in uu yahay Rasuul Illaahay doortay, dadkana in uu udigana loo soo saaray, kuna qoran yahay kitaabtii Nebiyadii hore in laga soo saarayo Carab sifooyinkaas noocaas ahna uu leeyahay, wuxuu kaloo usheegay isago qiiraysan raahibkii waxaan ka baqayaa inaan dhinto inta aadan soo shaac bixin wuu ooyay raahibkii. Rasuulkeena Callayhi Sallaatu Wasallaam way dajisay, Khadiija Radiyallaahu Canhaa. Aayadii ku xigtay oo Xabiibkeena lagu soo dajiyay waxay ahayd (**Yaa Ayuhal Mudathir , Qum Fa Andir, Wa Rabuka Fakabir, Wa Siyaabaka Fadahir, Warujusa Fahjur, Wallaa Tamnun Tastaksir, Walirabika Fasbir.)**

Xabiibkeena Callayhi Sallaatu Wasallaam Aayadahaan kadib wuxuu bilaabay in uu dacwadda ugudbiyo si siriya, waayo dadka uu ka dhashay ayaa ahaa kuwa ugu sarreeya. Waxay Carabta Qurayshi ahaayeen dad caqli badan oo qabaa'iladda kuwa ugu waa wayn bay kujireen, markii uu

usoo bandhigay Rasuulkeena dacwadda waxay ahaayeen dadkii ugu horreeyay oo ku kacay Nebiga adeerkiis buu ahaa Abuu Lahab, waxayna ka shaqayn jireen dhibka iyo hagar daamada Rasuulkeena Sallaahu Callayhi Wasallim. Waxa inta badan dhibi jiray oo dhibka lagarab taagnaa waxay ahaayeen reerkiisa, waxay uga baqi jireen adeerkiis Abuu Daalib gaaladu waayo way ka amar qaadan jireen Abuu Daalib, waxyna uga soo ashtakoon jireen adeerkii. Abuu Daalib wuu difaaci jiray Nebigeena Muxamed Sallaaahu Callayhi Wasallim wuu ku dadaalay in uu adeer kii Abuu Daalib uu islaamo balse kuma guulaysan Xabiibkeenu CSW.

Waxaan ka arkaynaa reerka uu ka dhashay Nebigeena in ay qaybna dhibi jirtay, qaybna difaaci jirtay waayo Abuu Lahab waa adeerkiis dhibkii uu ku hayeen isaga iyo naagtiisu waa la ogaa halka Abuu Daalib uu difaacijiray. Markii uu dhintay Abuu Daalib waxay Xabiibkeena u ahayd sanadkii murugada waayo waxaa iska raacay Abuu Daalib oo adeerkiisa iyo ummunaa Khadiija Radiyallaahu Canhaa oo labadu garbihiisa ahaa lana garabtaagnaa hiil iyo hoo iyo fikrad wanaagsan.

Waxaa lagu magacaabaa sanadkaa isaga ah (**Caamul Xusni**), sanadkii murugada wallaw uu Nebigeena lahaa saaxiibkii Abuu Bakar Sadiiq saaxiib wanaagsan, saaxiib garab unoqday dhib iyo dheefba la qayb saday Abaabakar Sadiiq Alle raali haka noqdee saxaabigii Jaliilka ahaa. Abaabakar Sadiiq wuxuu ahaa khaliifkii ugu horeeyay ee khulafaa u raashidiin uu Nebigu udoortay Callayhi Sallaatu Wasallaam. Wuxuu usameeyay in ay shuuro ama tashi ku soo doortaan halkaas waxaan ka baran karnaa in uu Rasuulkeena ka cararayay khilaaf iyo muran dhexdooda Abuubakar Radiyallaahu Canhu imaan iyo taqwada Illaahay siiyay ayuu Nebigeena isaga oo haysta saaxiib waxkasta kala qayb qaadanaya ayuu wali xasuusan jiray kana sheekayn jiray xaaskiisii ugu horraysay ummunaa Khadiija Radiyallaahu Canhaa, maxaayeelay waxyaalo badan ayay kala shaqayn jirtay oo ah dhanka faafinta dacwadda.

Waxaan usoo qaatay in aan halkaan kaga hadlo siiradii Rasuulkeena Callayhi Sallaatu Wasallaam qayb kamida waayo intaa way ka badan tahay, haddaa danaynaysid siiradii Rasuulkeena Callayhi Sallaatu Wasallaam waxaad

ka helaysaa iyadoo dhammaystiran kitaabka siirada Rasuulka (Salallaahu Callayhi Wasallam).

Maxaan ka baran karnaa siiradii Rasuulkeena Sallaahu Callayhi Wasallam haddaa nahay Soomaali?

1. In ay qabyaaladda iyo in hoggaamiyaha la dhibaa ay jirtay waqtigii Nebigeena Callayhi Sallaatu Wasallaam waayo waxaad ka arkaysaa Nebiga adeeradii midna wuu difaacijiray midna wuu ka soo hor jeeday oo halkaa waxaad ka arkaysaa hoggaamiyaha qabiilkiisu in xitaa iyagu isku raaci karin mabda'a uu u layimaado.

2. Waxaan kabaran karnaa in qofka hoggaamiyaha ah garabka uu ka helaayo xaaskiisa ay tahay midda uu ku hormarinkaro haddii ay tahay mid wax la fahmaysa sida ummunaa Khadiija raddiyallaahu canhaa.

3. Waxaan kabaran karnaa in khilaafka in tuusan dhicin lagaga hortagi karo shuura iyada oo la sameeyo camal, laga wada tashado markaas uu halkaa is afgarad iyo wannaag uu ka dhaco. Wada tashigu waa waxa keeni kara in ay is fahmaan hoggaanka waddanka hoggaamiyaha u ah iyo dadka hoggaanka udooratay waayo hadduu hoggaamiyuhu sameeyo wadatashi waxkastana ka soo qayb gala iyo inta ehelka u ah wixii khilaaf iyo dhib soo kala dhex gashana

lagu dhammeeyo wada tashi, wada hadal waanu ku faa'idayaa sidii Nebigeenaba uu ugu faa'iday. Intaan joogay waxaan ku dhashay bur-burkii, intaas way jirtay qayb aan lahaa caqli oo garaadkaygu igu filnaa, waxa jirtay iyaduna inta bur-burku jiray in aanan qaybka mida caqli lahayn.

Waxaan ula jeedaa hoggaamiyayaasha Soomaalida majirin midka mida oo sameeyay waddatashi inta aan joogay oo garaadkay uu sareeyay iyo intaan ka bartay taariikhdeena dhigaalka ah marka laga reebo in uu latashan jiray qaar siyaasiyiin ah oo ku hareeraysan oo dano gaara ka leh.

Haddaba anaga maanta sidee u adeeg Sanaa qabiilka hadaanahay Soomaali?

Qabiilku maantay wuxuu dhexdeena ka noqday mid aanu isugu faano, mid aan isku dhacno, mid aan isku layno, xitaa maantay waxaan ilownay arrimihii diinteenu nafaraysay. Waxaa kaloo moodaa maantay in ay nahaysato sidii Nebi Luud loo galay oo qabyaalad ayay ku dhibi jireen anagana maantay kii aan doorano qabiilkuu doono ha ahaado waxaa jira dad huwan shaati qabiil kuwaas oo iyagu dan gaara wata laakiin marka hore qabiilka ku soo kicinaya si reer hebel oo ninkaas uu isaga ku kacsanyahay looga tuuri lahaa xilka maxaayeelay isaga dantiisu waxa weeye aad heshid xoolo laakiin qabiiilkan uu ku laabanayo oo ku kicinaayo hebel oo reer hebela sidii looga tuuri lahaa booska waana laga tuuraa oo meesha ma sii joogo reer hebalkii uu ka dhashayna waxba uma qabto ileen tiisu watay kii soo laa luushayna tiisuu ufududaynayaa. Reerka uu ka dhashay waxay dhahaan mar hadduu magacii reerka huwanyahay noogu dhan oo waxaanba cisaynaynaa magaca iyo maamuuska uu helay qofkaas laakiin ma fiirinayno qofkaan muxuu qabtay? Caadil ma yahay? Ma udhexeeyaa dadka doortay? Ileen

markaan ma huwana shaati qabiile wuxuu huwan yahay shaati bulsho isku tagtay, maka fakerno qofkaa aakhiradiisa waayo Imam Caadila booska uu tagayo waanu kawar haynaa imaam aan caadil ahayna booskuu tagayo waan garanaynaa.

Waxaa kaloo jirta in ay dadkaa iyaga ah dad shisheeye lashaqay sanayaan oo ay iyagu dabada ka soo wadaan wax kasta oo uu u baahdana ay ku taakullaynayaan, qabiil kiisuna uu markasta garab istaago gar iyo gardaroba waana waxyaalaha maantay nahaysta oo uu waddankeena udagi la'yahay.

Waxaa kaloo uu qabiilku nagaarsiiyay in dadkii diinta waxyeelada ugaysanaayay aan qabiil ku difaacno oo haddiiba ay hadlaan culimadii waday dacwada in qofkaas uu qabiilkiisu difaaco in la diido diinteena islaamka iyo waxa ay ka qabto in uu qofkaas uu kuwado meel aan fiicnayn, halkaas waxaa moodaa in aan haysano dhaqankii jaahiliyada qayb kamida waayo iyaga ayaa qabiil ku difaaci jiray kay rabaan oo ka dhashay, kaan ka dhalana dhibi jiray. Maantay waxaa waddanka ka jira nabadgalyo la'aan wallow ay hadda sidii hore ka soo fiicnaatay. Maalinkasta dadka Soomaaliyeed oo masaakiinta ah, dadkii halyeeyadii

waddanka wax uqabanaayay qarax ladaba taagan marka ay ka soo baxaan. Waxay ku talogaleen in ay waddanka wax ka noqdaan qofkii shalay dadka islaamka ah dhiigooda bannaystay, ku sheegay gaalo raac, aan u aabbo yeelin culimo, aqoonyahan, siyaasi, isin, haween, dhaqtar, macalin ayaan ku difaacaynaa qabiil. Shalay goortuu umadda islamka ah gumaadayay qabiil malahayn oo qofkasta naftiisa ayuu uga baqaayay laakiin markuu kasoo baxay dadkii jihadu ka halowday oo aan lagaranayn dan uu uga soo baxay oo aan lagaranayn in uu si dhaba uga toobad keenay waxyaalihii uu dadka wala alihiisa ku dhibaateeyay oo aan lagaranayn in uu wali la ra'yi yahay dadkii rabay in uusan waddankaan dagin.

Markii laxiray oo dowladii waddanka xukumaysay ay qabiilkiisii udoodayaan oo ay ku sheegayaan in uu ku xiranyahay cadaalad daro tii uu soo sameeyay oo xitaa idinka uu ka dhashay cadaalad darro ma aysan ahayn miyaa? Maya taas uuma muuqato oo way ilaaween kaliya waxaa umuuqata in uu kursiga uu ku fariisto.

Illaahay Subxaanahu Watacaalaa waxba ma ilaawo ama adduun ha looga jaro ama aakhiro halooga jaro hadduusan ka towbad keenin, waan ba ilownay in aan dhimanayno oo

qabiilkii ayaa namadax maray iyo raadin kuraas laga dhimanaayo amaba laga dheeraanayo.

Maanso dastuurka

Dastuur caamahoo
Leexleexad lahaynoo
Dambas aan lahaynoo

Dadka wada simaayoo

Daruus aan dhamaanayn

Rabaa noogu deeqee

Waan ku mahadnaqaynaa

Umad yahay islaamka ah

Dastuurkiina qaatoo

Dayac iyo darxumo iyo

Dayuusiinta qaarkood

Waxa ay daliishaan

Ka dhiidhiya xumaantoo

Dastuurkii Illaahay

Mideeyihii islaamkoo

Samawadka laga keenayoo

Dadkii loo jideeyoo

Dib usoo ceshoo

Ku adkaada waligiin

Farqiga u dhexeeya qabiilka iyo qabyaaladda

Qabyaalad

Waxaan u adeegsanaa in ay wax kasta oo rabsho ah oo dhib loogu gaystay bulshada masaakiinta sida dhac, dil, hanjabaad, barabixin, dumin, aanooyin aan dhammaan, dulmi iwm. Haddii loo adeegsado qabiilkii in ay reer kii iyaga ahaa ay ushirkoobaan in iyagana aysanba is taakulayn is dhibaan umada kale amaba qabiilada kalena aysanba kabaxsan kala garan waayaan diintii Alle faray iyo qabiilkii kufaanaan badanaan iyo waxyaalo nimco uu Alle siiyay meelkasta oo ay joogaan ay dhib mooyaane intooda badan aysan wax faa'idayn, waa waxyaalaha ay qabyaaladu keentay.

Inta aan soo sheegnay ayay tahay cagsiga qabyaaladda loo adeegsado maxaayeelay qofkii maalintaas ayaa waxa ku bilaabanaysa in uu yeesho qabiil ay uyeeleen qab – qablayaal ku haysta kursiga qabiilkiisa, kiisa haka soo jeedeen amaba kuwa kaloo doortay oo iyaga laftirkoodu qaba cuqdada ah in uu reerkooda kaliya waxtaray laakiin uu labada dhinacba uu ka qabo dhibaato uusana horay usii

wadikarin xilkii aqlabiyadda loogu doortay oo uusanba xilka dhammaysan amaba uu kaga tago urugo iyo ciil ileen wuxuu qaban lahaaba qabiiladii baa kasoo komaray oo midkasta ku doodaya anaga waxba namatarin waxyaalaha ay qabyaaladdu ku xuntahay.

Qabiil

Qabiil waxa Alle noogu sameeyay waa in aan isku barano oo isku ogaano oo aannan isku dhibaatayn. Wuxuu ku fiicanyahay oo qabyaaladda kaga fiicanyahay haddii ay qabiilkaas ay adeegsadaan waxyaalo faa'ida leh ay ka dhalan karto, haddii ay yihiin dad dhexdooda is taakuleeya, dadka kalena taakuleeya, isku duuban qabiilka aan u adeegsan in wax lagu yeelo cidkale laakiin keliya ay u adeegsadaan sidii Alle faray kuna dhaqmaan, waa faa'idada uu leeyahay qabiilku.

In kastoo aanan arkin cid inaga mida oo adeegsanaysa markii ladoorto qof umadda udhexeeya laakiin qofkaas marka ladooranaayo qabiil buu ku soo baxaa, misna qabiilkiisa keliya madooran ee dhammaan qabiilada Soomaaliyeed waa ay wada doorteen. Dadka ugu horreeya oo ku kaca waa qabiilkuu ka dhashay marka qabiilkaa uu ka dhashay haddii ay taakulayn lahaayeen la garab istaagi

lahaayeen talooyin wax ku oola siin lahaayeen oo ku dhihi lahaayeen maan dhaw anaga waad naga dhalatay laakiin waxaan kaarabnaa in aad ahaato mid dadka dhan si caddaalada ugu shaqeeya mid dadka udhexeeya, mid xaqa masaaakiinta ilaaliya, mid aan fiirin qabyaalad iyo waxa dadka sii kala kaxaynaya. Mudane ama marwo dadkaas ayaan kuu la simanahay waxay heelaan baan helaynaa anaga qabiil ahaan waxba hanagu tarin balse sida bulshada ugu shaqayn lahayd ayaan kaarabnaa in aad noogu shaqaysid, wax dheeraad oo aan xaq u lahayna hana siin waayo xaaraan bay nagu tahay haddii sidaa uu qabiilku ufakaro runtii waa meelaha uu qabiilku kaga fiicanyahay qabyaalada.

Buugga fatuuxul xabasha oo kahadlaya Axmed Guray

Soomaali kaliya uma shaqaynayn haddana cida hubka siinaysay cida ciidanka la garab taagnayd waxay ahaayeen Soomaali, wuxuu samayn jiray Axmed Guray Allaha unaxariistee cidii kasoo horjeesata ciduu ka dhashay ha ahaato ama Soomaalida kale ha ahaado awood buu u adeegsan jiray wayna ka baqijireen.

Waxyaallaha ay qabyaaladdu saamaynta ku yeelatay

Diinta

Qabyaaladdu siyaabaha ay diinteena ugu yeelatay saamaynta way kala duwantahay, waxaa kamida sida ay diinteenu diiday in qabiil ahaan lagu bannaysto ama lagu xalliyo.

Waxaa kamida sida qabiil ahaan loo kala saraysiiyo oo la dhaho kanaa laangaaba ama kanaa laandheeraa. Diinteenu way sintay waxa kale oo saamayn ku ah qaabka kitaabka Illaahay la inoogu sheegay ama ay aayaadka Alle Wayne noo sheegayaan:

يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنَّا خَلَقْنَاكُم مِّن ذَكَرٍ وَأُنثَىٰ وَجَعَلْنَاكُمْ شُعُوبًا وَقَبَائِلَ لِتَعَارَفُوا ۚ إِنَّ أَكْرَمَكُمْ عِندَ اللَّهِ أَتْقَاكُمْ ۚ إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ خَبِيرٌ

"War dadow waxaan idinka Abuurnay lab iyo dhedig, waxaan idinka yeelnay dadyow iyo qabaa'il, si aad isugu garataan. Midkiina idinku karaamada iyo sharafta badan waa midkiina idinku Alle ka cabsiga badan, Illaahay waa mid og oo khabiir ku ah waxaad samaynaysaan".

Mar kale Alle ayaa aayad kale kula hadlay addoomadiisa wuxuuna yiri:

وَاعْتَصِمُوا بِحَبْلِ اللَّهِ جَمِيعًا وَلَا تَفَرَّقُو.

“Qabsada xarigga Eebbe dhammaantiin, hana kala taganina”.

Maantay kuma dhaqano aayadahaas iyo axaadiis kale oo badan oo kusoo arooray ama looga hadlaayay qabaa’ilada marka waxaan dhihikarnaa qabyaaladdu way kuyeelatay saamayn diinteena islaamka ah.

Wadajirka

Qaab noocee ah ayay qabyaaladdu usaamaysay wadajirka umadda Soomaaliyeed? Waa maxay wadajir ama midnimo?

Wadajir ama midnimo waxaa loo qeexaa siyaabo badan sida midnimadu waa in ay qoom ama bulsho meel wada degan ay ku midoobaan ama ay wadajir uhorumariyaan waxyaalaha ka dhexeeya ay wada leeyihiin. Umadda Soomaaliyeed waa dad isku diina, isku dhaqana, isku midaba, wada dhashay wadadega, markii loo eego qoomiyadaha kale ee caalamka ku nool. Waa waxyaalaha ay kaga duwan yihiin markii loo eego umaddahaas kale.

Iyada oo intaas oo dhan ay kaga duwanyihiin ayaa hadda aysan ahayn dad ka midaysnay horumarka waddankooda, burbursan ku dhawaad soddon sano. Waxa kaloo dhacda in ay ku jiraan gacmo shisheeye, mabda' ugu wayn oo sii kala kaxaynaya. Markaan eegay waxan u aaneeyay in uu yahay cudurkaan aan dawadiisa lagaran wali ee aan ku tilmaamay qabyaalad maxaayeelay markii dhammaan qabiiladii Soomaaliyeed ay midiba in goosatay oo uu lamagac baxay magacyo dawlad-goboleed oo shaar qabiil huwan.

Taas oo keentay inay adag tahay in ay si fudud umidoobaan bahwayntii Soomaaliyeed, waxaa kaloo ka dhashay in uu midiba midka kale u arkay cadowgiisa, waxaa lumay tiirkii adkaa oo udhexeeyay kaas oo ah midnimo ama wadajir umadd**a** Soomaaliyeed.

Waxaan kaloo dhihikaraa in ay dadyowga shisheeye ay ogaadeen in aan nahay dad aan garanayn hagar daamada iyo dhibka uu nagu hayo cudurkaan kolkaas bay iyaguna dhankooda ka abaabulaan sidii ay umadda Soomaaliyeed usii kala firiqsanaan lahayd waayo iyaga wax dana ugu ma jirto in ay isku yimaadaan oo iyagaa manaafacaad ku qaba. Waxaa jira dadyaw naga mida oo la shaqeeya waxaa umuuqda oo keliya maalgalinta ama kista yar oo ay siinayaan.

Dadyowgaan aan rabin wadajirka dadka Soomaaliyeed ama waxayba iska dhigayaan kuwo u adeegaya danaha umadda Soomaaliyeed laakiin waxay ku hawlan yihiin sidii ay usii kala fogaan laheyn si ay iyagu uga faa'idaystaan khayraadka iyo barwaaqada Rabbi Kumanaystay waddanka Soomaaliyeed.

Waxaa kaloo ladhihikaraa qabyaaladu saamayn way ugu yeelatay midnimada umadda, in qabiilkasta oo kamida uu

doonayo qaabkii ay iyagu ugu guulaysan lahaayeen hoggaanka waddanka.

Horumarka iyo sii jiritaanka wadajirka dadkooda iyo waddankooda dan Kama aysan lahan maxaayeelay maantay haddii ay meel isugu gayn lahaayeyn fikirkooda saliimka ah kanatashan lahaayeen aayaha dadkooda, dalkooda iyo jiilka soo socda si wadajir ah, way katakhalusi lahaayeen cudurkan daashaday.

Kala maqnaanta umadda Soomaaliyeed qayb wayn buu ka qaatay cudurkaan, waana mid dhammaan ku milmay umadda, Illaahay oo ka saara mooyaane cidna Kama saari karto iyo iyaga oo ogaada dhibka, hagar daamada uu ku hayo cudurkaan daashaday. Xalna uraadiyaan sidii ay uga dawoo bilahaayeen cudurkaan isaga ah, dadyow caqligooda, maskaxdooda aysan qaadanayn way jiraan in uu waddanka ama dadka Soomaaliyeed kusii jiraan burbur aan dhamaanayn in ay qabyaaladdu utahay hormuud, waxaa ka badan inta diidan ama aan rabin in la dabar jaro qabyaaladda, inta u ololaynaysa sii jiritaanka cudurkaan dadka iyaga ah wax dana ama in uu waddanku ka baxo qabyaalad marabaan waayo hadaysan rabin hormuud

umanoqdeen cudurkan, umadda Soomaaliyeed maanka iyo maskaxdaba ka dilay, baabi'iyay wadajirkoodii.

Guurku ma ka qayb qaadan karaa soo noqoshadda midnimida?

Hadday Jawaabtu tahay haa, sidee buu guurku uga qayb qaadan karaa soo celinta midnimadda?

Guurku waa wax Illaahay noogu talagalay oo kawnba ma imaaneen haddaan Nebi Aadan iyo hooyo Xaawo ama haddaan si kale u dhigo waxaa ladhahaa Ibnu aadan baynu nahay waxaan ula jeedaa Illaahay Subxaanahu watacaala xigmad ayuu kalahaa marka uu Nebi Aadan CSW feertiisa ka abuurmay hooyo Xaawo waayo waa meeshii uu ka soo bilow day guurku.

Anagga haddaa nahay umadda Soomaaliyeed sidee buu ahaan jiray guurkeenu? Maantayse waa sidee?

Haddaan dib umilicsaddo guurku wuxuu kamid ahaa waxyaalaha umadda Soomaaliyeed ay qadariyaan.

Waxaa jirtay iyadana in guurku waagii hore markii ay is bartaan labada qof oo is raba sida dhaqanku yahay loo soo galo fariisan jiray gabadha , waxa jiray iyadana heeran oo gabar ayaa ka tagta meeshay joogtay oo meelkale tagta si ay halkaas nolol cusub uga bilowdo, waxaa kaloo iyadana

jirtay marka la is dooranayo in aan loo fiirin jirin reer hebel iyo reer hebel, waxaa kaloo jirtay in ay istijaabin jireen wiilka iyo gabadhu inta ay haasaawaha ku jiraan, waxay iska qaadi jireen imtixaan si xikmad iyo caqli ku dheehan yahy in dhaqanka ay lahaayeen wuxuu ahaa in ay wiilka iyo gabadhu in door ah isku jirsadaan halkaasna ay waxa ay is waydiinayaan is waydiiyaan oo halkaas ay isku bartaan imtixaanada ay badanaa iska qaadi jireen, waxaa kamid ahaa in uu wiilku gabadha waxyaalaha guriga shaqadiisa iyo wixii la halmaala uu waydiiyo si uusan hadhowdii unoqon mid ceebooba halka gabadha laftarkeedu ay tijaabin jirtay wiilka oo shaqada isaga laga rabo ay ku imtixaami jirtay iyo waxyaalo kale oo badan, waxaa jirtay waqtigaa in gabadhu la khasbijiray oo duco iyo habaar mid dooro la dhihi jiray waxay ahayd macnaha meelaha xooga daciifka ka ka jiray laakiin sharaf iyo wanaag ayuu guurkeenu ku salaysnaa xitaa diinta dhinacyadii aad buu ugu fiicnaa waayo waxaad ka arki kartaa marka ay wiilka iyo gabadhu haasawaha ku jiraan inta ay isku jirsanayaan iyo nidaamka ay ukala fogaanayaan oo ahayd dhaqan wanaagsan.

Maanta waa sideee guurkii?

Marka aan eego guurkii sida sharafta badnaa u qiimaha badnaa waxaa moodaa in aad u qiimo beelay maxaa sidaa uqiima beelsiiyay ma guurka ayaa sidii si ka duwan uqaadanay? Ma dilaaga dahsoon ayaa saa meeyay? Ma waxyaalo kale ay umadda noo keeneen baa qaadanay? Ma casriga cusub baa naqaatay?

Waa su'aalo is waydiin mudan waxaana dhihikaraa intuba waa ay saameeyaan oo qayb wayn bay ka qaateen waxa ay intaas dhan guurkeenii usaameeyeen waa inagii oo burbur kala tafaraaruq, bayhoof, dagaalo sokeeye, nidaam la'aan dawlad la'aan iyo waxyaalo badan oo intaas ka badan oo dhulka dhigay, waxaa jira marka dhanka fikirka iyo maskaxda ayaa noqonay dad laga qab saday oo xaaladdaha uu burburku keenay bay ka mid tahay.

Haddaan hoos usoo daadago dilaaga dahsoon ma ka qayb qaatay guurka umadda Soomaaliyeed?

Arrimaha saamaynta noogu yeelatay waxaa ka mida umadda Soomaaliyeed waa dad wada dhashay, waa ehel iyo qaraabo, waa xigtiyo, waa wiil iyo abtigii, waa wiil iyo adeerkii, waa gabar iyo habar yarteed iwm

Haddii aan soo qaato hees uu qaaday Cawaale Aadan oo uu ku dhiirigelinaayo, kuna baraarujinaayo umadda Soomaaliyeed wadajirka, wuxuu yiri:

Geedaha barbaa jiroo kala gaar lammoodoo
Gunta hoose xididkiyo midnimadda waddaaggee
Soomaalaay gedoo kale gacal
Iyo walaalal iyo gacmo wada jiraa nahay
Waxaa gama'iidiiday
Ee guud ahaan dunida
Iyo dowladaha geeska gaar uga ahaa naayay
Waxaan gudanaayay waajib
Maantayna haddaad gaadhay
Durba guulahaas muuqda
Galad Eebe weeyaane
Geediga horay uwada Soomaalaay
Ka gilgilo magac xumo ku soo gaarta
Godob iyo qabiil daaya
U gun tama midnimo waarta
Aan dunida gaarne
Gacmaha is qabsada Maantay

Isbarbar dhiga maanta iyo bari-samaadkii midnimada ummada

Walow aan waqtigaa aan jirin haddana waxaan raadiyay qaabka ay ahayd wadajirka umadda Soomaaliyeed iyo sida uu ku ahaa cudurkani, waxaan waraystay dad haya taariikhda waqtigaasna noola walow aanan magacyadooda halkaan ku soo koobi Karin, waxaan kaloo akhriyay buugaag ka hadlaayay taariikhda Soomaalidu ay lahayd . Su'aalaahan ayaan waydiiyay soo socda:

Sidee buu ahaa wadajirka umadda Soomaaliyeed barisamaadkii? Maanatana sidee weeye? Qabyaaladu sidee bay ku ahayd waddanka waqtiyadii hore ilaa hadda? Maxay ka aamin sanaayeen dadku? Markii waddanku dowladyeeshay, waqtigaas waddanka hoggaankooda qaab nooceeya uga hortagijirtay haddii lagu arko qabyaalad dadka dhexdiisa amaba dowladda?

Markaan eego barisamaadkii kana eego wadajirka umadda Soomaaliyeed aad buu ufiicnaa, maxaayeelay waxay ahaayeen dad isku xiran dhinac kasta marka la eego, meel uga soo wada jeesta cidii soo faragalisa wadajirkooda. Waxaana horkacaayay wiilashii dhalinyarada ahaa ee SYL kuwaasoo waddankooda udiiday in uu guumaysi kusii jiro

oo midba meel lagu go'a doomiyo. Gumaystuhu wuxuu katalinaayay in ay umadda Soomaaliyeed kusii jiraan in aysan hanan waddankooda, ayna qayb-qayb ahaadaan oo guumaysta yaashii reer Yurub midba qayb qaato. Waxaa kamid ahaa guumaysta yaashaas Talyaaniga, Ingiriiska, faransiiska, waa wadamadii kusoo duulay waddanka Soomaaliya. Ingiriisku wuxuu goostay waqooyi galbeed, Talyaanigu wuxuu goostay koonfurta iyo waqooyi bari walow markii hore Ingiriisku uu haystay qayb kamida koonfurta iyo bartamaha, is afgarad kadib waxaa isku lawareegay Ingiriiska markaas Talyaaniga waxaa haystay caqabado kasoo gaaray dagaalkii labaad adduunka. Faransiisku wuxuu goostay Djabuuti.

Dhalintii SYL Illaahay ha uwada naxariisto waxay go'aan sadeen sidii ay usoo celin lahaayeen maqaamkii, sharafkii iyo horumarkii dadkooda iyo dalkooda si ay taa ugaaraan ugana saaraan waddanka guumaysiga. Waxay kasoo horjeesteen qabyaalad, maxaayeelay mabda'a isku keenay saddex iyo tobanka dhalinyaro wuxuu ahaa in ay kasaaraan guumaysiga dadkooda iyo dalkooda una soo hoyiyaan xoriyad, haddaysan xooga saarin marka hore in laga saaro dadka qabyaaladda iyo waxyaalaha uu guumaystuhu ku

abuuray, way adkaaan lahayd in ay kasaaraan guumayste dalka waayo Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa (Farkaliya fool madhaqdo) taas oo micneheedu yahay Illaahay ka sokow haddii aysan garabtaag nayn oo aysan la shaqayn lahayn shacabka Soomaaliyeed qaybohooda kala duwan ay ka koobanyihiin sida culimada, aqoonyahanada, isimada, dhalinyarada iyo dhammaan waxgaradka umadda Soomaaliyeed. Waxba uma suurta galeen, taas waxay kutusinaysaa sida ay umadda Soomaaliyeed uwada jirtay dhib iyo dheefba isula qayb sanjreen.

Halkaas waxaa lagu soo hoyiyay in ay midoobaan dad walaalo ah oo midba meel ku go'doonsanaa, xataa waxay isku dayayeen oo qaarkamida ururka dhalinyarada udireen dowladaha dariska nala ah ee Itoobiya iyo Kiinya si ay ayagana uhelaan xorriyadooda dibna ulamidoobaan walaalahood Soomaaliyeed. Madhicin balse awood ay kusoo ceshadaan malahayn oo waxay ahaayeen dad ka xoroobay guumaysi laakiin way ka go'nayd in shanta Soomaaliyeed midoobaan, sidaa si lamida ayay uga qayb qaateen sidii ay uhanan lahaayeen walaalaha Soomaaliyeed ee Djabuuti oo iyaga laftarkoodu kacdoon sameeyay iyaguna garab kusiiyeen.

Qabyaaladdu sidee bay ku ahayd dadka Soomaaliyeed dhexdooda bari-samaadkii 1960

Qabyaaladdu saamayn aad uwayn maysan lahayn waqtigaas. Waxaad kagaran kartaa qaabka ay dadka Soomaaliyeed ugamidays naayeen horukaca, horumarka dadkooda iyo dalkooda.

Waqtigaas ma aysan jirin hebel-land iyo hebel-land ee waxay ahaayeen dad hal mawqif leh kaas oo ah sidii uu waddankooda uhorumarin lahaa. Waxaa kaloo jirtay waqtigaas ururkii SYL ha ahaado ama dawladii kala duwanaa oo soo maray ha ahaadaan waxay ahaayeen umad wadajirta, shacab iyo maamulka markaas waddanka ka jira. Waxay ahaayeen dad mabda' leh mabda'aas oo ah sidii uu waddanku ugasarayn lahaa waddamada shisheeye amaba uu ula midnoqon lahaa waayo waxay iska saareen waxkasta oo kala qaybinaayay sida qabyaaladda, in iyaga dhexdooda la isku adeegsado si waddankooda loo burburiyo iyo jiritaanka umadda iyo in kabadan oo wanaaga ayay lahaayeen Soomaalidu barisamaadkii qabyaalad iyo kala qaybsanaana way diideen, xitaa waxa la samayn jiray dawladdii markaa gacanta ku haysay in ay xirto qofkii qabiil iyo magaca qabiilba laga maqlo halkaas waxad ka

garan in ay qabiilka adeegsigiisu uu nagu yaraa ama sidaan hadda u adeegsano in aan loo isticmaali jirin qabyaaladda.

Waa sideee maanta qabyaaladdu umadda Soomaaliyeed dhexdeeda laga soo bilaabo 1991- 2023

Maanta qabyaaladdu waxay noqotay hubka kaliya oo loo adeegsado in wax lagu dumiyo ama gabaad u ah waxyaalo badan aysan diinteenu ogolayn.

Qabyaaladdu maanta umadda Soomaaliyeed lidda iyo lafaha ayay ka gashay oo xitaa kii yaraa oo hadda dhashay qabiil buu ku hadaaqayaa inta qaranimada jecel ama ku haminaysa way yartahay, hayaraado ama hawaynaadee. Maxaayeelay waddanku wuu burburay waxyaalaha hormuudka u ah waxaa ka mid ah qabyaalad, waxaa iyaduna soo baxay urur diimeed ku dagaalamaya in ay ku socdaan xaq amaba ay ladirirayaan gaalo.

Meel kale Kama imaan waa dhalin Soomaaliyeed oo laqaad siiyay fikir khaldan, waxay beeg sanayaan dadka farakutiriska ah oo uhalgamaya dadkaan Soomaaliyeed iyo jecelna inay dalkooda horumar gaarsiiyaan.

Ururka sheeganaya urur diimeedka laakiin uusan magacu sidaa ahayn ee ah dad jihadii ka luntay waayo diinteena suuban maqabto in qof muslima dhiigiisa labanaysto waayo diinteenu ma ogola dilka qof muslim ah xataa

hadduu gaalyahay oo uusan kula dagaalayn in la dilo lama ogola, qof muslim ahna warkiisa daa.

Dadka noocaas ah oo sidaa udhaqmaya korna waan ku soo sheegay waa Soomaali inyar weeye ajaanibtu ama lacago hasiiyaan amaba haku jiraan oo in uusan waddanku hormar gaarin ayay rabaan, waxaa jira qab-qablayaal iyaguna aan rabin horumarka waddanka oo xitaa iyagu ka marnayn waddamo shisheeye oo aan ogolayn in uu waddanku dago. Qabyaaladdu maanta lagasoo bilaabo 1991 ilaa maanta waxay nagaarsiisay in ay umadda Soomaaliyeed dhexdooda Ku abuurmeen dagaalo sokeeye, isnacayb, kala qaybsanaan. Dagaalada sokeeye ee waddanka ka dhacay waxay ku salaysan yihiin amaba udub dhexaad u ah qabyaalad, dagaalada sookeeye waa kuwa burburiyay naf iyo maal waxaan lahayn.

Qabyaaladdu waa cudur kumanaan dishay, kumanaana dhawacday, malaayiina barabixisay, cadaynteedu waa dagaalada sokeeye oo ay nooga dhinteen malaayiin qof halka kuwo kalena la dhaawacay, dhaawaca dadka Soomaaliyed kasoo gaaray dagaalada sokeeye kaliya maahan in dhaawacu uu ahaa in uu qofku ku dhaawacmay qori balse waxaa ka daran dhaawaca qalbiyada dadkeena

gaaray heer ay gaareen in aysan isku gali karin, wax wada qabsan Karin, wada tashan Karin, horumar samayn Karin. Reer hebel-land kasta, hebe-lankii walaalkiis ahaa wuu ka baqayaa taasna waxaa keenay dagaalo sokeeye oo qabyaaladdu asaas utahay.

Taasna waxay naga reebtay in aan ahaano dad ka fakara horumarka horay usocdka dadkooda iyo dalkooda.Waxaa kaloo ka asaasmay waddanka maamulo hoosaad laakiin huwan qaab qabiil amaba ku shaqaynaya. Halka waxaa ka baxay dowladii dhexe oo umadda Soomaaliyeed u dhexaysay lana jaanqaadi lahayd dowladaha caalamka, kadib markii la asaasay maamuladaas kala duwan laga soo bilaabo burburkii beesha caalamku kuma aysan dadaalin sidii ay uheli lahaayeen qaran ama dowlad midaysa umadda waayo nin ulaboocale kuugu taagnaa markuu mugdi mugdi ama daldalool kaa arko waa iidiisii. Haddaynu fiirino waqtigii dagaalada sokeeye amaba xisbiyadu bilowdeen taakulaynta caalamku wuxuu ahaa militari waddankastoo kamida waddamada caalamka wuuxuu caasumadda Muqdisho soo dhoobay ciidan hal waddan, isaguna wuxuu ku deeqay lacag lagu taakulaynaayo ciidankaa isaga ah. Ciidanku nooguma imaan taakulo ee waxay noogu

yimaadeen in ay burburiyaan waddankeena xilligaas aan dowlad dhexe lahayn waayo madaxdoodu waxay rabeen in ay ka faa'idaystaan waddankaan barwaaqada taalo, hadday ka dhab ahaan lahayd in ay heshiisiiyaan amaba jecelyihiin dowlad dhexe oo midaysa umadda Soomaaliyeed, kana shaqaysa danaha umad waxay dhisi lahaayeen ciidan, waxay ka shaqyn lahaayeen amaba raadin lahaayeen dadka doonaya in ay waddanka dhisaan laakiin taasi madhicin oo dadkan si arxan la'aana ayay udili jireen ciidan ku sheegyo in waddanka guumaysi lagu celiyo ayay rabeen intay Soomaalidu isku mashquul santahay qabyaaladda iyo kala qaybsanaantana kujirto, xilligaas waddanku madaxweyne waalahaa laakiin waxaa ka awood badna caqabadaha ka jiray gudaha iyo dibadda oo awoodii dowladu majirin.

Madaxweyne **Cali Mahdi Maxamed** ayaa waddanka haystay waqtigaa **1991-1995**-tii, mahaysan awood dowladeed, waa waqtigii ay burburtay dowladdii awooda lahayd kuma guulaysan in uu waddanka sidiisii kusoo cesho waayo caqabadaha dibada iyo guduhuba way isi soo tarayeen.

Shan sano uu waddanku ahaa madaxweyne la'aan waxaa qabtay xilka madaxweyne ee dalka mudane Cabdiqaasim Salaad Xasan sanadku markuu ahaa 2000.

Madaxweyne Cabdiqaasim waxa uu xilka wareejiyay 2004-tii, ma ku guulaysan in uu mideeyo umadda Soomaaliyeed waayo waddanku xaalad adag ayuu ku jiray.

Madaxweyne Cabdullaahi Yuusuf Axmed ayaa loo doortay in uu noqdo madxweyne sanadku markuu ahaa 2004-tii isagoo helay cod aqlabiyad ah kana guulaystay musharixii la tartamaayay Cabdullaahi Cali Cadaw. Waxay doorashadu ka dhacday waddanka Kiinya sidoo kale kuma guulaysan in uu katakhaluso kala qaybsanaantii iyo qabyaaladdii 2008 ayuu iscasilay Cabdullaahi Yuusuf Axmed. Caqabadihii ka haystay gudaha iyo dibaddaba waqtigaan waa waqtigay soo shaac bexeen ururo diimeedka ku qaraabanaya halka ay maanta ka joogaan hal urur iyo kuwo ku daba gabanaya, intii kalese waa baabe'een.

Iyadoo arrinku sidaa yahay baa madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle dalka aan walaalaha nahay ee Soomaalida Djabuuti waxa uu dalalka shisheeye ka wadan ucuntamiwaysay, dabadeed wuxu taageero siiyay siday umidoo bilahaayeen umadda Soomaaliyeed. Sidoo kale

wuxuu sameeyay dib u dhiska dowlad Soomaaliyeed oo loo dhan yahy. Waxaa lawaday waddamo rabay dib uhanashada Soomaaliya waddanka Suudaan oo isguna markasta garabtaagnaa sidii ay umidoobi lahaayeen umadda Soomaaliyeed ayaa lagarab ahaa.

Wuxuu isugu yeeray dalka Jabuuti shirwayne ay uwada dhanyihiin umada Soomaaliyeed si loo dhiso dowlad dhexe oo awoodleh. Shirkaa waxaa qaybka ahaa ama goob joog ka ahaa Qaramada Midoobay iyo daneeyayaasha arrimaha siyaasadda geeska Afrika. Waxaa la doortay Madaxweyne Shiikh Shariif Shiikh Axmed doorashaduna waxay ka dhacday Jabuuti sanadku markuu ahaa 2009-kii.

Waxaa uu xilka wareejiyay 2012-kii markaas umadda Soomaaliyeed niyaayiro ayay qabeen iyo in markale dowlad dib ucuratay. Waxayna u dambaysay dowladihii ku meel gaarka ahaa.

Waxayna dowladdaan suurto galisay in waddanka gudihiisa lagu doorto madaxwayne.

Madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud waxaa lagu doortay waddanka gudihiisa 2012-kii ilaa uu xilka wareejiyay sanadku marku ahaa 2016 oo dad wax dooran kara baynu

ahayn xitaa waxa naloo ku goodiyay haddii aydaan is maamulin waa la'idin maamulin.

Waxaa xilligaas haystay caqbado dibada iyo dalkaba waayo dalkii oo qayb qayb noqday ayuu kusoo beegmay.

Waxaana soo idlaaday dowlado ku meel gaar ah. Soomaaliyana waxay noqotay dowlad rasmi ah oo adduunka oo dhan laga aqoonsanyahay.

Madaxweynihii ku xigay Xasan Shiikh Maxamuud waa madaxweyne Maxamed Cabdullaahi Maxamed Farmaajo. Wuxuuna la kulmay shacab aad u ayidsan, waxayna ahayd rajada keliya ee laqabay balse waxaa jiray siyaasado isdiidan oo caqabad ku ahaa waddanka taas oo ilaa hadda hortaagan in dalku isku filnaado. Walow xillikasta isbeddel imaanayay, nin walbana meeshii uu joogay meel ka wanaagsan gaarsiinaayay, dowladuna ahayd qori isku dhiib.

Dowlad walba waxay isku dayaysay sidii uga fogaan lahayd kala qaybsanaanta, qabyaaladda, quursiga iyo dib udhaca dadkooda iyo dalkooda balse wali waxaa jira qabqablayaal ama dad aan rabin horukaca dalka amaba waxaan dhihi karnaa waxay rabaan dano gaar ah ay leeyihiin noocay doonto ha ahaato dantaasi. Waxaa kaloo

jira iyaguna urur diimeedka ururada sheeganaya laakiin magacu waa dad ka halaabay waddadii saxda ahayd, si khaldana wax uraadinaya hadaan si kale udhigno burburka, kala qaybsanaanta qayb wayn ayay ka yihiin.

Maanta qabyaaladdu heer waxay gaartay in ay meelkasta naga gasho oo bulshada qaybeheeda kala duwan ay ku milantay. Waxyaalaha bulshadu wada leedahay waxaa maraynaa in uu qabiilka dadkatirsan kuu fududeeyo maahan in aysan jirin in maanta shaqsiga aanan lafiiriin, ma yahay kii kasoo bixi lahaa dhanka shaqada oo kale? Ma yahay ehelkeedii? Mase uleeyahay aqoon? Ma yahay aqoontiisa uu sheeganayo ama run ahaato ama been ha ahaato shaqsigan wuxuu shaqada ku yimi reer hebel. Maanta ardaydii markay dugsiga sare dhammeeyaan ku hoobteen badaha iyaga oo u arkaya in ay udhaanto shaqo la'aanta ka jirta waddanka.

Waddanka ka majirto shaqo la'aan ee cudurka ayaa shaqadii waddanka laga qabanaayay oo loo wada sinaa oo la rabay in qofkasta oo ina kamida booskiisii lageeyo inaga gashay. Wajirtaa mar uu qofku ku guulaysto shaqadaas ama booska loo igmaday laakiin Soomaalida way isdaba marin lahaayeen waxaa laga yaabaa caddaanka la

shaqaynayna in uu daba gal ku sameeyo oo qofkaas uu garab ka helo ajaanib.

Waa nasiibdaro qofkii waddanku ubaahnaa in uu qofkii Soomaaliga ahaa oo booskaas aan qabiilkiisa kaliya ufadhiyin uusan ugu shaqayn dadkiisa si siman, halka waddankiisa guul iyo horumarka gaarsiin kara. Waxay kaloo naga gashay qabyaaladdu waxbarashadii oo waxaa laga yaabaa waqtiyada deeqaha waxbarashada oo kale in ay jiraan musuqmaasuq baahsan. Labo arday oo aan isku mustawe ahayn ayaa waxaa laga yaabaa in ardayga mustawihiisu sareeyo lageeyo meel aan ku haboonayn meeshii uu mudnaa lana geeyo arday ka darajo hooseeya, meeshii uu lahaa ama xaqa ulahaa waayo muddo badan ayuu doonaayay ama ku haminaayay in uu gaaro meeshaas balse isaga majiraan cid qabiil ahaan ugu doodaysa amaba darajadiisa usoo celinaysa oo jooga meeshaas shaqada laga hayo.

Kuwaan kale waxay bixinayaan lacag amaba qabiil ahaan baa loogu fududaynayaa waqtigaas oo kale. Waxaad maqlaysaa waa loo iibiyay oo qofkaas muddo badan u soo jabaayay in uu gaaro natiijadaas waxay ku soo dhammaataa in laga siiyo waliba si fudud qof aysan isku si usoo

dadaalin, isku waqtina aysan ku bixin, hankiisi in uu ku jabo ardayga lagana yaabee in uu go'aan khaldan oo naftiisa haligaya qaato amaba uu waxbarashadii iyo hiigsigiisa nololeed uu ka dhaco. Marka aad dhahdid dhalinta maad shaqaysatid ama meel heblaayo shaqo ka doonatid hadalka ama jawaabta ugu horraysa uu ka bixinayaa shaqadu waa garabayshin, sidaas si lamida ayay waxbarashaduna unoqotay garabayshin xoogna ay nagu dhexleedahay qabyaaladdu waxaa laga yaabaa dadkaa meesha kawada shaqaynaya in aysan kuwada shaqayn dan guud laakiin waa laga badanyahay qofkaa aan qabyaalad ku shaqaynayn oo wax is dabamarinayn ama wuu iska aamusa isagoo ciishoon kana xun waxa meesha ka dhacay. Cidna wax waa ka hoos qaadi wayday oo hadalkiisuba magalayo amaba qofku shaqada wuu iskaga tagaa caqabaduna waa qabiilka.

Waxaa dhacda amaba jirta maantay meelkasta isugu yimaadaan umadda ku wada hadasha halka Af in ay ka hadlayaan ama ku hadaaqayaan ha ubad naadeen meelaha baararka ah reer hebel, reer hebel saanay noqdeen ama saana layiri keeray ahaayeen waayo sidaan kor kusoo xusayba liduu naga galay cudurkan.

Cudurkaan maleh dad kawacyi galiya bulshada hadday jiraana waa dad yar laakiin wuxuu leeyahay dad horumariya, Kashaqeeya isaga jecel in ay sii jirto qabyaaladdu, jecel in ay sii jirto kalatagsanaanta umadda Soomaaliyeed waayo haddaysan intaas rabin ma u oleleeyeen kamana shaqayn lahaayeen in ay qabyaalad dugaashadaan qaranimadiina ka cararaan.

Waxaa kaloo lagu ceebeeya mar marka qarkood qofka qabiilada kale anaga waxnamatare qabiilkiisu ushaqeeyaa macnaha meeshii waxaa ka baxday ama lasaaray qaranimada iyo isu tanaasul si loo gaaro umad Soomaaliyeed oo mida lana jaanqaada waddamada kale.

Qabyaaladdu waxaa ay nagaarsiisay in maanta qabiilkasta uu ordayo sidii uu uhanan lahaa xilalka kala duwan ee laga qabto waddanka halka kuwo kale aysan isku dayin, waxaa kasii daran, uma dayno qofkii waqtiga ladoortay si uu ugaarsiiyo meel fiican, waay arag meelo badan wax kasoo arkay garanayana meelaha dacfigu ku jiro laakiin taasi madhacayso waayo isaga waqtigiisii intan lee ku ekaa reer hebel kale waqtigoodii weeye.

Intaa saa ku jirno qadarinayno qabyaaladda rabno in aysan imaan caddaalad, sinnaan, wax isbeddela ma imaanayaan

waayo haddii aan laga run sheegin daacadna laga noqon in laga waantoobo lagana baxo qabiilaysiga taas micneheedu waa jug jug meeshaada joog.

Haddii umadda Soomaaliyeed waxaa lagud boon inay meel isugu gayso maskaxdooda, maalkooda iyo xoogooda kana fakari lahaayeen sidii loogu samayn lahaa inta aysan dhicin waxyaalaha masiibooyinka ah si hadhow ay uyaraato waxyeelada musiibadaas.

Nebiyullaahi yuusuf Callayhi Salaam ka hor inta uusan noqon boqorka ama suldaanka Masar, boqorkii markaa talada hayay ayaa kuriyooday todobo sacood oo buurbuuran, ayna xigaan todobo sacood oo caato ah. Waxay ku dheheen dadkii jeelka kula jiray boqorow Yuusuf ayaa riyooyinka fasira ee keen ugaynee, wuxuuna usheegay in uu ku riyooday arrinkan.

Nebi Yuusuf Callayhi Salaam wuxuu ku yiri boqorow todobada sacood oo buur-buuran waa todobo sano oo barwaaqo ah, todobada sacood oo caatada ahna waa todobo sano oo abaar ah. Intaa kadib boqorkii ayaa su'aal waydiiyay Nebi Yuusuf Callayhi Salaam maxaa samaynaa, si looga hortago todobada sanoo abaarta ah, waa in aanu kayd samaynaa inta aan ku jirno barwaa qadda si aan uga

badbaado todobada sano oo aynu ku guda jirno abaarta. Boqorkii taladii Nebi Yuusuf buu qaatay todobadii sano oo abaarta ahayd waxay uga baxeen kaydkii ay samaysteen kuna gaareen sanadkii barwaaqada ahaa.

Waxaan u soo qaatay qisadii Nebi Yuusuf Callayhi Salaam waa la samayn karaa kayd ka hor inta aysan dhicin masiibooyinku si looga baxo inta lagu gudajiro laakiin anagu ma aaminsanin in ay kayd la dhigto oo dadka intiisa badan waxay dhahaan war wixii dhacay Illaah baa garan, waa sax wixii dhacay Alle ayaa garan laakiin in lafeejignaado si aynaan hadhow u gab-gablayn aysana udhicin dhibaato baaxad leh naf iyo maaalba galaafata.

Inaga hadda waxaan haysanaa dowlad markaas aad ushaqaysa laakiin shaqadii dadwaynuhu way ma qantahay, xagee jirtaa fadhi ku dirir iyo ku hadaaqid qabyaalad dowladda laftarkeedu waqtigaas bay baraarugtaa meesha waxaa ka maqan in ay wada shaqeeyaan dowladdii iyo shacabkeedu. Lagana wada shaqeeyo waxkasta oo waddanka dib udhac ukeenikara ha ahaato qabyaalad ama musiibooyinka aan kasoo sheekaynaynay sidii aan uga hortagi lahayn waayo Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa (Gacmo wadajir bay wax ku qabtaan).

Dhaqanka

Waa maxay dhaqan?

Dhaqan waa hab ay leeyihiin umad meel kuwada nool aysan lawadaagin umad kale, dhaqankaasu ha ahaado mid fiican ama xun waana soo jireen ay umadaas ka dhaxleen umaddi ka horaysay.

Waxa aad usoo batay dhaqamo xun–xun oo noqday dhaqan caadiya, waxaa kamida marka ugu horraysa oo ay labo qof oo umadda halka af kuwada hadasha is baranayaan bacdamaa ay is nabdaadiyaan, hadalka kuxiga waa qolomaa tahay amase halkee degtaan, si uu u ogaado qofkaas qabiilkiisa. Waxaad kagaran kartaa oraahdaan xagee degtaan maantay in uu qabiilkasta oo kamida umadda Soomaaliyeed uu dago meel ugooniya laguna magacaabo, walow ay qabaa'ilada kale joogaan laakiin way ku yaryihiin. Waxaa kaloo kamida dhaqamada raad-reebka noqday oo loo adeegsado. Marmarka qaarkood marka aan fadhi ku diriyada fadhino amaba ay dhacaan **dagaaalada sokeeye**, waxaa caado noo noqotay in aan adeegsano labo eray oo aad layaabto, waayo sida ay dadku u aamineen oo qalbigooda uga dhaadhacday baan layaabay, labada eray waa laandheere iyo laangaab.

Qabaa'ilka xiniftu ku dhexmartay qabiiladay doonaan ha ahaadeen ayaa midkood la dhahayaa ma reer hebel oo laandheera ah bay reer hebel oo laangaaba hawaysteen.

Waan garan waayay reer hebel meeshay laan-dheeraha ku noqdeen, reer hebelka kalena ku noqdeen laan-gaab balse haddaan ufakaray labadaan eray waxaa ku macneeyay in ay dadku aysan micna ahaan ufiirsan ee qof iska yiri kadibna noo noqotay dhaqan kaas oo qabiilkii larabo in lacaayo ama labahdilo lagu dhaho.

Ani ahaan waxaan aaminsanahay ereyada sidaan loo adeegsaday maahan ee qabyaalad bay ka dhasheen waayo waxaan joognaa waa adduun, wuuna iska yaryahay oo laga tagayaa cidina majoogayso.

Laangaab: Waxaan u aqaanaa qofka ama dadka jidka xun qaada, camal aan acmaashoodu fiicnayn aakhirona janada lagawaayo kaas baan u aqaan in uu yahay laangaab waayo wax uu awoodo ayuu ka gaabiyay.

Laandheere: Waxaan u aqaan qofka ama dadka haysta wadada hanuunka, jidka Alle oo toosan, Alle wayne ku aadiyay kana soo baxay waajibkii Eebbe wayne saaray, kuna camal falay ka gadaal. Alle wayne ku abaal mariyay

janadiisa laandheere waa midkas helay janada Illaahay wax ka fiicana mijiraan.

Waxaa jira qabaa'il magac ahaan, mansab ahaan loo takooro, waxaa dadka badankiisu dhahaan waxay cuneen bakhti.

Waxaan waydiiyay dadka iga garaad wayn ama iga horeeyay garanayana taariikhda, qabiilkaan sidaa loo takoorayo ama mansabi khaldan ama aaminaada khaldan laga qaatay miyaysan qabaa'ilada Soomaaliyeed kamid ahayn awal ma meel kale ayay ka yimaadeen. Waxaa la iisheegay in ay kamid ahaayeen qabaa'ilada Soomaaliyeed laakiin sidaa loogu galay wax aan xaqiiq ahayn lana hubin in ay cuneen iyo inkale, xitaa hadday xaqiiq tahay bakhtiga ay cuneen hal qof oo kamida ayaa cunay ma in umadoo dhan ay cuneen buu ka turjumayaa.

Maya waa dhaqan xun dadkuna aamineen xitaa reerka waxay isku qaateen in ay sidaa dadku u aamineen yihiin waayo waxaan arkay qaar iyaga kamida oo waraysi laga qaadayo kuna jira hoggaankooda macnaha hadaladii waxaa ka dhadhansaday in uu aaminay waxyaalaha lagu sheegayo waayo wuxuu leeyahay waxaan nahay reer hebel, waxaana

nahay dadka hoos loo fiiriyo ama layaso, dadka Soomaaliyeed badankiisu wuu aaminsanyahay.

Waa dhaqan xun oo ka mida dhaqamada ay qabyaaladdu keentay waayo waa laga takhalusi lahaa haddii aysan qabyaaladdu heer ka ay maanta taagantahay may ahaateen ee umadda Soomaaliyeed mid bay ahaan lahaayeen.

Waxaa kamida iyaduna dhaqamada aan ka dhaxalnay qabyaaladda dagaalo sokeeye kuwaas oo ay hormuud utahay qabyaaladda. Maxaa yeelay waxaa la isku qabsanayaa waxyar sagaaro waa cabtaa iyo macabto, waa wax aan dad wada dhashay isku gumaadikarin oo ka bilaabatay labo qof marka xigtana isu beddelaya labo beelood. Waxaa ka dhasha khasaare aad ubaaxad wayn halka uu qabiilkasta oo kamida dadka isku haya ku faano reer hebel intaas baan ka dilay iyo intaas baan ka dilay.

Waa wax laga naxo yaa weeye cida aad usheegaysid waa cadowgaaga ka naxayn ee kugu farxay waayo waxba ka magalin Soomaali Soomaali kale dilaya.

Dhaqamada xun-xun oo aan qabyaaladda ka dhaxalnay waxaa kaloo kamida in ay dadkii wali aysan qalbiyadooda ka bixin dagaaladii sokeeye oo soo kala dhexmaray qabaa'ilada Soomaaliyeed waqtigii ay burburtay dowladii

dhexe ee waddanku lahaa. Waxaana sii adkaynaysa ama sii haynaysa in aysan dadka wali ka bixin ama ay soo xasuustaan in ay wali ku jirto qabyaalad ama cudurkaan aan wali dawadiisa la helin.

Waxaa kaloo iyaduna kamida dhaqamadaas in uusan waddanku gaarin horumar horay usocod waayo haddii wali aan taaganahay qaabkii lagu soo dooranjiray oo ahaa **qaab qabiileed** ee aynaan ugudbin hal qof iyo hal cod waxay katur jumaysaa in aynaan lajaanqaadi karin doorashooyinka ka dhaca waddamada kale ee rabno in aan gaarno, waxaa jira iyaguna in ay maqan yihiin qayb kamida ama gobolo kamida Soomaaliya taas oo maqnaanshahooda aysan suuroobikarin doorosho hal qof iyo hal cod kuwaas oo sheegnay in ay ka go'een Soomaaliya inteeda kale amaba ay yihiin qaran lamida kan Soomaaliya.

Dhaqanada xun ee qabyaaladdu waxay nabartay in meelaha lafariisto sida meheradaha iyo meelaha kale ee dadku iskugu yimaadaan ay ka sheekeeyaan qabyaalad waxaa loogu magacdaray fadhikudir halkaas oo aan inta badan looga hadlin ama lagu soo qaadin sidii uu waddanka horay loogu qaadilahaa ama looga takhalusilahaa cudurkaan.

Dib uhabaynta dhaqamada dadka

Waa maxay dib uhabayn?

Dib uhabayn waa iyada oo dib udhis lagu sameeyo wax burburay oo larabo in dib loo yagleelo dib uhabayntaasi waxay noqon kartaa in lagu sameeyo dadka dhaqankooda ama dalka sida dhismaha iyo dhammaan meelaha looga baahanyahy dib uhabayn intaas iyo ino ka badanba waa lagu qeexi karaa, fikirkaaga waad ku darsankartaa Insha Allaah.

Haddaba sidee dib uhabayn loogu samaynkaraa dhaqamada xun-xun ee umada islaamka ka jira dhexdooda oo ay keentay qabyaaladdu iyo kuwo kaleba?

In labeddelo dadka dhaqankooda way adagatahy waayo dhaqanku waa waxay dadku dabci ahaan ula qabsadeen, haddana marka aan ka eego dhanka kale umadda islaamka haddii wax sheegista wanaagsan loo badiyo ayna helaan hoggaamiye ama hoggaamiyaal saara nidaamka khaldan iyagana ay garab ku siiyaan, qofkasta uu wacyigalin meesha kaga aadan uu sameeyo. Waxaan aaminsanahay in dib uhabayn lagu samayn karo umaddaan dhaqankoodii uu ka halaabay dillaaga dahsoona uu ka dhigay dad dhaqan xun oo aysan horay ulahaan jirin xitaa waxay yeesheen

dhaqamo aysan awal lahayn oo ay wadamo kale leeyihiin oo ay keentay casriga cusub iyo dhibtiisa ama aaladaha cusub waayo way ka qaybqaatan halaabista dhaqamada, dhanka kale way ka qaybqaadan karaan dib uhabaynta ama hagaajinta dhaqamada ama caaddada xun ee dilaagga dahsoon ka dhalatay.

Marka dhaqan labeddelaayo waxa jirta mar-mar in loo isticmaalo awood dhaqaale ama mid ciidan waayo marka aan sidaa leeyahay dhaqanka beddelistiisu caadi maahan ama waqti dheer ayuu qadanayaa, waxaan dhigikaraa haddii si midnimo ah loo wajoho oo inta dhaqamadaan aan si aysan saamayn ku yeelan Insha Allaah.

Dawladnimo

Waa maxay dawlad?

Dawladnimadu waa in uu waddan leeyahay qaanuun ama sharci iyo dhammaan hay'adihii fulinta, ayna udhan yihiin dhammaan dadka meeshaas dagan.

Qabyaaladu wax saamayn ah ma ku yeelatay dawladnimada?

Haa maxaayeelay Soomaaliya waxay burbur ahayd ama dawlad la'aan ku dhawaad soddon sano, waxyaalaha saamaynta ku yeeshay ama caqabada ku noqday waxaa asaas u ah ama saamayn ku yeelatay qabyaalad waayo markii qabiilkasta oo kamida umadda islaamku uu rabo meel ugooniya ama dawlad ugooniya samaysto, waxaa dhexda ka baxay ama burburtay dawladdii dhexe ee latartami lahayd waddamada caalamka.

Qabyaaladu waa curyaamiyaha in uu waddanku ka baxo qaab-qabiilaysi oo curyaamisay dawladnimadiina umadda Soomaaliyeed ilaa maanta waxay waddanka uga hirgali lahayd in uu ugudbo doorashada axsaabta badan.

Waxay wali haystaan ama aysanba rabin in ay ka baxaan cudurkan daashaday maskaxdooda oo aan ugu yeeraynay qabyaalad.

Qabyaaladu waxay ay ureebtay majirto umadda Soomaaliyeed, meel aysan kasoo galin majirto kasii darane ma aysan lahayn cid kawacyigalisa dadka laakiin waxay leedahay dad u ololeeyay cudurkaa.

Umadda Soomaaliyeed waxay dawlad la'aan ahaayeen amaba aysan lahayn dawlad latartanta dawladaha caalamka ku dhawaad soddon sano. Markii ay burburtay dawladdii dhexe waxaa uu waddanku galay xaalad ay dadkii Soomaaliyeed qayba meel aaday oo uu samaystay maamul gooniya.

Taasi oo sababtay in aysan dhismin amaba aan lahelin dawlad dhexe ee dhammaan umadda Soomaaliyeed ku midaysan yihiin.

Horumarkasta oo caalamka ka jira, waxay kaloo noo aamineen in aan nahay dad aan is hoggaaminkarin qabyaalad dagaalo sokeeye in ay ku jiraan mooyee aysanba suurtagal ahayn in ay hagaagto dawladnimadooda, waxay kaloo noo aamineen inuu waddankeenu yahay waddamada caalamka ugu musuqmaasuqa badan oo xitaa marmarka qaarkood tusaale ayay noo soo qaataan qaybtood hoggaamiyaasha caalamku. Heerkaa waxaa nagaarsiiyay

waa qabyaalad taas oo in kaladaad sanaan, xumaan in ay ushaqayso mooyaane aanan wax kale laga filayn.

Qabyaaladu intii aan kugu dajirnay amaba uu waddanku uu galay qabali in wax lagu qaybsado, maanta waan haysanaa wax soo saarkii ama mirihii ka dhashay kuwaas oo aan ahayn kuwo lamahadinayn. Waxaa ka dhashay maahan kuwo cidkasta oo naga mida ka qarsoon waayo heerka ay nagaarsiisay waa heer aan fiicnayn nagana baabi'iyay waxyaalo badan in dib loo yagleelona ay noqotay caqabad ay hortaagantahay qabyaaladdu.

Qabyaaladu waxay naga hortaagan tahay in aan yeelano dawlad wanaagsan oo lajaanqado dawladaha lamidka ah, waana waxa na burburiyay aanan wali garan la'nahay qaabkii aan uga bixi lahayn taasoo aan waxba noo reebin, waxaan ku til maamay cudur aan lagaran dawadiisii waayo waa gumaade ama baabi'iye waxkasta oo dan noo ah ama horay usocod noo noqon lahaa managaranayno waxyeelada cudurkaan ama inagoo garanayna baa si ula kasa ugu dhaqmaynaa waxyaalo badan oo aan kasoo sheekeynay ayay naga burburisay qabyaaladu, waxay nagayaysiisa heer aysanba umadda Soomaaliyeed karajo go'aan dawladda ay ku midaysan yihiin. Waxyaalaha hortaagan

waa in aan wali kujirno qabali ama qabyaalad waxyeelada nagasoo gaartay managa dahsoona hadda waanu kusii soconaa oo rabnaa.

Qabyaalad iyo kala qaybsanaan ay dalal shisheeye qaybtood mas'uul ay ka yihiin iyaga oo adeegsanaya dadyow nagamida kuwaas oo aan fiirinayn horumarka, midnimada dadkooda iyo dalkooda laakiin ay umuuqdaan kuwo lagu adeegsado oo loo adeegsado kala qaybinta waddankooda dawlad la'aanta waddankooda iyagoo la siinayo xooga amaba ay umuujinayaan in ay iyaga lagarab yihiin balse aysan rabin in uu waddankooda ka baxo dhibaatada iyo kala qaybsananta dadkooda waayo waqtiyada laga doodayo maqaamka waddanka horay usocdkiisa waxay ku doodaan inay kasoo qayb galaan waddamada caalamku oo iyagu markay ka doodayaan maqaamkooda, makala qayb galaan waa maya maxayeelay damiirkaas iyagu malaha oo mar horay meel iska dhigeen hadday sidaa tahay maxaa inaga ina ku dhajiyay oo aan uga tanaasuli' la'nahay beesha Caalamka in ay waxkasta oo dhexdeena ah goob joog ka ahaato?

Taas waxaan uga jawaabayaa waa in aynaan ahayn dad isku kalsoon oo anagii ayaa kalsooni bidayna dadyow kale

oo rabna in ay goob joog ka noqdaan waxkasta oo inaga danteena ah halka ay iyaguna ka fakarayaan qaybtood sidii aan ugu jiri lahayn kala qaybsanaan, dawlad la'aan iyo waxkasta oo waddanka dib udhac ukeenaya waayo iyaga dantoodu waa in aan intaas midna lahelin oo ay tooda wataan.

Horumar

Waa maxay horumar?

Horumarka waa wax kasta horay uqaadaya nolosha aadanaha iyo bay'ada ay ku nool yihiin sida dhaqaalaha, waxbarashada, nabadda, dawladnimo wanaagsan IWM.

Wax saamayna ma ku yeelatay qabyaaladu horumarka dadka iyo dalka Soomaaliyeed?

Haa way ku yeelatay qabyaaladu horumarka waddanka, maxaayeelay ku dhawaad soddon sano ayaanu ku jirnay, burbur iyo horumar la'aan dhinac kasta taas oo ay sababtay qabyaaladdu inta uusan nagu habsan cudurkaan aan ugu yeeray ama aan ubaxshay, dilaaga dahsoon, waxaanu ahayn dad iyo dal dhinac kasta ka horumarsan, kadib markii ay dadkii Soomaaliyeed uu ku dhacay cudurkan.

Waxaa burburay wax kasta oo dadka iyo dalka horumar uhorseedi lahaa, waxaana bilowday in ay kala cararaan waayo waddankii barwaaqo sooranka ahaa wuxuu isu beddelay meel la isku gumaado oo ay ka bilowdeen dagaalo sokeeye oo ay hor kacaysay qabyaalad, waxaa bilaabatay in laboobo dhammaan waxyaalihii ka dhexeeyay umadda hantidii shacabka oo ay dawladdu gacanta ku haysay ayaa la dhacay oo boob lagu bilaabay.

Waxaa bilaabatay in uu qofkasta oo kamida umadda Soomaaliyeed uu u cararo meeshii uu ka helay gabaad nabadgalyo iyo nolol fiican taas oo dadkii Soomaaliyeed ka dhigtay ilaa haddana in ay ahaadaan qaxooti ku nool waddamada shisheeye.

Waxaa jirin dawladii kala hagi lahayd ama hormuudka unoqon lahayd horumarka waddanka, waxaa hoos udhacay dhaqaalihii waddanka oo nala ku daray waddamada faqiirka ah waayo dagaalada sokeeye ayaa keenay in ay dadkii Soomaaliyeed qayba meel ku rafaaday xanuuno ay kamid tahay nafaqadaro, gaajo iyo waxyaaalo badan ay ku habsadeen intaan ku jirnay dagaalada sokeeye horumar aan ku tilaabsano daaye waxaan ahayn dad lacaawimo dhinac kasta. Waxaa laga yabaa in dalalka nacaawinaya uu waddankaygu ka barwaaqaysan yahay laakiin aynaan ahayn dad kamidaysan horumarka waddankooda, waxaan aaminsanahay haddii ay dadkayga umidoobi lahaayeen midnimada, horumarka dadkooda iyo dalkooda in iyaga caawimaad laga soo doonan lahaa oo ay iyagu ku jirilahaayeen dalalka caawiya dalalka tabaalaysan maaxaayeelay waddankeena wuxuu leeyahay khayraad

dabiiciya oo Illaahay kumanastay laakiin aan wali laga faa'idaysan.

Waxyaalaha uu dal iyo dadkiisu ku horumaraa waxaa kamida in uu waddankiisu leeyahay dawlad wanaagsan oo ka shaqaysa horumarka, horay usocodka waddanka taas oo ka fog qabyaalad, qaybsanaan iyo waxkasta oo waddanka dib udhaca ku keenikara, waxbarashadu waxay kamid tahay waxyaaalaha uu ku horumaro waddan taas oo ah maantay mida la'isku dhaafay waayo waxbarashadu waa hagaha ama ifiyaha horumarka dadka iyo dalka, waddan kasta oo leh dad waxbarashadoodu tahay mid aad utayo leh ama aad usaraysa.

Waxaa lagu tilmaamaa in uu waddankaas uu kujiro waddamada ugu horumarsan maxaayeelay qofka waxbartay waa kan waddanka wax ku soo kordhinkara dhankasta ha ahaatee.Waxaa kaloo kamida horumarka dalka uu leeyahay dhaqaalaha waddanka oo sara u kaca, wuxuu horumar uhorseeda waddanaka iyo dadkiisa sidaa la ajligeed markii uu burburay ayaa dhaqaalihii waddankuna hoose udhacay oo aanu ku biirnay waddamada faqiirka ah waayo waddan ay ka socdaan

dagaalo sokeeye, dhankasta wuu ka haray horumarna gaarimaayo waayo waa meel ay ka jirin xasilooni.

Wax horumar ah haka filan, maxaayeelay markii dadkii wada dhashay uhoggaan sameen cudurkaan xun ee meelkasta nagagalay ayaan dhinac kasta ka harnay.

Waxaa kaloo iyaduna lagama maarmaan u ah in ay umidoobaan oo meel ugasoo jeestaan dhammaan umadda halkaas degan, waxkasta oo carqalad galinaya amaankooda, midnimadooda iyo waxkasta oo dib udhac ku keenaya waddankooda iyo dadkooda kana fakaraan sidii ay horumar iyo barwaaqo, ugaarsiin lahaayeen dadkooda iyo dalkooda sidii ay ugaaraan ama ay uga saramaraan waddamada horumaray.

Horumarka kajira waddanku marba marka kasii dambaysay wuu siificnaanayaa, waxaana sabab u ah dawladnimada wanaagsan iyo isku xirnaanshaha dawlada iyo shacabkeeda waayo haddii aysan wada shaqayn, kana wada shaqayn horumarka waddanka lama gaari karo horumar oo midkasta waxaa loo baahan yahay in uu qabto kana soo baxo howsha kaga aadan horay usocdka waddankiisa.

Waxyaalaha dib udhigaya ama horumarka waddanka saamayn ku yeeshay waa qabyaalad iyo awood qaybsiga waqtiga lagu gudajiro doorashooyinka halkaas caqabad ayay ku tahay horumarka.

Sidaa awgeed waxay ku dadaalnaa oo muruq iyo maalba ku bixinaa sidii ay uga tuurilahaayaan qofkaan aysan rabin una keeni lahaayeen qof ay ka helaan danahooda khaaska ah. Tan iyadu waxay nagu tahay carqalad wayn dadka intiisa badana way moogyihiin waayo haddaysan mooganayn, waxay dhihilahaayeen nagalabaxa faraha waayo anaga ayaa garanayna midka aan udooranayno qofka na hoggaaminaya laakiin taas madhacdo oo qolyahaan mida ufududaysay in ay la shaqeeyaan qofka ay danaynayaan waa inagii oo aan mid ahayn, qabiilkasta oo naga midana u ololaynaayo sidii qofka markaa usharaxan uhanan lahaa jagadaas loowada ordaayo, taas fursad wayn bay utahay waayo way ka faa'idaysanayaan sidii ay uhelilahaayeen midka ay doonayaan in uu qabto jagadaan dantoodana ka helayaan.

Maxaayeelay marabaan horumarka waddanka iyagu waayo waa waddan kuyaala meel istaraatiijiya leh macaadiin, shidaal badan kuna yaala marin muhiim ah. Waa waddan

markii loo eego waddamada kale kaga sareeya meelo badan aysan iyagu haysan waana sababta ay udoonayaan in ay helaaan qof uhoggaansan tooda si ay wax uga helaan barwaaqada iyo nimcada Eebbe ku galadaystay waddankeena.

Nabaddu waa hormuudka horumarka taas oo uusan waddanku gaari karin waayo Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa (Nabad la'aan waa nolol la'aan), nabadgalyo la'aan waxba maqabsoomi karaan sidaa owgeed wax horumara magaarikaro waddan amnigiisu hooseeyo ama aanba lahayn nabadgalyo wuu ka haraa saaxada horumarka, waana mida anaga aanu ku hoosayno waayo anaga ayaa isaga soo horjeedsanay qabiil qabiil isku jarnay.

Waxaa kaloo uu waddanku ka dagi la'yahay waa waddamo waaweyn oo iyaguna dhinacooda kawada qaska iyo dibin daabyada umadda Soomaaliyeed waana tan waddankeena ku keentay horumar la'aanta iyo in uu ka haro saaxada waddamada horumaray. Nabaddu waa tiir udub dhexaada, waana tan sababtay in ay wada noolaadaan Illaahay idankiis umad haddii lawaayo waxaa meesha ka baxaya dhammaan waxyaalihii asaasiga u ahaa waddan iyada uu

waddankaas dadkiisu ku dhammaadaan qaxooti iyo waxyaalo kaloo lahalmaala umadda Soomaaliyeed.

Waxaa udheer nabadgalyo darada waana ukala safanyihiin qabiil-qabiil taas oo ay iyada laftarkeedu ka qayb-qaadanayso daganaanshiyo la'aanta waddanka waayo iyagii baa waxaa soo kala dhexgalay dagaalo sokeeye xitaa heer waxay gaareen ay kala shakiyaan iskuna soo dhawaan Karin. Taas qayb wayn bay ka tahay horumar la'aanta waddanka waayo waddan dadkiisu wadajiro ayaa horumar gaara asii waddan dadkiisu ka lajiro horumar magaaro in uu dib udhaco oo qaxooti iyo in ay dadkiisu ku noolaadaan ama hoos fariistaan umado waddankooda horumarshay kana baxay qaybsanaan iyo qabyaalad.

Haddaysan intaas inoo noqon cashar kaas oo aan naga qarsoonayn oo aan garanayno faa'idadiisa iyo khasaarihiisa waanu ka taanaasulikarnaa sida qayrkeenba yeelay.

Waxaa jira in ay nagu jiraan arrintaas aan fiicnayn oo uu dadka iyo dalkuba soo maaraayay amaba qaarkeed aan wali ku jirno in ay wax ku helijireen walina doonayaan in ay wax ku helaan.

Haddii aan ka xoroobi lahayn qabyaalada waxaan ahaan lahayn dad ka hortaga caado qaatayaasha sokeeye iyo kuwa shisheeyaba ee mida ay iyagu ka faa'idaysanayaan waa midnimo la'aanta umadda, waa iyaga oo umadda Soomaaliyeed kala garan la' qabiil iyo qaran waayo markii ay udoodaan kii danbiga kaagalay qaranka dawladda iyo dhammaan shacabka Soomaaliyeed loogu doodo qabiil, taasi iyaduna waxay noo horseeday inaanu kusii jirno dilaaga dahsoon iyo dadkii danaha gaarka ah naga leh.

Nabaddu waa tiirka horumarka iyo horay usocodka waddanka sidaa awgeed horumarka waddanka iyo nabadgalyadu way isku xiran yihiin oo haddii nabad lawaayo horumar lama helaayo maxaayeelay dalalka dariska ayay horumariyaan, haddii aan anagu baqayno oo aan ucararayno meel amni ah waxa qaska nagu wadana ay yihiin wiilasheenii oo damiirlawayaal u adeegaya ay waddankii burburinayaan, maxaan isaga qaban la'nahay.

Waxaa lagayaabaa in ganacsaduhu dantiisa khaaska ah ka dhex arko dawlad daciif ah oo aan awood ulahayn in ay xakamayso waxa uu ka ganacsanaayo hadday ahaan lahayd tayada iyo badqabka waxa uu waddanka soo galinaayo iyo

bixinta xaqa uu waddankiisa ku leeyahay si loo sugo nabadgelyadiisa iyo fududeynta ganacsigiisa.

Horumarka waddanka waxaa asal u ah waa nabadda, haddii aanan la helin nabad iyo xasilooni way adkaanaysaa in la helo horu socod iyo hiigsi dhaqaale.

Cutubka 2-aad
Dilaaga Dahsoon

Waa maxay dilaaga dahsoon?

Dilaaga dahsoon waa cudurkaan nadaashaday ee qabyaaladda waayo waxaan magacaan ugu bixiyay waa dilaa dahsoon naf iyo maalba naga baabi'iyay. Kumanaan qof ayaa udhimatay halka ay kumaan kalena ku dhaawacmeen dagaalo sokeeye. Maanta waan ka yara roonahay dagaaladii sokeeye laakiin waxaa jira in uu cudurku si dahsoon udilay qalbiyadeenii hadaanahay umadda Soomaaliyeed, qalbiga wixii gala lagama saari karo oo way adag tahay, in Alle wayne ka saaro maahane dadkuna ay fahmaan qaabkii ay qalbigooda uga sifayn lahaayeen.

Dhaawaca dahsoon oo uu qalbigeena ugaystay waa mid halis ah, waana sababta aan u aqoonsaday in ay qabyaaladdu tahay dilaa dahsoon taas oo nagadishay qalbiyadeenii, waana mida aanu maantay meelna la gaari la'nahay. Waayo waxaan nahay dad qalbiyadooda kala dhinteen oo uu cudur kala dilay xitaa dilaaga dahsoon wuxuu kala gooyay midnimadii umadda Soomaaliyeed ay lahayd waayo midnimadu waa tan aan kaga bixi karno

dilaaga dahsoon waa qabyaaladda maxaayeelay waxaa kala irdhoobay dad walaalo ah oo wada dhashay. Waxaa sababay waa dilaaga dahsoon oo wali qalbigooda ku jira waayo waxa la isku laayay waqtigaan ku jirnay burburka, waana waqtiga sida aadka uxun loo adeegsaday qabyaaladda, kala qaybsanaanta, marka ay dadku kaaga sheekeeyaan ama aad akhridid taariikhda dadkeena ay soo mareen waxaad galaysaa dareen murugo ah way

Isgumaadeen si arxan la'na oo dhammaan qabaa'ilada Soomaaliyeed isku gaysteen. Ani ahaan maqabo in reer kaliya si gooniya loo gumaaday ee waan isgumaadnay dhammaanteen oo waddankeenina ka dhignay bohola galeen, dad shisheeye say rabaan kayeelaan.

Soomalidu waa isgumaaday, waxaa kale oo jira in ay jiraan dad shisheeye oo raba kala go'a umadda Soomaaliyeed doonayn midnimadooda.

Waxaa iyaduna jirta in uu qalbigooda uu wali ku jiro cudurkaan aan ugu magacdaray dilaaga dahsoon walow aysan ka midaysnayn haddana waa intabadan waxa ku jirta waxyeeladii uu noo gaystay dilaaga dahsoon waayo inta rabta midnimo Soomaaliyeed wayyar tahay oo mabadna.

Sidaa la ajligeed aad ayay dadka qalbigooda ugu wayn tahay waxyeeladii na soo kala dhexmartay oo wali shaki ayaa lakala qabaa oo waxa ay ka baqayaan in dib loo laabto waayo waa dilaa dahsoon oo qalbiguu sixun ugu beermay oo insi wada jira meel looga soo wada jeesto mooyaane si kale nooga ma bixi karo.

Maqnaanshaha Soomaali Waqooyi Galbeed waxwayn ayay kaga jirtaa horumar la'aanta dhanka dowladnimada waayo masuuroobayso hal qof iyo hal cod in ay waddankeena ka dhacdo waayo waa dadkeenii oo wax katabanaysa dhigooda balse ubaahan in laysku soodhaweeyo dadka wada dhashay.

Waxaa jira dad ku howlan in ay isku soodhaweeyaan umadda kala irdhoobay haddana waxay ubaahan yihiin oo keliya in lagu kaabo waayo aragnimo, iscafis, iska xaalmarinta wixii dhacay oo dhan iyo in laysku calool fiyoobaado.

Waddada keliya ee horumar waara lagu gaari karo waa helidda dowlad quwad leh oo xoogan kana shaqaysa sidii ay isugu keeni lahaayeen umadda Soomaaliyeed ee ku rafaadsan dalalka dibaddiisa, qaxootigana ku ah iyo dalka gudihiisaba.

Isku duubnimada waa mida looga gudbi karo qabyaaladda, qolaqolaysiga, nin jeclaysiga IWM, waana in qof kasta uu la dagaalamo arrimahaas oo dhan si loo gaaro horumar waara oo aan ula tartano dowladaha caalamka.

Ka xorow dilaaga dahsoon

Waxaan horay uga soo sheekeynay qabyaalada ama dilaaga dahsoon, waxyeeladiisa iyo sida uu ugalay umadda Soomaaliyeed. Hadda waxaan wax ka fiirinaynaa sidii wax looga qaban lahaa ama aan is leeyahay waa looga xoroobi karaa, waxaan u arkay tusaale waan tijaabiyay, sidii aan uga xoroobilahaa waayo waxaan ahaa ilmo kusoo barbaaray, la kulmay ama ku dhashay waddan aan xaaladiisa laga sheekaynkarin.

Waxaan dhashay iyada oo ay dawladii dhexe oo xooga lahayd ay burburtay iyadoo waddanku ku jiro xaalad dagaalo sokeeye, qabyaalad, bayhoof, qaxooti, dhac, boob, qaybsanaan iyo waxyaalo badan oo xanuun badan aanan ka sheekaynkarin oo dadkii markaa noolaa kureebtay urug oo markay ka sheekaynayaan aad ilmaynaysid. Waxaa waddanka ku shaqaysanaayay dalal shisheeye ileen anagii qoryo ayay isugu kaaya dhiibeen oo qaarkeenba meel ayuu isu gumaadayay xalaado aad ufool xun bay ahaayeen heer aan maanta gaarnay in ay xaaladahaas iyo kuwo kale ay qalbiyadeenii ka bixi la'yihiin waayo si arxandaro ah baan isku gumaadnay oo magicii qabiilka in aan dhahno ma reer

hebel igadaa tay na marsiyeen ha igu soo qaadin, waxaa si dahsoon qabyaaladu udishay qalbiyadeenii.

Qiso ku dhacday shaqsi kamida Soomaalida la kala dilay oo wax badan nabaraysa sida looga xoroobi karo qabyaaladda iyo sida ugu wanaagsan oo looga bixi karo

Aniga markii aan yaraa waxaan aad udanayn jiray amaba ujeclaa in layga sheekeeyo taariikhda waddankayga, dadkayga xiliyaday soo mareen, waxaan kaloo danayn jiray in aan akhriyo dhagaysto taariikhda waddankayga uleeyahay waan jeclahay waana raadshaa.

Taas waxay ii horseeday in aan wax ka barto waddankayga waana tan igu dhiirigalisay in aan iimaansado waddankayga, kadibna aan lawadaago dadkayga kuwa hadda jooga iyo kuwa soo socdaba, waayo dadkaygii waxay aamineen in laga bixi karin sababtoo ah waa umad qalbigoodu uu si dahsoon udilmay ayaan nahay.

Waxaan bartay waxyaalihii xumaa ee dadkayaga soo kala dhexmaray, waxaan wax ka ogaaday waqtiyadii mugdiga ahaa ee waddankaygu soo maray, waxaan akhriyay oo dib ubaaray bal mugdigii aragtaye bal raadi waqti aan soo marteen rayn rayn iyo farxad, midnimo iyo wadajir runtii iyada waan helay wayna isoo baxday. Ani ahaan markii aan

arkay labada taariikhood oo aan soo marnay iyo tan aan maantay ku jirno oo laga joogo burburkii soddon sano in aan wali ku jirno waxaan waqtigaan dhashay la kowsaday oo ahayd dagaalo sokeeye, qabyaalad oo si xun noodishay, dawlad la'aan, tafaraaruq iyo waxyaaalo badan oo umadda Soomaaliyeed gadaal udhigay.

Waxaan ufikiray si togan waxaan is iri maxaa keenaya baa isleedahay waxyaalahaan? Yaa mas'uul ka ah? Waxaa isoo baxday in uu mas'uul ka yahay cudurkan dilaaga dahsoon, waxaan misana ka fakaray ani ahaan sidee uga gudbi karaa, taariikhdii wanaagsanayd oo aragtayna ugu noolaan kartaa kadibna, waxaan ka fikiray markaan taydii xasiliyay sidee ugu gudbin kartaa dadkaaga cudurkaan kula qaba si uga bogsoodaan aysan kuwa soo socdana aysan saamayn ugu yeelan.

Wiilka ayaa yiri waxa I helay

1. Waxaan naftayda ka dhaadhiciyay ama ugu sheekeeyay in aysan dhacdadii xanuunka badnayd dib ugu laaban, una raad raacin waayo iyada ayaa dib iigu celinaysa in aan kusii jiro dilaaga dahsoon oo aanan ka xoroobin.

2. Waxaan badsaday in aan raadiyo, baaro quruxdii midnimdii ay dadkayagu lahaayeen si aan taas uga bogsado

oo aan taas usoo xasuusan oo tan markii dadku igu dhahaan saasaan soo marnay ay iiga sheekeeyaan aan ana uga sheekeeyo dhacdadii ka fiicnayd oo aan soo marnay waayo taas ayaa ii horseeday in aan mugdigii ilaawo saan mar kale iftiin iyo midnimo uhelno.

3. Waxaan mar kasta naftayda ku rajo galiyaa in ay mar noo soo laabanayso dhacdadii aadka ufiicnayd oo waddankaygu soo maray wallow aan ku noolahay waddan ay dhalintii aan isku marka dhalanay ay rajo beeleen oo waqtiyada aan ka hadlayno xaalada waddanku ku jiro iyo sidii uu mar kale dib ugu soolaaban lahaa ay iyaga dhankooda rajo beel noqdeen halka aan anigu wali rajo ka qabo inaan mar arko dadkaygii oo mar kale mida, lana jaanqaaday caalamka Insha Allaah in aan mar indhaha saaro. Waxaan aaminay markaa oo rajada isii dheerayd in aan ka baxno xasuusta dhacdadii xumayd raad reebkeedii waa in aan midowno kana midawno qabiil-qabiil iyo waxyaalihii aadka ufoosha xumaa.

4. Waxaan go'aan ku gaaray in aan naftayda u carbiyo sidii aan uga xoroobilahaa dilaaga dahsoon waayo si dahsoon ayuu qalbigayga udilay dadkaygana waa ilamid. Waxaan bilaabay qaabkii aan uga bixi lahaa si aan bal naftayda uga

xakameeyo maadaama aan u arkay in ay tahay qabyaaladdu waxa kala dilaya umadda islaamka ah. Waxaan joojiyay in aan ka hadlo qabiil, qabyaalad iyo waxkasta oo aan u arkaayay in ay dadkayga kala goynayaan, dadaal dheer kadib waxaan ku guulaystay in aan mabda'a ka guulaysto naftaydu iyada oo dadkayga wali cudurkaan qalbigooda uu ku jiro, Allena igula garab galay in aan ka adkeysto, kuna adkaysto sidii aan ugaari lahaa hadafkayga kaas oo ah in aan ka xoroobo dilaaga dahsoon Illaahay mahadii weeye.

5. Waxaan is bar bardhigay faa'idadiisa iyo khasaarihiisa, waxaa iisoo baxday in uusan aakhiro iyo adduunba uusan lahayn faa'iido khasaaro mooyaane, waayo wax ay ku dhammaadeen kumaanan qof ku dhaawacmeen kumanaan kale, dilay qalbiyadii dadkayga, marka waxaa iisoo baxday in aanan tan qaadan qalbigaygana ka sifeeyo oo aan had iyo jeer ku dadaalo sidii aan uga bixi lahaa waana ku guulaystay.

6. Waxaa kale oo aad iga caawiyay in aan qabyaalada kaxoroobo in waalidkay, igu barbaariyeen in qaranimadu ka fiicantahay qabiilka waayo hadii gurigayaga laga aaminsanaan lahaa amaba uu qiimo ku lahaan lahaa

qabiilku runtii majeclaadeen qaran iyo inaan midnimo raadiyo, jeclaado rajo wanaagsana ka yeesho.

7. Waxaa kaloo oo iyaduna kaga xoroobay in waqtiyada aan kujiro waxbarashada macallimiintu ay aad noogu dhiirigaliyaaan qabyaalada qurunkeeda iyo qiiqeeda waxay macalimiintaydii ay aad noogala dardaarmi jireen in aan ku habsaamin qabyaalad iyo qabiilka sida xun loo qaatay waayo waxay nagu dhihijireen waxaa tihiin aqoonyahanada dadka iyo dalkuba sugayaan.

Waxaan idinka rajaynayaa in idinkuna I dhiirigalinaysaan in aydaan ku hab saamin qabyaalad iyo waxyaalaha dadkeena kala dilay.

Aad baan ugu farxijiray oo waxan ubaahana in aan ka gudbo oo aan mar indhaha saaro iftiinkii ay Soomaaliyi lahayd. Waxaan isku dayi jiray in aan kasii durko, waxaan kaloo isku arkaa in aan ahay jiilka maanta waddanku ubaahanyahay, lagana rabo in ay waxka qabtaan ama ka qayb qaataan sidii uu waddanku dib ugu soo laaban lahaa waqtigii wacnaa iyo say Soomaali ahaan jirtay barisamaad. Waxaa kaloo ii fududeeyay in si fudud uga guulaysto waxaan ogaaday xaqiiqda dhabta ah, waxaan baarbaaray caalamka siduu ku yahay waxaa isoo baxday caalamka

laftirkiisu in ay soo mareen xaalado uu waddankaygu ku jiro oo kale, qabyaalad kala qoqobnaan, is dil, dhac iyo horumar la'aan.

Waxaan kaloo ogaaday sidii ay uga baxeen oo ay umidoobeen. Waxaa jirtay dalalka Talyaaniga iyo dalka Jayna in ay soo mareen marxaladaha na haysta, waxaa jirtay mar aan dhagaystay taariikhdooda in ay markii ay arkeen dhalinyaradoodu xaalka uu dadkooda iyo dalkooda ku sugan yahay. Waxay bilaabeen filimaan ay ku dhiirigalinayaan dadkooda iyaga oo uga sheekaynaya in ay xaalada ay maanta ku jiraan ay tahay mid aan fiicnayn horumarna gaarsiinayn dhalintaas waxay kaloo samayn jireen suugaan ay ku cabbirayaan say dadku uga kacaan habkaan khaldan ay ku jiraan ayay suugaanta waxay ku cabbiri jireen qaabka ugu wanaagsan ay uga bixi lahayd, way jireen waxyaalo badan oo soo hor istaagay laakiin akhirkii danbe way ku guulaysteen.

Markaan arkay ayaan waxaan go'aan saday in aan anaguna ka bixikarno waayo wuxuu qayrkaa sameeyay adigana waa samaynkartaa, waxaan go'aansaday in aan anigu horta dawoobo waayo haddii aniga wali cudurku ihayo cidkale madawaynkaro.

8. Waxaa iisoo baxday iyadana in ay jiraan in ay dadka shisheeye oo nasiinaya macaawinada iyo wixii lamida ay yihiin kuwo noo soo shaqatagay oo aysan ahayn kuwo si daacada noogu shaqaynaya laakiin dantoodu ay tahay in aan kusii jirno qabyaalad, dagaalo sokeeye, dhac iyo boob waayo madoonayaan in uu waddankan xasilo. Haduu xasilo xagee bay ka helayaan waxay doonayaan oo dantooda ah? Waxaa kaloo jira dad naga mida oo damiir laaweyaala, lana shaqeeya kuwaas waayo haddaysan haysan meel ay kuu soo maraan oo aan ahayn dad kamidaysan horumarka dadkooda iyo dalkooda waayo haddaa nahay dadka midaysan afkaarta horumarka cidna nama soo handadeen waayo tiirka adag ay ummadi leedahay waa midnimo.

Dadka aan ku tilmaamay in ay yihiin damiir laaweyaal markii aan firiiyay iyagu danta ay kaleeyihiin dadka iyo dalka waxaa iiga muuqatay in ay yihiin kuwo kaliya fiirinaya dantooda khaaska ay siinayaan dadkan shisheeye marka ay waddanka qasayaana huwanaya shaati qabiil, kuna burburinaya dadka iyo dalka wuxuu horumar ku gaari lahaa markaan taas arkay aad baan ugu sii dhiiraday in aan wax ka qoro cudurkaan. Waxaan ka damqaday sida ay

dadka shisheeye uga gudbeen dilaaga dahsoon iyo sida ay markii ay ka gudbeen ay anaga noo soo handadeen, kuna tashadeen sidii ay waddankeena uguumaysan lahaayee.

Waxay ahayd waqtiga aan markasta dib ugu laabto xilligii gobonimo doonka SYL saddex iyo tobankii dhalinyaro waxay mudanyihiin in lagu daydo, guumaystaha in taysan afaarihiisa galin ayay waxay sameeyeen awood shacab si ay awooda shacab waynaha Soomaaliyeed usameeyaan, waxay ka hortageen oo dadkii ka saareen qabyaalada, kala qoqobnaan iyo in ay ka hortagaan waxkasta oo iyaga lidi ku ah, aakhiiran way ku guulaysteen in ay umadda Soomaaliyeed mideeyaan, markii ay midoobeen ayay waxay ku soo noqdeen in ay iska caabiyaan, iska saaraan guumaystaha, Illaahay ka sokow waxaa usuura galiyay waxay ahayd in ay umidooben ka hortaga guumaystaha .

Markaan daalacdo taariikhda wacan ay noo reebeen ayaan waxaan go'aansaday in aan ka ka baxo qabyaaladda waayo hadduu natiijo leeyahay waagas baan arki lahayn natiijadiisa ama fiicnaantiisa waayo SYL waxay horumarsheen in ay dadka kasaaraan waxaan xun oo ah qabyaalada iyo qaybsanaanta waana tan ay guusha ku gaareen Illaahay kasokow, haddaysan ku guulaysan in ay

dadkooda mideeyaan maantay waxaan ahaan lahayn dad ku jira guumaysi wali.

Hadaa baratid kitaabka Illaahay ma ka helaysid in uu qabiil qabiil ka fiican yahay amaba ka sareeyo suuradaha ka hadlaya qisooyinka Nebiyadii Illaahay (Callayhi Salaam) Alle wayne ku leeyahay oo qabiilkasta leh markaan ka eegno Anbiyadii Illaahay qisooyinkooda, majirto mid eegi jiray qabaa'ilka kala sarayntiisa ilaa midkasta wuxuu ugu baaqi jiray diinta islaamka, waana tan uu Illaahay noo abuuray jin iyo insiba gaal iyo islaamba haddaan soo qaato Aayada dhahaysa **(Illaahay wax kale uma abuurin jin iyo insiba in ay caabudaan mooyaane) suratu daariyaad).**

Waxaa jirtay iyaduna Nebigeena Muxamed khaatimul Anbiyaa Salalaahu Callayhi Wasalim Nebigii ugu danbeeyay Nebiyada ma jirin mucjisadii lasiiyay in la siiyay Nebiyada kale Callayhi Salaam. Waqtigii Nebigu uu uhijrooday Madiina halkaas wuxuu la kulmay qabiilo walaalo ah oo is dagaalaya, Nebiga Callayhi Salaatu Wasalaam labadaa qabiil oo is dagaalaysay wuu heshiisiiyay oo heshiis dhex dhegay, waxaa la kala dhihi jiray (AWS IYO KHASRAJ). Waxaa jirtay in

Suubaneheenu Callayhi Salaatu Wasalaam uu walaaleeyay (Ansaar iyo Muhaajiriin). Ansaar waa walaalihii ay uyimaadeen muhaajiriinta oo ah saxaabadii Rudwaanullahi Callayhi la socotay Nebigeena, waa saxaabadii Nebiga kala soo hijrootay Maka, Ansaarna waa saxaabadii loogu yimi Madiina.

Hadaan nahay umadda Soomaaliyeed maantay tusaale ayay noo noqonaysaa waayo waxaan ka midnahay umadda ugu fadliga badan umadaha, waxaa nahay umaddii Nebi Muxamed Salallaahu Callayhi Wasalam taas anaga oo og ayaanu raacaynaa gaalo aanba aqoonsanayn Rasuulkeena Muxamad Salalaahu Callayhi Wasalam wax ay iyagu dhoodhoobteena ku kala go'nay oo waxaan moodnay wax fiican waxaa kaloo ku dhaqanaa dhaqankii jaahiliga ahaa waayo iyaga ayaa lagu yaqaany qabyaalad iyo xumanteeda.

Maanso ka hadlaysa dilaaga dahsoon

Dadyahow Soomaaliyeed

Dad islaama baynu nahay

Dagaalo sokeeye iyo

Dhac iyo boob baa na dilay

Damiirkii aan lahayn

Dadnimadeenii luntoo

Danayste dan gaara wata

Damac shisheeyaa na hoday

Daryeel dawladii waddana

Dadkeenaan uwadda dhamayn

Dilaaga dahsoon ayaa

Quluubteenii dilloo

Umadyahay Soomaaliyeed

Wanaagu waa wada jirkeena

Cutubka 3-aad
Guumaysi

Qaab nooceeya ayaa maskaxdeena loo guumaystay?

Waxaa jirtay in aan soo marnay guumaysi toosa oo ay na guumaysan jireen dalal shisheeye dib ugu laaban mayno oo wax badan baan kasoo sheekeeynay.

Guumaysi muxuu yahay?

Guumaysi waa iyada oo lagaa guumaysto waxkasta oo waxtar kuu leh iyada oo lagaa weecinaayo waxyaalaha dantu kugu jirto oo waddanka iyo dalkaba horumar uleh ama larabo in la suuliyo waxyaalaha waddankaas uu uleeyahay dhaqan ahaan sida diinta, dhaqanka soo jireenka ah, beddelid afkaaraha iyo ra'yigooda iyadoo laga ka xaynayo waxyaalahay aaminsanaayeen, lana barayo waxyaalaha kale oo lidi ku ah.

Qeybaha guumaysiga

Guumaysi toosa iyo guumaysi aan toos ahayn. Guumaysiga tooska ah waa kan uu qofku toos kuu soo weerarayo isaga oo kuu adeegsanaya awood dhaqaale, ciidan iyo wixii lamida. Waa guumaysi toosa waayo wuxuu kaga duwanyahay kan tooska ahayn waa muuqdaa, waxyaalaha laguu adeegsanayo ayaa waxay yihiin wax toosa adigu sidaa rabtid u arag ama uga falceli laakiin waa waxaad arki kartid.

Tusaale haddaan usoo qaato guumaysiga tooska ah waddankeenu wuu soo maray.

Maxaayeelay waddankeenu wuxuu soo maray xilli aan intaas uu guumaysigu caanku yahay aan qarka u istaagnay in ay naga suusho waayo awood dhaqaale mahaysan, mid ciidan, dad afkaar wanaagsan oo looga hortago, mahaysan dad cilmi leh, diiniga maahe ee maadiga ama casriga ay gaareen.

Waqti fog ayuu guumaysigu bilaabay, waxaa usoo halgamay oo intaas diiday waa halyaygii Soomaaliyeed Sayid Maxamed Cabdule Xasan wuxuu waxbarasho u aaday shiikhu dalka Masar, wuxuu wax kasoo bartay Jaamacaddii Asharu Shariif waxa uga horreeyay macadyo

kale oo diiniya. Sayid Maxamed Cabdulle Xasan wuxuu ka tagay waddanku isagoo aan guumayste joogin laakiin aan xadaarad muuqata lahayn, shiikhu wuxuu aad ugu haminaayay in uu waddanka horumar gaarsiiyo dhanka diinta iyo dhan walba. Markuu ka soo dagay bada, kana soo dagay doontii yarayd ayuu la kulmay dad caddaan iyo Soomaali dadka baaraysa, waxaa lagu yiri keen canshuurtiisa alaabta? Suu intuu cabaar aamusay buu yiri keen adigu canshuurtii aad waddankaan ku timid?

Wuu yaabay oo iska aamusay, saa kii udhexeeyay baa wuxuu yiri keen canshuurtii alaabta, war waxaan goormaad bilowdeen? Markuu arkay kii Soomaaliga ahaa in aanan laloodin karin ayuu yiri waa wadaad waalan Sayid Maxamed Cabdulle Xasan waa meeshii uu uga baxay ma wadaadkii waalnaa af ka ingiriisiga waxay ugu yeeraan waa (**Mad Mullah**).

Shiikhu wuxuu dagay masaajid waayo waagaas meelaha ugu fiican uu madarasadu ka bixi jirtay waxay ahayd masaajid, wuxuu bilaabay in kutubtii dadka umariyo baraarujiyo isaga oo muxaadarooyin ku saabsan diinta islaamka iyo waxay farayso uu dadkii baray, wuxuu kaloo ka baraarujinjiray guumaysiga dhulkooda haysta, way u

adkaysan waayeen wadaadka waxa uu rabo. Waxaa isu qabsanwayday dantay lahaayeen iyo wixii uu layimi, waa cayriyeen oo laga saaray magaalada waqtigaas buu bilaabay in uu ka baxo magaalada, Berbera deegaano agteeda ayuu dagay, waana waqtiguu bilaabay in uu ladagaalamo guumaysiga. Kuma soo koo bikaro taarikhdii uu ka galay guumaysiga Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, waxaa jira buug laga qoray taariikhdii Sayidka.

Sayidku ma haysan wax awood ciidana, awood dhaqaale ah laakiin wuxuu lahaa awood diinta islaamka ayuu soo bartay, waana mida uu ku dagaalamay oo Illaahay buu kaa shaday, waxaa kaloo usahlay in uu guumaysigu ahaa mid toosa oo aan maskaxda laga guumaysan, waana tan usahashay in uu ka guulaysto ilaa aan xornimada ka qaadanay oo uu calankeenu ka babaday dhulkeena hodanka ah, waana rayn rayntii farxadii iyo curashadii ay hor ka cayeen dhalintii SYL. Waa waqti farxadeed buu ahaa kadib guumaysi laga soo bilaabo waqtigii ay la dagaalamayeen Sayidka iyo ciidankii daraawiishta iyo waxaana intaa kasii waday dhalintii SYL.

Waxaa isku hayay ama mabda’a mideeyay wuxuu ahaa in ay ka xoroobeen qabyaalad iyo in ay qabiil-qaqbiil meel

iska dhigeen oo dadkiina ka wacyigaliyeen. Maysan haysan awoodii loo isticmaalay mid lamida laakiin waxay haysteen maskax caafimaad qabta iyo qalbi nadiifa oo ka badqabta caadifad iyo waxkasta oo ay u arkayeen in uu waddankooda kala qaybinaayo, waana mida keentay in aanu caalamka kagaarno meel sare.

Guumaysiga aan tooska ahayn waa adigoon ogayn in la guumaysanayo waxaad isku qabtaa in aad xortahay laakiin waxaa jira meelo badan oo loo adeegsanaayo maskax laakiin aadan ogayn sida waxyaalaha aan ku soo sheegnay in uu caan ku yahay guumaysigu sida horumarka waddanka dhan kastaba ha ahaatee. Marka kan way adagtahay in aad iska caabin samaysid haddii aadan helin xeelada guumaystuhu isticmaalayo taas haddaan isticmaalno waan ka guulaysanaynaa. Waxa aad arkaysid wuu kaaga fududyahay, waxaadan arkayn waana waxyaalaha ay ku kala duwanyihiin labada eray micnahooda.

Tobanka Dhib Ee Haysta Waddanka

Qowm kasta oo dunida ku nool waxaa lagu ibtileeyay imtixaan ugooniya, waddamada qaar waxaa lagu imtixaamaa dabeylo, baraf, kuleyl, abaaro, cuduro, dagaaalo, faqri, dhulgariir iwm. Waddan kasta waxaa ugooniya dhibaato uu la daalaa dhacayo oo uu xal uwaayay. Soomaalida waxaa lagu imtixaamay waxyaalo badan oo mustaqbalkeedii mugdi gashay. Waxaana nagu habsaday waxyaalo badan oo ay ka midyihiin:

1. Qabyaalad: waa aafo nagu habsatay haddii aan nahay Soomaali, waana cudurka keliya oo aan daawo u la'nahay waana mid noo keenay dhibaato aad uweyn oo midnimadeenii kala jaray, dadkii isku ahaa xasabada, xididka, xigtada midba midka kale ma arki karo sababo qabiil awgiis. Qabiilku waa astaan ama sumad laysku garto oo Alle weyne noo jideeyay asii qaabka aan udhignay ay tahay wax khaldan oo aan haboonayn.

Qabyaalad micnaheedu waa qab, iil, quursi, qurun, dulmi, caddaalad daro, amni xumo, gaajo, qax, qowlaysato, diin la'aan, aano iwm. Haddii intaas oo macno kulansatay qabyaalad sow ma ahan aafo, dhib iyo imtixaan nahaysta sow dhib iyo qax ma ahan? Sow quursi iyo halaag ma ahan? Diinteena suuban waa qaadacday oo xarimtay,

waxaa la faray dadka in ay iska dhaafaan xumaha iyo qurunka, qofkasta oo ku faanana waxa u dambayn doona qoomamo iyo ciil.

Qoys laba bohooduu dhahaa ways qatalayaane
Kanaa quudka loo badiyay buu qabar ku siiyaaye
Walaalaha midka qoon dhex dhigay sow qabiil ma ahan.

Waxay ka shalaayidoonaan maxaa qabiil afka kuu gashay, maxaad qabyaalad umiciinsatay? Maxaad dulmi usamaysay? Adiga oo saas ucataabaya ayuu malagu kuu imaan haddii aadan ka toobad keenin. Qarnigaan aan joogno dhammaan quruumaha waxay higsanayaan dayaxa, qeyrkeena baddaha ayaa bogcado laga yeeshay annaguna seeftaan isku sidanaa, dadkana waan iskula sareynaa. Waxaana iska burburinay dawladdeenii quwadda lahayd waxaana ku beddelanay qabiil.

Qarnigaan aan joognee samada lagu qadaynaayo
Qaruumaha dayaxa gaaray waa qeyrkeen oo kala'e
Sababaha quree naga dib dhigay sow qabiil ma ahan

Waxa uu sababay in maanta ummaddii Soomaaliyeed ee xididka iyo xigaalka ahayd ay qoloba meel degto oo jaangoysato, ayna dhahdo haddaanu nahay qabiil hebel deyrkaan baa noogo'an sow dhib iyo rafaad ma ahan?

Waxay keentay in qof kasta oo aqoonyahan ah ama bulshada indhaheeda waxaa loo qalay ama qudha looga gooyay qabiil hebel baad ka dhalatay aano aan dhammaan baa naga dhaxaysa.

Qaawada lakala qaaday iyo hebel qurgoyntiisa

Aanada qarsoon ee mar hore qallacay reero

Utun aan qaboobayn marnaba sow qabiil ma ahan

2. Qaad: Waa aafada labaad ee inaga reebtay qeyrkeen, waxa uu naga dhigay dammane hurdaaya oo aan lahayn hadaf iyo yool fog. Waxa aan raamsanaa qoryo lagu daray sun iyo dacar lagu waraabshay biyo kiimiko lagu qooshay oo waxay ka samaysanyihiin daliil cad aynu uhayn ayaan har iyo habeen raamsanaynaa sidii xoolihii. Dhammaan raggii fekeri lahaa oo qabka iyo hanweynida lahaa waxaa asaagood ka reebay oo halkaa dhigay waa qaad oo caafimaad daro iyo cibaado la'aan meel la yuruura oo haddana isla qab weyn oo ku haya annaa laandheeraa iyo dunida annaa ugu sareeya.

Waa duul maskaxdoodii la doorshay oo aan dareen lahayn, waa ruux xilligu marqaamku gaaro daaro iyo dabaqyo dhisaaya qumalaylka habeenkiina qaaradaha adduunka lug ugu jibaaxa, kolka uu dhacana qarow aan dhammaan iyo riyo baas lagu ibtileeyo, waxa uuna habeen kaas oo dhan la dagaalamayaa habar dugaag oo dabo iyo dacal ka quusaya.

Intaas oo rafaada iyo dib udhac ayuu qaadku sababay haddana madayno daroogadii baanu qabatinay oo qeyrkeen waan ka harnay. Waxa ku burburay qoysaskii Soomaaliyeed kadib markii ay dayacmeen caruurtii, xaasaskii iyo maamulkii qoyska.

Waxaa abwaankeenii weynaa ee Abshir Nuur Faarax (Bacdadle) ka tiriyay gabay dheer oo taabanaya dhinacyo badan oo quseeya qaadka iyo dhibkiisa, qoys burburka iyo halaagga.

Qayil oo cun reerkiina qadi qaadow adigaa le'

Qoys laga dhixiyo qaaqlanimo qaadow adigaa le'

Qoys dumiyo qayliyo huruuf qaadow adigaa le'

Qaraabo iyo ehelaan la tebin qaadow adigaa le'

Is qandiiri kana qoomamee qaadow adigaa le'

Dugaag lagu qarwoo kugu qulqula qaadow adigaa le'

Bisad ku quustay dabadeeda qabo qaadow adigaa le'

Qarjaf sayntu inay kuu tiraa qaadow adigaa le'

3. Wax dhacay: Dhibka saddexaad ee nahaysta waa wax dhacay oo waddanka la soogasho, waana musiibada ku habsatay ummadda. Ma jrto dawlad quwadleh oo hubisa tayada waxa waddanka soogalaya badqabkooda iyo in ay yihiin wax dadka caafimaadkooda uroon. Waxaa waddanka la keenaa raashin dhacay kaas oo aanba la hubin tayada iyo waqtiga la soo saaray, waxayna ganacsatadu ka soo

beddelaan waqtiga taas oo keentay in dadku gataan hadhowna ay helaan cuduro aan la aqoon, midkastana ay hesho xanuun ay ka qaadeen cunnada dhacday.

Markii ay cunnadii ku xanuunsadeen waxay utageen dhakhaatiir kuwaas oo inta badan ufurtay isbitaalada in ay lacag ka sameeyaan, qofkiina waxaa loo dirayaa baaritaano ciidaa ka badan. Qofkii waxaa loo qorayaa bac daawooyin ah oo dhacay balse la cusboonaysiiyay waqtiga soo bixidda. Markii uu bukaankii qaato dawo dhacday, cunno dhacday iyo biyo aan saafi ahayn, ma helayaa bukaan kaas caafimaad uu ku naaloodo? Su'aashu waa maya sida uu maalin kasta dhakhtar ugu tagaayo ayuu ugu dambayn ku dhiman ama unoqon bukaan socod.

Haddii aan dawlad jirin

Madax daacadiyo

Digtooro aqoonleh

Ganacsato damiirleh

Doolar eeganaya

In dawo dhacdiyo

Bukaanka lagu daldalo

Sow dow ma ahan?

4. Dulmi: Dadku markii uu damiirku ka dhinto waxaa ku bata dulmiga, waxayna dadka awoodda lahayn u

addeegsadaan ficilo gabood fal ah oo aan jiritaankooda meel uga dhacay. Dulmiguna waa shey laka raahsaday diinteenuna ay macnuucday in qof bini'aadam ah la duudsiiyo xaqiisa isagoo loo sheeganaayo awood dawladeed, mansab iyo gardaro. Waana musiibo ku habsatay Soomaalida. Waxay isku dulmiyeen qabiil, waxay isku gowraceen qabiil iyo waxay isku xasuuqeen qabiil.

Dulmi ninkii doona

Daandaansi raadsha

Xaqa dadka duudsiiya

Daalim weeye

Daa'in hanaga qabto

5. Tahriib: Tahriibku waa aafooyinka helay ummadda Soomaaliyeed ayuu qeyb ka yahay, waana musiibo aan ku weynay malaayiin dhallinyaro Soomaaliyeed ah kuwaas oo ku baaba'ay badaha, saxaraha iyo waddamada reer Yurub. Waxaana laga macaashaa dhiigga shacabkeena iyadoo laga samaynaayo lacago badan.

Tahriib waa in aad ka tagto deegaankaagii aad udhalatay adoo usocdaala waddan kale si ay halkaas uga helaan deganaan iyo nolol. Waxayse dhallinyaradii ku dhammaadeen badaha iyagoo raadinaya nolol dhalanteed ah oo aan sal iyo raadtoona lahayn. Waxayna la kulmeen dhibaatooyin tira badan oo aafeeyay dhallinyarada Soomaaliyeed. Tahriibka dadka waxa uu ka midyahay fal

dembiyadeedka ugu culus ee adduunka ka dhaca, waxayna waddamada adduunka si isku mid ah ula dagaalamaan tahriibka si loo joojiyo dadka muhaajiriinta ah ee la kulmaya dhibaatada tahriibka iyo nolosha ciriiriga ah ee ay la kulmi karaan inta ay socdaalka ku jiraan.

Dhallinyarada Soomaaliyeed waxay ka midyihiin dadka ugu badan ee sodonkii sano ee udanbeeyay tahriibka ku jiray iyagoo isaga tagaya amnidarada, shaqo la'aanta xun ee dalka ka jira, waana sababta ay utahriibeen.

6. Sadbursi: Sadbursigu waa in aad qaadato wax aadan xaq ulahayn, waana in aad qaadato qof kale waxa uu leeyahay adoo umaraya waddo aan sharci ahayn oo ka baxsan diinta islaamka. Sadbursigu waa shay aan sharci ahayn waxayna ka mid tahay dhibaatooyinka ugu culus ee Soomaali haddaanahay nagu habsaday. Qabiil kasta waxa uu doonayaa in uu helo wax uusan xaq ulahayn. Waxay rabaan in ay ugu sadroonaadaan, dadyowga kalena ay wax dheeryihiin weliba way ku faanaan in ay helaan wax aysan lahayn.

7. Musuq: Musuq-maasuqu waa in aad qaadato hanti dadweyne sifo aan sharci ahayn. Waana dhibaatooyinka ku habsaday Ummadda Soomaaliyeed ee ragaadiyay.

8. Diinta oo aan lagu dhaqmin: Alle wuxuu ummadda ukeenay koonkaan in ay caabudaan oo Alle keliya ugu sujuudaan cidna aysan ushiriik yeelin. Dadka Soomaalida

waxaa lagu tirshaa adduunka dad wada Muslim ah oo Sunni khaas ah, waana dadka ugu nasiibka badan oo Alle kawada dhigay Muslim sunni ah. Dunida islaamka inta badan waxay diinta ku gaadhay Seef iyo dagaal asii Soomaalida uu ku soo gaaray ganacsi iwm, waana dad sifudud diinta uqaatay waxayna daliil utahay in ay yihiin bulsho jecel diintooda kuna ad-adag.

Waayahaan danbe waxaa soo batay oo beddelay dad sheeganaya islaam oo diinta uyaqaan say tahay hadday ahaan lahayd Qur'aanka iyo axaadiista balse halka musiibo ee haysata waxa weeye in aysan ku dhaqmayn. Waxaad arkaysaa rag waa weynaaday oo hoteelada, guryaha, maqaaxiyada, carwooyinka, meelaha shaaricyada ah, goobaha lagu qaxweeyo, garoomada, fagaarayaasha aflaamta lagu daawado iyo meelaha lagu dalxiiso iska fadhiya iyadoo salaadii taagantahay.

Qofka islaamka ah waxa keliya ee isku xira isaga iyo Alle Subxaana Wataacaa waa salaadda haddii salaad lagaa waayo waxaad jartay xariga Eebbe, waxaana tahay munaafiq saafi ah. Haddii salaadii aan ku ciyaarayno marna aan tukanayno marna aan iska daynayno sow ma haboona in aan Alle dartiis utukano, aakhiradeena ushaqeysano oo Alle ka cabsano.

Dhallinyarada da'yarta ah waa in ay ka fekeraan maxaa dunida laguu keenay? Maxaad unooshahay? Maxaad kugu waajib noqday? Maxaad adi dunidaan ku soo kordhin kartaan?

Dhibka ugu weyn ee nahaysta waa dadkii oo Alle xarigiisii jaray, wax kasta oo laga xaram yeelay iska xalaalaystay, dhiigii baanu banaysanay, sinadii baanu quruxsanay, dhaca, boobka hantida ummadda ayaan ka macaashnay, haddaba sow ma haboona in aan iska dayno waxaas oo dhan oo Alle dartiis utoobad keeno si dhibkaan, qaraxyadaan, abaarahaan, musiibooyinkaan nagu habsatay Alle weyne nooga kor qaado.

9. Mukhaadaraad: Waxa uu ka midyahay dhibaatooyinka daashaday da'yarta maanta jirta oo mustaqbalkoodii ay ku waayeen xashiishad ay cuneen, taabuug, calaq iyo koolo. Waa nasiib daro anagoo joogna qarnigaan in ubaxyadeenii ay isticmaalayaan daroogo oo ganacsato Soomaaliyeed ubadkoodii ukeenayaan iyagoo eeganaya shillimaadkooda yar ee ay helayaan. Waa aafo khatar ku ah dadka haddii aan si wadajir ah uga hortagin dhibkaan Alle hanaga koryeelee.

Waxaan ku waynay dhallinyaradii maanta dalkooda wax usoo baran lahaa, dalkooda dib udhiskiisa ka qeyb qaadan lahaa, waddaniyadda iyo daljaceylkooda maanta lagu aflixi lahaa ayaan iska siinay balwad teeda ugu daran ee caalamka laga mamnuucay.

10. Jahli: Bulsho waxay ku dhisantaa aqoon, haddii aan wax aqoona aysan jirin bulshadaasu waxay ahaa naysaa kuwo weligood nolosha ka dhacsan wax kasta oo loo sheegana iska qaata oo aan dib u eegayn. Waxa ugu weyn ee haysta Soomaalida waa aqoon yari, haddii ay aqoon lahaan lahaayeen maaanta dalal kale uma dawarsadeen, dalkeenana ma noqdeen baylah ay cid waliba soo hawaysato.

Soomaaliya kama jirto dawlad awood uleh in ay xakamayso goobaha waxbarasho ee ganacsiga loo furtay oo aan lahayn waxbarasho tayaysan laguna dabaqayn dalkeena kheyraadkiisa, waddaniyadda iyo baahiyaha dalka kajira. Dalkeena kama jirto waxbarasho midaysan oo dalkeena oo dhan laga hirgeshay, qolo kasta ama nin kasta waxa uu ka fekeray sidee ku heshaa lacag oo aad ushaqeysataa? Inta annagu saas ufekerayno waa adagtahay in aan waddankeena dhibka haysta uusan ka baxayn haddii aan wax laga qaban si wadajir ahna loo xallin mashaakilkaan.

Juquraafi ahaan waddanka Soomaaliya

Haddaan wax ka sheego dhulka Illaahay siiyay umadda Soomaaliyeed barwaaqada taala, waxaana u kala saaraynaa biyo iyo biri.

Majiro dal haysta barwaaqada uu leeyahay dalka Soomaaliya ee waa dal dadkiisa isfahmi waayeen. Dalka Soomaalya waa waddan ku yaala dhanka waqooyi bari qaarada Afrika oo dhan-keedda bari geeska uu ugu dhuuban yahay Raaso-Casayr oo waagii hore loo aqoon jiray (geeska carfoon) dhan keeda dhulka waxaa lagu aqoon sadaa soohdinta mala awaalka ah ee ka bilaabata baab **Al-Mandab** ee marta dhanka galbeed haradda-hawaas kuna dhammaata dhanka koonfureed isku darka wabiga taana ama Ganaane iyo badwaynta Hindiya.

Badka uu ku fadhiyo dalka Soomaaliya waa **637,657km** oo isku wareeg ah, wuxuu leeyahay dhul aad ubaaxad wayn oo Rabbi isku dheelitiray dhankasta markii aan ka fiirino dhinac walba, wuxuu Rabbi ku manaystay dhul ku fiican beerashada, ku fiican dhul leh macdan wali aan lataaban, shidaal, wuxuu kaloo leeyahay in ay dhirta qaarkeed ay kasoo baxaan beeyada fooxa oo aan waddan kale lahayn

haduu leeyahay isaga ayaa uga hormarsan waana waxyaalaha uu caanka ku yahay. Wuxu leeyahy hawo dhex-dhexaada aan qaboobayn kulayna, lajeedka khooriga gacmeed waxaa garab socda sil-silsilada Qarar buuralay gaaraysa **6000** cagood, waxaa kamid ah buuraha layiraahdo Hadaaftimo Iyo Naaso-hablood silsiladaasi buurralayda ah ee garab socota khooriga gacmeed waxay dhanka Bari ku hoobataa agagaarka taaga Raaso-casayr ee badwaynta hindiya, dhanka kalena iyadoo si qunyar sare ukacdo waxay martaa ooggada galbeed waxayna ku dhammaataa dooxada sare ee wabiga Shabbeele iyo Manna.

Dhulka Soomaalida degantahay waxaa loo kala qaybiyaa juquraafi ahaan:

Afar gobol ay ku yaalaan dhanka Waqooyi iyo Galbeed, afarrna ay ku yaalaan dhanka Koonfur iyo Bari.

Gubban: Waa gobolka deexda khooriga Cadmeed cimiladiisu aadka u kulushahay, waxaa ka baxa geed gaabka, daranta dhawr biloodna waxa ay ku haboon tahay daaqa nugulka iyo ariga, geelna waa uu ku darmaa daaqa.

Ooggo: Waa dhulka sare ee buuralayda ay dabayshiisa iyo cimiladiisa meel dhexaadka yihiin, waxa uu ku haboonyahay beerashada dalagga qaar kiis sida sareenka, canabka, masaggadda, tufaaxa iyo dalagyada aan ka bixin dhulka hoose.

Dooxo: Waa gobolka dooxada ah ee u dhexeeya buuraha iyo ooggada ay ku rogmaan.

Biyaha buuraha dushooda ka yimaada daawiyada roobka sida (Tog-dheer) iyo (Togga-Nugaaleed), gobalkani waa gobalka ugu wanaagsan xoolaha gaar ahaan (Lo'ada iyo Gamaanka).

Hawdka: Waa gobolka ciida Cas ee kaynta badan oo quracda iyo cawskuba ka baxaan, waxa uuna dhammaantiis ku haboon yahay daaqa iyo xoolo dhaqashada.

Gobolada Koonfureed iyo Bari ee la xiriirta xeebaha badwaynta Hindiya muuqaalkoodu waa uu ka duwan yahay gobolada Waqooyi iyo Galbeed, dhulka taagga ah si qunyara ayuu dhulku ugu soo hoobtaa tan iyo masaafo dhan **300km.**

Dhulka gobaladani waxa mara wabiyo ka soo askuma buuralayda galbeed iyo koonureed kuwaas oo anan gurin hadii roob aysan helin xitaa.

Dhulka goboladani waxa uu Juquraafi ahaan uqaybsamaa si guud ahaan afar qeybood:

Xeeb: Waa gobolka xaalufka ah ee bada xiga oo ay ka abuurmaan bacaadka guur-guura oo ay biyaha badda gawgeedda ku hakadaan oo aysan ka fogaanin badda.

Deex: Waa gobolka Carro-cadka ah ee lajeedka xeebta oo cimiladiisa ay aadka u kulul yihiin gobolkani waxa dareemada, daranta, xarunta iyo geed gaabka, wuxuu ku haboon yahy dhaqashada ariga, geelana waa uu ku darmaa in halkaasi lagu dhaqo.

Waxaa kaloo xaggaaga lagu beeri karayaa Digirta, Qaraha, Waambada iyo Masaggada.

Dhoobey: Waa gobolka Carro-madawga ah oo dhooqada wabiyada hareerohooda ay taalo, waxaana ku butaaca biyaha wabiyada goortay buux dhaafaan waxa uu leeyahay dhir jiq ah oo ay ka dhashaan qaniinka ama hawd ayay noqotaa, waxaana ka dhasha bahalo dadka cuna sida

ka neecada iyo xayawaanaadka ku dhagga xoolaha. Gobolkani waxa aad uu ugu haboonyahay beerashada, daaqa iyo waraabka, hadii laga babiyo qaniinada bahalaha yar yar oo ay ka mid tahay kaneecada ee dadka qaniinka ugaysta halkaasi waxa ka imaan kara gobolo qurxoon.

Dooy: Waa gobolka ciidiisa ay guduudantahay, kayntiisana ay aad ubadan tahay, ayna ka baxaan geedaha ay ka mid yihiin qurac, gobolkani waxa uu u dhexeeya wabiga Gannaane iyo Yaacda. Webigga Shabbeele wuxuu ku haboon yahay daaqa geela iyo ariga, dhankiisa waqooyi bari waxaa ku yaala silsilada buuralay ah oo ka samaysan dhagax ka bilaama dhanka soohdinta webiga Shabbeele, kuna dhammaata buurta maged ee dooxada Gannaane, dusha guddaha doygaas waxa ku yaala, dhul (adab) la ah oo ka kooban degmooyinka Qansax dheere, Baydhabo iyo Buur-xakamo dabadeedna qunyar sare ayaa uu ugakacaa tan iyo inta laga gaarayo ceelasha Bakool, dhulkani adabla ha ah waxa uu ku haboon yahay daaqa iyo sidoo kale beerashada ku siman daawiyada roobka.

Waxaa kaloo dhulka adabla ah kamida degmada Af-madow ee gobolka Jubadda hoose ee loo yaqaano Waamo.

Roobabka Soomaaliya

Roobabka dalka ka da'a sanadkasta aad ayay ukala duwan yihiin haddii loo eeggo gobolkasta waxaa lagu qiyaasaa ugu yaraan 500mm iyada uu gaarayo marka uu ugu bato 600mm–700mm. Roobabka inta badan waxa ay da'aan labada daw sanadkiiba bilaha afaraad iyo saddexaad iyo sidoo kale tobnaad iyo kow iyo tobnaad.

Goortaaas oo ay ku beegan tahay is beddelada dabaasha waxaa xeebaha ka da'a.

Shuux yar oo xaggaa ah bilaha lixaad, todobaad iyo sideedaad oo ay yiraahdaan: Xaggaa madoobe, heerka ratuubada ama dhadada aad ayay usaraysaa oo waxa ay gaartaa galabtii **90-100** darajada ratuubada ugu hoosaysana waxa ay gaartaa galabtii **52-76** bilaha qalaylku uu jirona waxa uu gaaraa waa **52 -72**.

Xeebaha Soomaaliya

Dalka Soomaaliya oo leh xeebta ugu dheer oo gaaraysa **3,333km** marar ka qaarkiina ay la sheego in ay gaarayso **(3500km)** oo lajeedda khooriga cadmeed iyo badwaynta Hindiya, noolaha baddeena ku jira waxa uu dhaqaalaha ka gali karayaa kaalin wax ku oola marka lala barbar dhigo tacabka beeraha iyo dhaqashada xoolaha, waxa ayna leedahay awood wayn oo horumarinta dhaqaale, shisheeyaha booqashada dhulka ku yimaada noolaha faraha badan ee ku jira badda Soomaaliya.

Sideedaba Soomaalida waa guurto xoolo dhaqato ah majilaabato mana cunaan noolaha badda gaar ahaana badda waqooyi bari, waxaana ugu wacan aqoon darada ay badda u leeyihiin. Xeebaha Soomaaliyeed iyada oo maanka lagu hayo Juquraafi ahaan ugaar ka ah waxa lagu tilmaami karayaa afar qaybood oo kala ah.

Laga bilaabo baabul Mandab tan taaga Raaso-casayr xeebtaasi waxa ay ujanjeertaa dhanka bari waa buuralay saraysa oo meelaha qaarkood leh qarar gudgudban iyo meelo qalqaloocan.

Taaga Raaso-casayr ilaa iyo Eyl xeebtani waxa ay ujan jeedhaa dhanka koonfur galbeed waa qarar sare.

Laga bilaabo Eyl ilaa isku darka wabigga Gannaane iyo badwaynta Hindiya dhawr km wixii ka rogan Eyl ayaa leh buura sare oo taaga iyo meelo qalqaloocan, dhanka koonfureedna guud ahaan xeebtu way hoosaysaa waxa ayna leedahay carro-cudoon oo ka samaysan buuro aan dhaqdhaqaaqin iyo carrocudoon oo ka samaysan oo dhexdooda ay ka baxaan geed gaabka daranta.

Dhawr boqol oo mitir waxaa jira bacaad mara oo aad uga dhaw biyaha dushooda inta badana hakiya Doomaha yar-yar inkastoo guud ahaan Maraakiibta ay soo gaari karayaan, meelahaasi aagga qaarkood.

Laga bilaabbo isku darka wabiga Gannaane taana iyo badwaynta Hindiya waa camuud bacaad, qaarna waa qarar buuralay ah, qaarka buuralayda ah aad ayay usareeyaan.

Dhanka kale aan fiirino jasiiradda badda dhanka koonfureed waxaa kuyaala jasiirado aad uwaawayn oo ay ka mid yihiin (Kooyaame, Guume ama Fuuma, Jawaay, Kafuubi iyo Juula), waxaa badda Jaawaay dhanka deexda jasiiradda uga weecda togwayn oo gudaha ka gaara meel fog badda tagto aad u habboon, dakad aad uhaboon, waxaa kaloo dhexda aagaasi ku yaala harooyin ay ka mid yihiin (Haradda Caanoole, Guraluga iyo harada Birkaan).

Hal Af, Dhaqan iyo Diin

Umadda Soomaaliyeed waa dad islaama kuna dhaqma diinta islaamka 90% waa nimcada koowaad oo Alle siiyay aad ufiican, firfircoon marka laga fiiriyo dadyow kale waa dad xadaariyiin ah, waa dad ku dhagan dhaqan kooda, waxa ay taariikhdu sheegtay in ay dadkan leeyihiin taariikho fogfog ay soo jireen waqtiyo badan laakiin aanan lahayn taariikhdooda in kastoo laga hayo ku dhawaad in ay soo jireen 3000 oo qarni. Magaca Soomaali waxaa la sheegaa in laga soo dhiraan dhiriyay oday Soomaalida kamida oo xoolo dhaqato ahaa oo la dhihi jiray (Aw Samaale), waxaa kaloo la sheegga in uu loogu magacdaray xoolaha ay dhaqan jireen qaar kamida sida (Sacmaal) oo halkaa uu ku baxay magaca Soomaal.

Waxay kaloo leeyihiin dhaqan soo jiren ah oo aysan dadka kale lahayn**,** dadka wax abuura, maskaxda tuujiya waxay leeyihiin abwaano aad ugu firfircoon cabbirka markaas waddankooda uu marayo kuwaas oo siyaabo kala duwan uga qaybgalaya sida in ay ku muujiyaan suugaan, qoraal, alifaad sida in ay soo saaran ruwaayado ay ku jilayaan wadciga uu waddanku marayo .

Waxay leeyihiin reer baadiye halkaas oo isagana aan wali dhaqankii ka guurin oo waa meesha ama isha ay ku nool yihiin umadda Soomaaliyeed maxaa yeelay xoolihii halkaas ayaa laga helayaa, waana meel Illaahay ugu talo galay in ay ku dhaqmaan halka aysan horay ula qabsan xoolaha markii magaalo la keeno, reer baadiyuhu waa dad aad uxadaarisan marka aad eegto reer magaalka waayo wali dhaqankii ayay haystaan halka ay reer magaalku ka haystaan dhaqamada shisheeye tusaale yar haddaan kasoo qaato reer baadiyuhu macabaan caano booraha, caanahan la dhoho waxay ka door bidaan xitaa haddii ay gaajo nafta uga dhacayso in aysan cabbin, maba aaminsana in ay wax fiican yihiin halka reer magaalku ay san wax kale cabbin, shaahna ku caddaysan waayo waxay ilaaween dhaqankoodii soo jireenka ahaa oo mid kale utilaabeen caano boorahaan wax badan waxa ka nafaqo badan oo ka heersareeya caana xoolaadka haddii la isku fiiriyo labadooda isma gaaran waayo caanona waa sidii lagu soo lisay, caanona waxyaalo ayaa laga soo beddelay wax kalena lagu soodaray labadaa caanayow isma gaaraan laakiin waxaa kala sara mariyay dadkii soo kala saarayay waayo haddii ay umaddan heshiin lahaayeen waxay dad

kooda fahmi lahaayeen caano booraha in ay ka fiican yahay inla horumariyo caano xoolaadka iyagana nafaqo badan si aan anaguba ugu iib gayno, una tusno in ay kuwayagu ka fiican yihiin kuwooda ay nagu socodsiinayaan. Dadkii noocaas ahaa xaalado wanaagsan way soomareen ay sida ay dadka shisheeye ula shaqaynayaan dalkooda uga shaqayn jireen laakiin maantay dhibta, kala qaybsanaanta qabyaalada, dagaalada sokeeye, urur diimeedyada iyo faragalinta shisheeye ayaa waxay ku keentay in uu soddon sano kujiro bur-bur garan waayeena qaabkii dadkoodu uheshiin lahaayeen.

Dadkan dhulkooda aan ka soo sheekeeyay waa dhul Illaahay nimcad siiyay hadday fahmi lahaayeen dhagarta dadka shisheeye dhulkoodana ku qancilahaayeen waxay noqon lahaayeen dad fiican oo iyaga wax loo soo doonto halka ay iyagu maantay wax udoontaan dad liita oo dhaqan iyo diintoona lahayn.

Xoolo dhaqato

Waa dad leh xoolo kuna fiican dhaqashada afarta meesi xoolaadyada, wayna dhoofiyaan oo dalkale ayay u dhoofiyaan, xoolaha ay dhaqdaan waxaa kamida **ariga** oo isugu jira Riyo iyo Ido.

Waxaa kaloo kamida geela, lo'ada oo la isku dhoho **Ishkin,** waxaa kaloo kamida fardaha iyo dameeraha oo la isku dhaho **Gammaan**.

Umadda Soomaaliyeed geelu waxa uu ahaan jiray gaadiid waxana loo aqoon jiray magacii Carbeed oo layiraahdo **Safiinatu Saxraa,** doontii lama deegaanka taas oo micnaheedu yahay geelu in uu mari jiray meelaha aysan baa-buurtu marin kolkaas ayaa Carabtii Soomaalida wax ka iib san jirtay ama ganacsiga kala beddelashada alaabtu ubixiyeen magacaan, faa'iidooyinka kale oo uu geelu leeyahay waxaa kamida in markii ay Soomaalidu magta kala qaadanayaan ay ku bixiyaan, marka gabar la bixinayo ay geel ka dhiibaan. Geelu waxa uu agtooda ka yahay xoolaha ugu qiimaha badan marka loo eego xoolaha kale waayo waxaa kaloo laga helaa caanihii, hilibkii, subagii intaas wuxu kala mid yahay xoolaha kale sida ariga iyo lo'da laaakiin faa'iidooyinkaas aan kor ku soo sheegnay

ayuu dheeryahay. Fardaha waxaa ay waa gii hore u isticmaali jireen dagaalada wuxuuna ka mid yahay xoolaha aan dhaqano kan ugu dheereeya, sidoo kale waxaa loo adeegsadaa fardaha in gabdhaha laga baxsho yaradka iwm. Xoolaha ay dhoofiyaan waxaa kamida ariga, geela, lo'da, IWM, waddamada loo dhoofiyo waxa kamida waddanka Sucuudi Carabiya ilaa waqti hore ayaa loo dhoofin jiray halkaas oo ay Soomaaliduna kaga soo beddelan jirtay alaabo ay ubaahan yihiin ilaa haddana ganacsigaas waa jiraa.

Beeraleey

Umadda Soomaaliyeed waxay leeyihiin dhul ku fiican beerashada, inta badan waagii hore marka laga soo tago ku tiirsanaanta xoolaha nool waxay ku tiiirsanaayeen beerashada ama dalaga ka soo go'a beerohooda, waxaa kamida sida muuska, cambaha, masagada, galayda, digirta, khudradda noocyadeeda kala duwan, waagii hore waxaa la dhoofin jiray muuska.

Walow ay muddo dhoofin dalagyada balse hadda qeyb kamida dalagyada ay dhoofiyaan. Markii waddanka burbur ku dhacay ayaa waxaa burbur**ay** shaqadii ama xirfaddii ay ku tiirsanaayeen beeralaydu waayo waxa ay ka heli jireen

cuntadooda iyo waliba nolol maal moodkooda maantase waxa ku dhacay bayhoof walow aysan sidii horre ahayn waayo waddanku waxaa uu galay xaalado burbur oo ay wax kasta ay ku timid dib udhac walow aan haddeer meelo badan ka soo kabanayno insha Allaah.

Waxa uu waddanka Soomaaliya lahaa ugaar uu wadanku leeyahay taas oo xitaa qaybteed la cuni jiray sida sagaarada, garanuugta, deerada, geriga, goroyada, biciidka iwm iyo xayawaano kale oo iyagu dadka cuna sida dhurwaaga, libaaxa, dawacada, shabeelka , haramcadka, guduudanah, maroodiga, dhidirka iwm.

Xayawanada qaar kamida way nabaad guureen, qaarna way joogaan waayo waxay lacarareen naftooda oo waxa ay ka carareen dagaalada sokeeye iyo burburka ku dhacay waddanka.

Cutubka 4aad
Wadashaqaynta dawladda, culimada iyo duub dhaqameedka

Waxaan leenahay qabaa'il, qabiilkasta wuxuu leeyahy Kaaba qabiil amaba oday dhaqameed, waxay ka shaqeeyaan si gaara howlaha reerkaas uu kaabo qabiilka uyahay amaba si guud ayay ushaqeeyaan oo waxay ka shaqeeyan nabdaadinta, heshisiinta markay isku dhacaan beelaha Soomaaliyeed. Waxay kaloo ka qaybqaataan siyaasadda waddanka oo talo iyo fikirba ku darsadaan, waagii hore waxaa la iskugu tagijiray geed halkaas ayaana lagu soo heshiin jiray. Wuxuu kamid yahay maanta dhaqamada guuray oo waxaa beddelay guryo in hoosta laga soo xirto kaligood hadday yihiin fiicnaan lahaydaa, waxaan ka hadlayaa siyaasiinta is haysata.

Waxaa kudaba lamaan amaba aan ka maqnayn dalal shisheeye walow maanta xaalku uu sidii hore ka fiican yahay oo hoggaanka talada waddanka hayaa waxyaalo badan beddelay, waxyaalo kasii fiicana waan ka filaynaa in waddankeenu ku talowsado.

Oday dhaqameedyada Soomaaliyeed maanta aad baa loogu baahan yahay dhanka soo celinta midnimadii Soomaaliyeed waayo oday dhaqameed kasta reerkiisu wuu fahmayaa haddii uu talo wanaagsan usoo jeediyona way qaadanaayaan, waan aaminsanahay haddii ay iyaga midoobaan kunatashadaan in ay dib usoo nooleeyaan Soomaali oo mida, waxba kuma qaadanayso waayo reerkasta wuxuu oday dhaqameedkoodu usoo jeediyo way qaadanayaan sida ugu fudud oo aanu uga bixi karno cudurkaan oo qalbiyadeenii dadkeena kala dilay waayo waanu aragnay khasaarihiisa wax faa'iido ah in uusan noo lahayn waan aragnay marka waxaan isleeyahay in ay tahay maanta meesha aan ubaahanay in ay iyagu midoobaan kuna tashadaan sidii ay mar umidayn lahaayeen dadkooda, ugana saarilahaayeen mugdigii iyo waxyaalihii xumaa oo na soomaray.

Waxaa kaloo aad ufiican in ay kaashadaan culimada si ay iyaguna ulagarab istaagaan dhiiri galinta iyo wacyigalin dhanka diinta ah waayo inagu dad islaama baanahay, diinteenuna ma ogola waxyaalaha uu nagaarsiiyay dilaaga dahsoon.

Siyaasiyiinta Soomaaliyeed maanta way kala rayi duwan yihiin, wayna kula duwan yihiin qaabkii aan uga bixi lahayn soddon sano dhibka aan ku jirnay, waxaan ukala saaray kuwo fahmay maskaxda in si dadban naloo ka guumaystay iyo kuwo aan fahmin haddii ay shaqeeyaan odayal dhaqameedka iyo culimada Soomaaliyeed way fahmayaan waayo nin aan wax dana noohayn ayaa dabada kasoo wada, marka siyaasiga laftarkiisa wuxuu ubaahan yahay in uu ka dawoobo dilaaga dahsoon oo shisheeye nooga dhigay wax fiican.

Haddaan tusaale soo qaadano siyaasiyiinta fahmay in maskaxda na laka guumaystay waa kuwa ka shaqaynaya danaha dadka iyo dalka, waa kuwa ugu shaqaynaya dadkooda si daacada oo caddaalad ku dheehan tahay, waa kuwa Illaahay uga baqaya ilaalinta sharciga iyo kala danbaynta dalka Soomaaliyeed.

Waxay kaloo fahmeen dalalka shisheeye in ay gacan libaaxle ka qaadanayaan burburka Soomaaliya, maxaayeelay midkii la doorto oo ay isleeyihiin dalalka shisheeye maka helaysaan danihiina, waxay door bidaan in ay ku kiciyaan kacdoono isugu jira siyaasiiyiin aan ogayn mabda'a shisheeyaha halka ay iyaguna kiciyaan shacab

iyagoo ubahala galinaya siyaasiga markaa talada dalka haya.

Siyaasiga danta gaarka ah wata, huwana shaati qabiil, waa kan uu ka dagi la'yahay waddanku waayo isaga haduu garto dadkaan dabada kasoo diraya una tanaasulilahaa dadkiisa, dalkiisa sidaa waan dhaami lahayn.

Waxaan ugu doortay in ay kasaari karaan culimada, oday dhaqameedka iyo dawlad isku xiran, waa dhumucda amaba meelaha keliya oo aan is leeyahay haddii aan xoojino waan ka baxi karnaa dilaaga dahsoon waayo dawladdu way udhaxaysaa umadda, waana meesha Soomaaliyoo dhan ay iska arki karaan. Qabiilkasta haddii ay si isku mida ushaqeeyaan sida dawladda aan hadba haysano oo markaas jira, gacmo wadajir bayna wax ku gooyaan.

Soomaalidu waxay dhahdaa farkaliya fool madhaqdo maxaa yeelay waxaan kaloo leenahay dawlad goboleedyo hoos imaanaya dawladda dhexe, dawlad goboleedkastana waxaa ku abtirsada qabaa'ilada Soomaliyeed, dhalinyaro, isimo, aqoonyahano diidan danta shisheeye karabo maamul goboleedka Soomaaliya.

Way caddahay in naloo ku talagalay markii naloo samaynayay, waxaan caalamka ka shaqayn waayo haddii

run katahay oo ay Soomaali midnimadeeda rabaan markii horeba, waxay ku bilaabi lahaayen dimoqraadiy si uu waddanku horumar la taaban karo ugaaro.

Markay ogaadeen in aan nahay dad qadariya qabyaaladda, dad aad uqiimeeya qabiilka, dad iyagu cadaw isku ah, dad in ay isdibin daabyeeyaan mooyaane aanan maskax iyo caqli kale lahayn waxay nooga dhigeen maamul goboleedyadaan xal, waayo markii la bilaabayay dawladda dhexe kadib burburkii haddii ay si togon ufakari lahaayeen garowsan lahaayeen in ay iyagu maanta dalkooda tanaasul usameeyaan.

Taas way nagu dhacday waana qadar Alle, marka waxaa fiican in laraadiyo xalkii looga bixi lahaa ileen tan wax wanaagsan ma ahan aakhiro hoog iyo halaag baanu ku mudanaynaa adduunkana waxaan mudanay ceeb, cay iyo in naloo aqoonsado dad iyo dalaan jirin. Waa ceeb in Illaahay nasiiyay dal hodana haddana ay dalal naga yaryar markii dalalka Soomaaliya la fiiriyo uu waddankeenu ka fiicanayahy haddana aan ku jirno dalalka faqiirka ah kuwa ugu hooseeya.

Xalka aan dilaaga dahsoon uga bixi karno waa iyada oo ay kawada hadlaan, dawladduna hormuud u tahay, culimada

Soomaaliyeed oo midaysan, isimada Soomaaliyeed oo midaysan aqoonyahanada iyo cidkasta oo jecel horumarka dalkiisa iyo dadkiisa waana in aysan cidi ugarqaadin kale, dalal shisheeye in aysan soo dhexgalin taasina in ay iyaga wada dhasheen oo heshiinayaan.

Dawlad goboleedyada iyo dawladda dhexe

Waxaa kaloo iyaduna laga maarmaanta in ay dawlad goboleedyadu la shaqeeyaan dawladda dhexe waayo labadaq oo midba tiisa wata waa waxa halkaa ina dhigay waayo dawladda dhexe waa hormuudkii waddanka, waddan aan lahayna ma jirto. Marka siyaasiyiinta hoggaanka uhaya dawlad goboleedyada maanta waddanka ka jira waa in ay si dhaba ula shaqeeyaan dawladdeena dhexe, waa in ay iska saaraan danayste, dadkooda iyo dalkooda burburinaya waa in ay tanaasul sameeyaan waa in ay ka shaqeeyaan si kasta oo ay isku fahmi karaan dawladda dhexe.

Waa inay dareensiiyaan shacabka in ay leeyihiin waddanka, waa in ay ku dhiirigaliyaan qabyaaladda, waa in ay ku dhiirigaliyaan sidii ay ula shaqayn lahaayeen dawlad goboleedyada iyo dawlada dhexe. Maxaayeelay intaasi ma kala maarmaan dawlad goleedyada iyo dawladda dhexe waa isku xiran yihiin halka shacabka iyo dawladda dhexe iyo dawlad goboleedyaduna isku xiran yihiin. Haddii dawladda dhexe iyo dawlad goboleedyada

hadda jira ay isku xirmaan, kana wadashaqeeyaan aayaha umadda Soomaaliyeed, tan shacabkuna waa hagaagaysaa. In wadashaqayn timaado waa waxa keliya oo guul ku gaari karno, waana waddada keliya oo isdhihi karno waan ku guulaysan karaa. In la helo dawlad dhexe oo awoodleh waa waxa difaaci kara waddanka oo dhan. In la heshiiyo, iskuna tanaasusho waa horumarka waddanka, waana isku soodhawaanshaha shacabka Soomaaliyeed.

Mucaaaradka Soomaaliya iyo waxa laga rabo

Waxaa kaloo laga rabaa maanta in ay iyaguna xal keenaan sidii aan uga bixi lahayn dilaaga dahsoon iyo gacan shisheeyaba waa mucaaradka, qabiilkuu doona ha kasoo jeedo waayo marka hore waxa ay doonayaanba waa hoggaanka waddanka cidi uma diidana laakiin mafiicna in aad dadka iyo dalkaaga kusoo hoggaamisid cadow kana dhigato sokeeye kii la rabay in aad la shaqaysid aad ku kala tagtaan dan gaar ahaaneed.

Xitaa haddii aysan iyaga naftooda beddeli karin ugu yaraan waa in ay shacabka ka daayaan shaati qabyaaladaysan waayo taas hadday wax noo tarayso soddon sano ayaan ku soo jirnay, wixii ka dhashayna waan lawada soconaa, ciyaalka hadda soo koraya way garanayaan oo inagiiba ku hadaaqayna oo shaqo kaleba lahayn, dadkeeniina waa bahdilmay oo gacanta udhigtaan shisheeye waddankoodii hodanka ahaana way ka qatanyiihiin.

Dhibaatada dadka maasaakiinta ah ku dhacaysa waana la idinkala xisaabtamayaa aakhiro waayo ma waalnid ee adoo miyir qaba ayaa dadkaaga iyo dalkaaga cadow kusoo hoggaamin aanba isaguba ogolayn in aad xariiq gaarsiiso

dalkiisa. Aaway damiirka uu isagu leeyahay in aan waddankiisa la faragalin? Aaway taadii aad adiguna dalkaaga ugu difaaci lahayd siduu isagaba tiisa udifaacayo? Ogow waxa Illaahay ku siiyay waa lagala xisaabtamidoona markaa dhimatid haddii aad ku mucaaradid wax diintaada, dalkaaga iyo dadkaaga wax udhimayaa.

Mucaaradnimada madiidani laakiin mucaaradnimadaadu waa in aysan ahayn mid dangaara wadata waa in aysan ahayn mid aad ugu doodaysid qabiil laakiin waa in ay ahaataa dhaliilaha saxda ah ee aad ku aragtay dawladda in aad lawadaagtid una sheegatid xalka laftirkiisa waayo waxbaa taas oo kale ku saxma ee waxba ma burburiso waana mida aan ka doonayno mucaaradka waddanku leeyahay waa in ay ka shaqeeyaan dadkaan iyo dalkaan siduu horumar ugaari lahaa markaas xal waan ka gaari karnaa dilaaga dahsoon.

Aqoon yahanka

Maanta umadda Soomaaliyeed heer fiican ayay gaareen dhanka waxbarashada haddii aad fiirisid sida aan u burburnay iyo heerka waxbarasho aan gaarnay aad baan ugu fiicanahay, maanta waxaan haysnaa aqoonyahano garanaya waxkasta oo hormara uu waddanku leeyahay.

Way shaqeeyaan haddana si muuqata umawada shaqeeyaan waayo aqoontu waa mida beddesha qofka naftiisa aqoon, diini iyo mid maadiba, dadku isku ma jiraan kuwo aqoontu beddeshay way jiraan iyo cilmiga Alle siiyay, jecelna in ay dadkooda iyo dalkooda ugu shaqeeyaan si hagar la'aana.

Waxaa nagu batay maanta aqoonyahanadii Soomaaliyeed in ay qaybtood isgaran la'yihiin in waddanku ubaahan yahay, kii isgaranayana uu baqayo oo uu gadaal uriixayo aanooyin waayo wuxuu aaminsanyahay haddii aad halkaas wax ka qabato amaba halkaas aad cilmigaaga iyo caqligaaga wax ku tarto, nin reer hebela jooga, waxba kuma siinayo. Qofkaas wuxuu isku arkaa in uu yahay mid dadka iyo dalkaba wax uqaban kara ama waji garad ayaa la isku siinayaa.

Sidaa in ay ufikiraan oo xitaa heer ay gaaraan in ay dhahaan dalka waxba mayaalo aniga ila maqumana ee waa in ay iyaga naftooda beddelaan, kana saaraan fikirka xun oo nadaashaday kadib isku dayaan sidii ay uga saari lahaayeen dadkooda iyo dalkooda xaaladdan. Cilmiga Illaahay siiyayna ay ugu tabarucaan umadda Soomaaliyeed way isku jiraan si aan ugaarno barwaaqo sooraan.

Qofkasta uu Illaahay cilmi ugu deeqay waa in uu ku bixiyo waqti dheeriya oo uu kusoo saarayo ubadkeena yar yar maanta waxa lagu kala hormaray waa aqoon iyo casri cusub. Dadkaas nagama aqoon badna, nagamana maskaxbadna, nagamana dadaal badna. Waxay fahmeen qaabkii maskaxdooda uga shaqaysiin lahaayeen, waxay ku tartamaan siduu qofkasta oo iyaga kamida waddankiisa waxyaalo dheeraada oo horumar gaarsiinkara u ikhtiraaci lahaayeen, anagana waxaan ku tartanaa qabiil, waana tan halkaa ina dhigtay. Aqoonyahanada maanta waddanku leeyahay qayb libaax leh bay ka qaadankaraan sidii uu inooga bixi lahaa dilaaga dahsoon, si aynu dadyawga ula jaanqaadno oo waddankeenu unoqdo hoyga cilmiga loo soo doonto sida aan anagu hadda u aadno waddamada caalamka.

Waxay kaloo ka qaybqaadan karaan in ay dadkeena ka saaraan ama dhiirigalin joogta ah siiyaan si aan uga baxno dilaaga dahsoon iyo xumaantiisa.

Dhalinyarada

Dhalinyaradu waa laf dhabarta bulshada, waa waqtiga ay ugu fiicanyihiin xilliga lagu gudajiro dhalinyarnimada. Marka qofku uu xaaladaas ku jiro waa uu ka dhisan yahay dhan kasta oo ah maskax fiyow caqli iyo xoog. Waana lagu tashadaa waqtigaas uu qofku ku jiro dhalinyaranimada waayo marxaladaha kale oo Aadanuhu maro waa marxalad ka duwan sida markii la abuuray soo qaatay intii Alle ugu talagalay in uu ku jiro caloosha hooyadiis.

Markii Alle ugu talagalay kawnkaan in uu yimaado, wuxu galay xaalad la barbaarinaayo oo waa ciyaal caqli badan maleh, maleh xoog, maleh maskax ku filan. Waa xaalada gacanta waalidku nagu hayo, markuu soo gaaro ilmuhu shan bilood jir, wuxuu bartaa hadaaq wuxuu la yimadaa in uu barto waxyaalaha guriga ka dhacay, wuxuu jecelyahay in uu la raaco indhaha waayo caqli buuleeyahay ilmuhu waqtigaa. Waqtiga uu soo gaaro sagaal bilood wuxuu bartaa oo ah erayada uu ilmuhu barto (Aabbo, Hooyo) waa erayada ugu horreeya uu barto ilmuhu.

Wixii ka danbeeya sagaal bilood ilaa afarta sano ayuu sifiican ubartaa waxyaalaha guriga dadku ku dhaqmaan, haddii uu gaaro ilmuhu shan sano, waxaa lageeyaa dugsi

Qur’aan sida caadada noo ah oo waxaan dhahnaa ilmuhu marka hore Qur’aanka si fiican ha ubarto oo horay iskuul malaga geeyo, ilmuhu todobo ilaa sideed sano markuu gaaro ayaa lagu daraa iskuulka, si loogu sii wado waxbarashada qaybeheeda kala duwan.

Intaas waxaa usii dheer in uu ilmuhu ku jiro barasha kale ileen markaan wuxuu ku jiraa bulshada dhexdeeda marka hadduu yahay waalidku mid markasta lasocda xaaladaha ilmaha. Ilmahaas wuu ka-bad baadaa waxyaalaha ilmaha ukeena fasahaadka sida cudurkaan aan kasoo sheekaynay oo kale dilaaga dahsoon.

Dhalinyarada Soomaaliyeed meel kastay joogaan maantay kii waxbartay iyo kii kaleba waxay camal ka dhigteen in ay tahriibaan, qaarkood dhanka wiilasha iyo gabdhuhuba qaad meheradaha ku cunaan, qaadka waagii hore raga keliya buu ku koobnaa oo dumarka laguma arki jirin xitaa hadday jirto ceeb bay ahayd oo lama arki jirin balse maanta waxaad arkaysaa dumar uu u baraxan yahay oo ragii ku dhex jira, qaar kale ay fadhiyaan (Baraha bulshada) wiilal iyo gabdho waa lagu wadajiraa oo lagama sheekayn karo xaaladiisa balse ku dheeraan maayo haddii Alle qadaro.

Waxaan taa ula jeedaa Baraha bulshada khasaarona wuu leeyahay, faa'idona wuu leeyahay laakiin anaga maanta khasaarihiisa ayaa inagu badan waayo meeshaan waa meel islaam iyo gaalba udhexaysa. Ninkii sameeyayna danbuu usamaystay, waxaa dhacda in diinta Kiristaanka lagu faafiyo oo qofkii aan lahayn iimaan celinaya uu waxaas run moodo. Dadyow badan oo Soomaali ah waxaad arkaysaa waxay leeyihiin nimcadii Alle isiiyay waan ka baxay waayo islaanimadu waa nimco aad usaraysa oo Alle baxsho.

Waxaa dhacda in aan inta badan aan ku faafino ceebeheena iyo dhaliileheena walow ay ayaamahan soo yaraanayso oo waddanku saansaan dawladnimo ka hanaqaadi rabto. Dawlad natustay kala danbayn iyo caddaalad oo xitaa hoggaamiyaasha dawladeena ay nala soo galeen taas waa faa'ido aan ka helnay waayo shacabka iyo dawladu meesha ay isku arkaan oo shacabku ka arko waxqabadka ay dawladoodu ku tilaabsato waliba isagoo itus ama itaabsiiya.

Dhalinyaro ahaan maxaa inagaga aadan in lagarab istaagno dowladeena iyo maamul kasta oo dhisan?

Dhalinyaradu sow ma ahan dadka ugu badan bulshada?

Waxaa nagaga aadan in aan la garab istaagno waxkasta oo ay dawladdeena ku horumarayso oo waddankeena dan ugu jirto, horayna noo sii kaxaysay nagana ka xaynaya meesha aan hadda joogno, noona ka xaynaya meelaha ay dadka nalamidka ah gaareen. Maxaayeelay wax qayrkaa sameeyay adigana waad samaynkartaa oo waxba kaama hortaagna waayo sagaal buu ku dhashay adigana sagaaal baad ku dhalatay waxa uu ku dheer yahay kaliya waa isaga oo ufakaray si togan kana shaqaysiiyay maskaxdiisa iskuna arkay in uu isaga leeyahay dalka, mas'uulna ka yahay ayuu aaminay halka anagu aan uhanqal taagayno ninkaa isku tashaday, una huray waqtigiisa in uu ku bixiyo waddankiisa si uu uhorumarin lahaa, ulana shaqayn lahaa dawladooda ama hormuudkooda. Markastana ugu soo saari lahaa waxyaalo horumariya dadkiisa iyo dalkiisa, anagana waxaan ku fakarnaa in aan aadno isku soo sawirno ninkaa isku tashaday halkii aan isku tashanlahayn oo aan ka shaqaynlahayn dalkeena bur-bursanaa ku dhawaad soddon sano garabna siin lahayn dawladeena.

Jawaabtu waa maya maxaayeelay haddaanu isku haysano in aanu nahay qaybaha bulshada Soomaaliyeed qaybta ugu

badan ma uusan ahaadeen dalkeenu sidaas kumana fakarneen waxyaalo lidi ku ah waddankeena.

Waxaan nahay 75% marka lafiiriiyo qaybaha kale oo bulshada uqaybsanto iyada oo aan sidaa nahay ayaa garowsanahay in uu waddanku soo maray xaalad burbur oo inteena badan aanan arag dawlad Soomaaliyeed oo xoog leh oo waxaan la kulanay in teena badan iyada oo dawladdeenii dhexe bur-burtay.

Isku soo duuduub burburka dawlad la'aanta indhaha ku kala qaadnay haddana iyada oo ay sidaa tahay baan marka aan isku eego xaalada maanta maara loo la'yahay iyo xaaladii ay ka saareen umadda Soomaaliyeed wiilashii dhalinyrada ahaa ay maanta fududahay waayo iyaga waxaan kaga fiicanahay waxyaalo badan oo aan ku dhanaa sida in uusan jirin cilmiga hadda siduu yahay uusan ahayn in aysan haysan, dhaqaale ku filan in aysan haysan, markaa dad isku fikira in ay ahaayeen dad loo adeegsanayo xoog dawalado shisheeye.

Laakiin mida ay ku gaareen Illaahayna ugu hiiliyay waxay ahayd in ay ahaayeen saddex iyo toban nin oo isku duuban.

Waxaa kaloo nooga fiicnaayeen waxkasta oo iyaga dhexdooda kala dilaya ay iska saareen sida qabyaalad,

nin jeclaysi iyo waxkasta oo ay islahaayeen dib udhac buu idiin keenin.

Miyaysan dhalintu ogayn xaaladaas? Haddaba maxay mawqif adag uga qaadan la'yihiin?

Way ogyihiin balse waxaa aan iskugu imaan la'nahay ayaa waxay tahay in aan maanta la is aaminayn in ay naga dhammaatay xigmadii iyo caqligii wax doorin lahaa in aan siyaabo kale u adeegsano aan waxba ina tarayn aakhiro iyo aduunba in aynaan isku imaan oo aan kala baqno. Waxa keenaya oo halkaa nagaarsiiyay waa qabiil oo nakala dilay anaga oo aragnay dhibkiisa iyo faa'ida daradiisa aynaan ku dhiiran in aynu is abaabulno kuna tashano sidii cudurkaan xun dadkeena kuwa hadda jooga ay uga bixi lahaayeen iyo jiilka soo socda aysan iyaguna uga bad baadaan oo qayrkood ula jaan qaadaan.

Dhalinyarada waxaan u arkaa in ay yihiin kuwa ka qayb qaadankara in uu cudurkaan naga baxo iyaga oo midaysan, qabiilkasta oo Soomaaliyeedna leh, mawqif adagna ka qaata waayo dhalinyarada marka lagu jiro qofka dhalinyarada ahi wuu is bedbeddal badan yahay oo hadba fikirka markaa loo sheego ayuu qaadanayaa. Waxaan kula talinayaa dhalinta maanta joogta oo aniguba ku jiro wiil iyo

gabarba leh si aan mawqif adag ugala hortagno cudurkan xun in aan waxkabarano taariikhdeena cajiibka ah aynaan ku habsaamiin intii yarayd oo aan mugdiga ku jirnay, taas ayaan uga bixi karnaa inagoo isku duuban, daacadna ka noqona Illaahay xagii markaas ayaan ka baxaynaa dilaaga dahsoon waddankeenuna horumar gaarayaa, qayrkeena latartami karnaa.

Ganacsatada

Waa maxay ganacsi? Muxuu faa'ido leeyahay marka laga soo tago faa'idada uu qofka uu k ahelaayo? Ma ka qayb qaadan karaa sidii looga xoroobilahaa dilaaga dahsoon? Qaab sideeya ayuu uga qaybqaadan karaa? Maxaa lagud boon ganacsatada Soomaaliyeed si ay uga qayb qaataan dilaaga dahsoon?

Waxaan hordhaca cinwaanka ka hormariyay su'aalo kuwaas aan ugu talagalay in aan kaga jawaabo sida ugu fiican oo ugu macquulsan aan rajaynaayo in ay taladaa qaataan kuwa ku jira ganacsiga noocyadiisa kala duwan, fikrado iga maqana ay iyagaba leeyihiin ku sii darsadaan dadkana la wadaagaan.

Waa maxay ganacsi?

Ganacsi: Waa cilmi la barto oo looga soo baxo Jaamacado, waxaa kaloo jirta in aan iyadoo uusan qofku soo marin waxbarasho haddana uu yahay ganacsade.

Gancsigu wuxuu u dhexeeyaa qof iyo ka badan maxaayeelay ganacsigu ma ahan mid ku jira hal gacan laakiin gacmo badan ayuu soo maraa, meelo kale duwana wuu ka yimaadaa.

Ganacsigu wuxuu marka horeba ka bilowdaa iyada oo qofka fikir ku dhasho, fikirkaas wuxuu qofku ka fakaraa marka hore ama qorsheeyaa sida ama qaabka uu u ekaanayo ganacsigiisu sida meesha ku haboon, alaabta meesha la garabo, macaamiil iyo in uu isku miisaamo faa'idada iyo khasaaraha uu leeyahay ganacsigiisu waayo waa meesha u caddaynaysa dalabaadka alaabta uu keenay, mida loogu qaadasho badan yahay, mida aanba la fiirin wuxuuna markasta ku xisaabtamaa labadaa hadba say ukala badan yihiin. Xisaab xirka marka uu samaynayo way jiraan siyaabo kale oo loo macnayn karo ganacsiga, waana layga badiyaa oo dadka ehelka u ah ayaa iga badiya waad ku darsan kartaa wixii aad ka taqaanid.

Muxuu faa'iido uleeyahay marka laga sootago shaqsiga faa'idada uu ka helaayo ganacsiga?

Sidaa kor ku soo xusayba ganacsigu wuxuu u dhexeeyaa qof iyo ka badan kala jooga meela kala duwan. Waa kuwana faa'idooyinkii laga helaayo:

- In ay dhaqaale yeeshaan waddankuna horumar gaaro.
- In ay isbartaan dad kala duwan oo meelo kala duwan jooga.

- In ay kala faa’idaan dhexdooda cilmi, fikrado wanwanaagsan iyo is faham.
- In ay si wadajira uga qayb qaataan dhexdooda waxa ka dhexeeya.
- Isu socodka waxa uu isu furaa labo waddan oo kala xiran, sida in ay labadaa waddan dhex martay dagaalo iyo wixii lamida oo lagu kala go’ikaro.
- Dhaqaalaha waddanku in uu kor ukoco.
- In uu xiiriirka waddamadii horay isku hayay ay xiriir fiican samaystaan.

Hooyooyinka Soomaaliyeed

Gabdhaha Soomaaliyeed waa hooyo iyo hooyo sugto, hooyadu waa macalimad inta uusan ilmuhu bannaanka usoo bixin badanaa aabuhu wuxuu raadiya dheefta waxyaalaha ay reer masruufan lahaayeen.

Halkaas waxaa mas'uuliyad wayn ka saarantahay hooyada waayo waa barbaariyaha koowaad ilmaha markuu dhashay iyo markuu hadal bartoba, iyada ayaa laga rabaa in ay ku barbaariso diinteena suuban iyo waxyaalaha ilmaha dhaqankiisa wanaagsan kor uqaadaya, iyada ayaa larabaa in ay ilmaha markuu guriga ka bixo ay la noqoto saaxiib, aabbaha laftirkiisa waxaa laga rabaa in uu waqti siiyo ilmaha, lana socdo xaaladiisa.

Ilmaha hooyadu maadaama ay ubadantahay waxyaalaha ay uga sheekaynayso waa in ay ahaadaan waxyaalo aad ufiican oo kasooca marka uu bulshada ku jiro waa in uu sheegtaa waxyaalaha marka uu guriga joogo uu ku barto in uusan siidayn oo uu ku dhaganaado waayo ilmaha bay'adu saamayn bay ku leedahay , waa in ay latashataa amaba latashadaan ilmaha la sheekaystaan si uu markasta ugu xirnaado gurigooda waa in ay usheegaan in ilmuhu iska ilaaliyo saaxiib xun, haduusan kamaarmina uu badalaa

waxyaalaha uu ku arkay ilmaha Soomaaliyeed. Guri kasta ha kasoo kaceen waxaa laga rabaa hooyooyinka iyo aabayaasha in ay ku dadaalaan in lala saaxiibo ilmaha, in ilmaha labaro waddankiisa, waxyaalaha fiicfiicana looga sheekeeyo. Ilmaha haddii kaliya looga sheekeeyo waxyaalihii xumaa oo u soomaray waddanku taas kaliya ayuu galinayaa maskaxda laakiin waa in looga wada sheekeeyaa si uu isagu ukala doorto wanaaga iyo xumaanta wanaaga loo badshaa amaba loo sheegaa in uu ahaa waqti aan fiicnayn si uu isaguna hadhow ula wadaago saaxiibadii halkaasna ay kaga sheekaystaan su'aalana iska waydiiyaan.

Waxay ubadan tahay in uu dhanka togon ufikiro kana fakaro sidii uu ugaari lahaa waxyaalaha wanaagsan uu waddakiisu lahaan jiray.

Maanta waxaa ina daashaday cudur xun oo aan ula magac baxay dilaaga dahsoon marka ilmaha yar waxaa laga yaaba in uusanba garanayn laakiin micnihiisa iyo wuxuu yahay dadka waawayn ka bartay haddii loogu sheekeeyo ilmaha in qabyaaladda uu ka fiicanyahay qaranimada, haddii looga sheekeeyo sida ay waddamada horumaray gaareen si ay iyaga ula tartamaan ileen iyagaba way nala tartamaan

haddaan inahaas ku soo gabagabeeyo. Qaybaha aan fikir ahaan tayda is leeyahay waa meelaha aan maantay uga bixi karno dilaaga dahsoon way jiri karaan siyaabo kale oo xal loogu helikaro laakiin dadku isku fikir ma ahan, fikrado kala duwan way jiri karaan.

Wariyaasha Soomaaliyeed

Wariyaasha Soomaaliyeed waa kuwa ugu dhaw shacabka in ay wax ka qaataan, waa kuwa habeen iyo maalin khatar naftooda ugaliya sidii ay uheli lahaayeen warar sugan oo xaqiiqa.

Waxay isku howlaan iyaga oo dantoodii gaarka ahayd kasoo tagay sidii ay shacabkooda ugu shaqayn lahaayeen, ugana dhaadhicin lahaayeen waxyaalaha shacabka ku keeni kara khatarta si shacabka uu unoqdo mid wacyigashan, kana wacyigashan waxyaalaha dadka dibudhaca ku keenaya. Waxay ku wacyigaliyaan waxyaalaha dadka iyo dalkaba horumarinaya.

Wariyaashu badanaa malahan qabiil, nin jeclaysi waayo wariyanimadu waa xirfad la barto iyo tababaro dheeraada ay qaataan ayaa qofka wariyaha ah ku shaqatagaa laakiin majirto markuu shaqaynaayo in uu udhaqmo sida qaybaha kala duwan ee bulshada. Way ka duwan yihiin waayo waxay udhexeeyaan bulshada, warka ay soo diyaarinayaan bulshada ayay usoo diyaarinayaan iyaga ayay rabaan in helaan warar xaqiiqa ah.

Ma galaan qabiilaysi waxyaalaha dadka halakeeyay intooda badan mid-mid waa ku jiraa ay bahashu dhinac

martay oo ilaaway in uu dadkan udhexeeyay tusaale ahaan waqtiyada lagu gudajiro doorashooyinka ay musharixiintu soo bandhigayaan qorshe siyaasadoodkooda amaba ay waddaan olalaha siyaasadda, waxaa jira wariyayaal lakala safta musharixiintaas taas maahan mihnadoodii laakiin waxaan dhihi karnaa way ilaaween waayo iyagu way udhexeeyaan musharixiinta ileen shacabka ayay kasoo baxeen, shacabkuna wuu udhexeeya sidan soo sheegnay. Waxaan uqaatay in ay midkasta ka dhifsanayaan xoogaa kadibna xayaysiin dusha uga tuurayaan, haddi aysan eegayn inta yar kuli way wadaxayaysiin lahaayeen.

Waxay kaloo eegaan in bal markuu hadhow xilka qabto in ay xilsiiyaan, waxaana dhihikarnaa haddii xoogaa lasiiyo ama xil lasiiyo wariyuhu waa qofka lagarabo in uusan sheegin wax beena daacadna Ahaado, cadaaladna usameeyo warka sugan uu raadinayo waayo hadii uu qofka wax uusan uqalmin ku xayaysiiyo wariyuhu wuxuu danbi kagalay dadka iyo dalka laakiin waa in uu sheegaa hadduusan ka maarmin in dhaliishiisana sheego waxyaalaha uu ku fiicanyahana sheego si ay shacabku uga digtoonaadaan waxyaalaha uu ku liito amaba ku xunyahay hogaamiyahas.

Wariyaasha waxaan kula talinayaa in iyagoo wax naafica qaadan naftooda khatar ugasha, waan la socdaa in ay qaybtood iyaga oo shacabka uraadinaya war saxa naftooda ku waayaan. Waan ogahay in ay dhibaatooyin aad ufara badan lakulmaan in laxiro, jirkooda dhawacyo loo gaysto in la maago, iyaguna intaas iyo in lamida aysan waxba u arag in ay leeyihiin dulqaadkeedii.

Waxaan kula talinaayaa howl kama daalooyin wali waa hogadii, in ay waqtiyadda qaarkood markay wacyigalinta waddaan ay soo galiyyaan sidii looga bixilahaa dilaaga dahsoon si ay dadkeena u ogaadaan in uusan waxba noo tarayn, waxyaalaha uu ku xunyahay soogaliyaan, soo galiyaan taariikhdii fiicnayd uu waddanku lahaaa, yareeyaan waqtigii uu mugdiga iyo rafaadka waddanku soo maray si ay ciyaalka yar-yar ugu hamiyaan in uu waddanku soomaray waqti ka fiican waqtiga mugdi ah ee nasoo maray.

Haddi loo badiyo in waqtiga mugdiga ah aan soo marnay, waxaan umalaynaynaa in ayanba jirin waqti fiican oo aan soo marnay marka si ay u ogaadaan wanaaga iyo barwaaqada uu waddanku soomaray, waxay ka anfacaysaa in laga baxo si fudud oo ay dadka waawayn iyo yar yarba

ay aaminsanyihiin. Waxayaalaha wariyayaasha waxaan usoo qaatay waa qaybaha bulshada kuwooda ugu fir-fircoon, wayna ka dhaadhicin karaan bulshada Soomaaliyeed sidaa la ajligeed, waxaan doonayaa in ay usameeyaan waqti si ay dadkeena uga wacyigaliyaan dilaaga dahsoon.

Cutubka 5aad
Cafiska

Waa maxay cafis?

Cafisku waa wax marka labo qof iyo ka badan isku dhacaan unoqda xal masaalaxo camal in aysan wixii ay kala galeen dib soo ulaaban.

Cafisku waa mowduuc aad ubalaaran qeexidiisa intaas laguma soo koobi karo balse intaas ayaan ku soo koobay.

Qaybaha cafiska

Cafiska waxaan uqaybiyay labo qaybood oo kala ah, Cafis afka laga yiri iyo cafis qalibiga laga yiri, haddan qeexo labada qaybood ee cafiska.

Cafis afka laga yiri

Cafiska afka laga yiri: Mahan cafis inta badan noqda mid xal waara lagu gaaro waayo haddi markii labadii qof ama ka siibadan oo danbiga kala galay ay dhahaan waan is cafinay qalbigana aysan udaa dagin badanaa ma noqdo mid dhaqan gala waayo cafiskaasi meeshii ayaaba looga soo tagay oo qofkasta kursiguu markaa fadhiyay buu uga yimid, arintan waxaan usababeeyay waa iyada oo aan si fiican looga fiirsan waayo intii cafiska ku dhawaaqday oo meesha wada joogtay ayaad waxaad arkaysaa iyaga oo isku haysta

shalay waxa ay iska cafiyeen maxaa yeelay cafiskani wuxuu ahaa mid afka ah, mana noqdo mid sii jira oo dhaqan gala.

Tusaale: Umadda halka af, diin iyo dhaqan leh markaan eego cafiska ay is cafiyaan inta badan waa mid afka ah waayo haduusan afka ahayn wuu dhaqan gali lahaa waxaa laga arki lahaa in ay ka gudbeen waxa ay iska cafiyeen madhihi karo markaas ay meesha fadhiyeen cafiskoodu been–been ayuu ahaa balse waxaan dhihi karaa waxaa ka awood batay cafiskii mawjadaha dillaaga dahsoon cafiskoodiina ka dhigay mid afka ah oo markii laga boxo meesha xal unoqon waaya, waxan kaloo garan waayay waxa aysan ba garanayn cafisku in uu yahay caafimaad, haddii ay garan lahayeen in uu caafimad yahay afka kama ahaadeen ee wuxuu unoqon lahaa waxa koowaad oo ay ahmiyada siiyaan.

Cafiska qalbiga: Cafiskani wuxuu kaga duwanyahay cafiska afka waa mid qalbiga la iska cafinaayo waayo qalbiga wixii gala marna kama baxaan oo si kal iyo laaba ayuu u dhaqan gala, waana cafiska guulaysta oo dhaqan gala xalna unoqda danbigii iyo wixi ay kala galeen dadkaasi, cafiskani wuxuu kaloo ku fiicanyahy marka aan

fiirinayno qalbiga qofkasta isaga ayaa haggaajin kara qalbigiisa gaar ahaaneed, haduu qofku leeyahy iimaan buuxa beddeli kara wacdiga iyo waanada lagu dul akhrinaayo.

Cafiska qalbigu wuxuu caafimaadiyaa dhammaan qalbiga, caloosha, maskaxda iyo dhammaan xubnaha qofka marka sidaa leeyahy qofku marka uu xanaaqo oo ay qof kale is qabtaan dhammaan xubnihiisa way wada kacaan oo xitaa neera foosi noqdaan xalaadda iyada ah inta aad ku guda jirtid qofku waxaa laga yaabaa in uu waxyaalo badan ka halaabo, marka haddii aad intaad shaydaan iska naarto, labo ragco suna ah tukato aad iska cafiso daawo ayuu kuu noqonayaa qalbigaagana wuu kuu nadifoobayaa. Cafiska qalbigu waxan dhihi karaa waa xal-waara loogana gaari karaa danbiyadda aan kala galnay haddaa nahay umadda Soomaaliyeed waa haddii qof kastoo naga mida uu dareen sanyahay faa'idada uu nafsada u leeyahay cafisku gaar ahaan qalbiga waayo waxaan niri qalbiga wixii gala lagama soo saari karo waa qalbiga dahsoon.

Maxaan isku cafin la'nahay oo waliba qalbiga iskaga cafin la'nahay? Maxaa keena wax ma yaqaanka meel uga soo wada jeedsan la'nahay?

Hadaan isku dayo jawaabta su'aasha hore waxaan isku cafin la'nahay cafiskeenii wuxuu noqday mid afka keliya laga dhaho oo aan qalibga laga dhihin ficiilkiina la jirin, cafiska noocaan ah ma noqon karo mid daawo ah ama xal keeni kara.

Anaga taas wan dhayal sanay oo waxba ka soo qaadi waynay waxana ujeedna waxyaalo haddii lagu heshiiyo ay fududahay in horay loogsa sii socdo, waxaan u baahanahay cafis qalbiga ah.

Goorma ayaa cafis loo baahdaa? Goormase la isdhihi karaa wuu dhaqan galay?

Cafiska waxaa loo baahdaa sidaan kor ku soo sheegnay markii hal qof, labo iyo ka badan oo dad ay is qabtaan, is qabashadaas hanoqoto gacan ka hadal ama af ka hadal ama ha noqoto in uurka wax la iskugu hayo.

Dadku isku mid ma ahan isku sina wax uma arkaan oo dabeecadahooda way kala duwan yihiin qofba si buu wax u arkaa, waxaa jira dad inta badan wax ka fiiriya dhan ka qaloocan oo aysanba waxa wanaagsan u muuqan macnaha dadka noo caas ah waxaba lama fahansiin karo, waxayna jecel yihiin in ay tooda socoto, markasta isaga ayaa isla saxan maxaayeelay tusaale ahaan dadka noocaas ah haddii

ay wax idin kala gaaraan waxaad ku khas bantahay in aad tanaasushid oo aad iskaga tagtid cafisid.

Dilaaga dahsoon waxaan u arkay in uu yahay mid kala dilay qalbiyo is jeclaa, kala dilay dadwada dhashy, kala fogeeyay xigto iyo qaraabo wiil iyo abtigiis, gabar iyo habaryarteed, wiil iyo adeerkii, gabar iyo eedadeed waa wax aan caadi ahayn markii qaraabadii ay dulmi aan Alle ogolayn isku gaysanayaan misna aan inteenii kale inyar mooyaane ay uriyaaqayaan.

Cafisku waa daawo akhiro iyo adduunba wax buu ku tarayaa caafimad ayaad ka helaysaa, adduunka intaad joogtid, aakhirona waxaad ka helaysaa raali ahaanshiyaha Alle waayo haddii aad cafidid qof gaf aad kala gasheen oo qalbiga aad ka cafisid ajar ayaad helaysaa iyo danbi dhaafna wuu kuu noqon.

Cafisku waa mawduuc haddii uu dhaqan galo noo noqonaya horseed, wuxuu kaloo noo noqonayaa waxa keliya na anfacaya aakhiradeena iyo adduunkeena waayo waxaan noqonay ummad af-ka iyo uurkaba iska jarjarta. Haddii qofkasta oo naga mida uu habeenkii iska cafiyo qofkasta oo ay maalintaas wax kala galeen waxaan aamin sanahay in uu yahay qof nadiifiyay qalbigiisa nafsad ahaana u caafimad

qaba Illaahay xagiisana ka nabada. Cafisku haddii lafahmo waa mawduuc noo horseedaya heshiis, wadajir, horay usocod, dhexdeena oo is jeclaano, isu soo dhawaansho dhinac walba ah.

Fahamka Waddaniyadda

Waddaniyaddu waa dareen iyo dhiiranaan laga dheehan karo ruux uu uqabo dalkiisa. Ereyga waddaniyadda macno badan ayay uyeeleen khuburo, aqoonyahano, xeeldheerayaal waayo arag ah, siyaasiyiin iyo culimo badan. Waddaniyadda waa maado ka mida kuwa loo yaqaan arrimaha bulshada. Waxayna hoos imaan maadooyinka Juquraafiga iyo cilmiga bulshadda.

Waddaniyadda waxaa lagu bartaa in aad hesho xaqa iyo xuquuqda aad leedahay sidoo kalena in aad qaadato masuuliyadda muwaadinka. Waddaniyadda waa in la baro dhammaan qeybaha bulshada si ay ugu dhaqmaan sharciga dalka uyaal, nidaamka ganacsi, midka siyaasadeed, dhaqanka, waxbarashada, caafimaadka, kheyraadka dalka iyo guud ahaan arrimaha bulshada.

Waxaa lagama maarmaan ugu noqotay in la barto waddaniyadda waa in uu qof kasta oo muwaadin ah helo.

1. Xaqa uu dalkiisa ku leeyahay.
2. Xaqa muwaadinka lagu leeyahay.
3. Ilaalinta sharciyadda uyaal dalka.
4. Ilaalinta hiddaha iyo dhaqanka.

5. In muwaadinka la baro danta guud iyo midda khaaska ah.

6. In muwaadinka lagu ababiyo dareen jaceyl iyo mid mas’uuliyadeed.

7. In muwaadinka lasiiyo waxa uu xaqa ugu leeyahay dalkiisa iyo in loo sheego in uu mas’uuliyad ka saaran tahay waddankiisa.

8. In muwaadinka lagu ababiyo mabda'a iyo qiyamka muwaadinimada iyo barashadeeda. Dhammaan qodobada aan kor ku xusay waxay inoo horseedayaan in la helo bulsho jirta, garanaysa danta guud iyo tan khaaska ah sidoo kalena in la helo bulsho ka qayb qaadanaysa howlaha qaran iyo dib udhiska dalkooda.

Muhiimadda laga leeyahay in muwaadinka la baro waddaniyadda wax kale ma ahan waa in uu dalkiisa daacad u ahaado, kana difaacdo gowracatada iyo dhiig miiradka raba oo u hanqaltaagaya xadidda iyo gurashada dalka kheyraadkiisa. Bulsho kasta oo ku nool dunida waxay leeyihiin qiyam iyo mabda' ay ku ilaashadaan dalkooda. Hadday arkaan qof wasakhaynaya dalkooda way canaanan, amaba sharciga ayay la tiigsadaan iyagoo ku andacoonaya waxa uu naga wasakhaynayaa deegaanka iyo dalkayaga.

Ma ahan ruuxaan in uu ku dhashay dal jaceylka amaba ma dhihi karno dadkaas waa naga sareeyaan balse waxa keliya ee nadheeryihiin waa ilaalinta dalkooda hooyo. Waa muwaadiniin lagu soo barbaarshay waddaniyadda, ilaalinta iyo dhowridda bilicda iyo quruxda dalkooda uu leeyahay. Haddaba si bulshada Soomaaliyeed loo dareensiiyo waddaniyadda iyo dal jaceylkooda waa in la baro dalkooda si ay uga hortagaan dhibkasta oo ku soo fool leh dalkooda. Muwaadinka waa in lasiiyo xirfad, xeeldheeri, aqoon mid maadi iyo mid diini. Sidoo kale muwaadiniinta waa in loo hagar baxo, lana tuso in iyagu dalka leeyihiin, waxkasta oo ay ubaahdaana ay helayaan.

Sidee loo barankaraa waddaniyadda?

Bulshada Soomaaliyeed in ka badan 80% ma fahansana waddaniyadda waxay tahay. Waxaana daliil kuugu filan in dalkooda ay burburkiisa iyo dib udhiciisa ka shaqaynayaan. Waxay kuwada haminayaan dhammaantood ama badankood in ay dalal shisheeye aadaan, waxna waa tahriibeen, waxna waa qalbi ka dhoof, inta kale ee soo hartana waa dad dantu biday ama duruufta haysata awgeed aysan ugu hanqaltaagin dalkale. Haddaba muwaadinimada waa jaceylka aad uhayso dalkaaga, daliil

waxaa kugu filan Nabigeena {NNKH} waxa uu yiri markii uu Maka laga baxshay { Kamaan tageen haddaan layga kaa eryin}. Haddiiba muhiimad gaara siisay diinteena waddaninimada, waxaan fahmaynaa in waddaniyaddu tahay shey qaaliya oo waajib ku noqonaysa qofkasta oo dalka udhashay.

Qof ka waddaniyadda leh lama mid aha qofka aan waddaniga ahayn waayo waddanigu waxa uu leeyahay sifo iyo calaamado lagu yaqaan.

Waxaana ka mida:-

1. Waddanigu waxa uu dhisaa dhulkiisa amar la'aan halka kaan ahayna uu dumiyo dhulkiisa.
2. Waddanigu waxa uu difaacaa dhulkiisa isagoo u ogolaan in dalkiisa la iibsado halka kaan waddaniga ahayn uu dhulkiisa usoo horseedo cadow aan asxaan lahayn oo ka shaqaynaya burburinta iyo kala gaynta dadkiisa.
3. Waddanigu waa nin leh karti iyo awood uu isaga dhiciyo hororada raba in ay boobaan dalkiisa halka kan aan ahayna uu farxad iyo damaashaad utahay in uu arko dhurwaaga dalkiisa daldalanaya.
4. Waddanigu waa kan had iyo jeer ka fekera dadkiisa iyo dalkiisa, mana ogola in la laayo, la xasuuqo, loo horseedo

gaajo iyo dihaal halka kaan ahayna uu intaas ka bacmushtaro. Waxa uu qandaraasyo waaweyn ku sooqaataa burburka dalkiisa, dadkiisa iyo kheyraadkiisa. Waxa uu iibshaa dadkiisa si uu shilimaad yar ugu beddesho.

5. Waddanigu ma ahan danayste waa udaneeye halka kaan ahayn uu yahay danayste daba dhilif ah oo aan bar rajo ah lahayn.

6. Waddanigu waa midka jecel in uu caalamka la tartamo, waddankiisana uu noqdo dalka adduunka ugu qanisan halka kan kale uu yahay ninka jecel in dalkiisu noqdo meesha ugu liidata caalamka oo aan rajo lahayn, dadkuna aysanba ku qanacsanayn.

7. Waddanigu waxa uu jecelyahay dadkiisu in ay helaan waxbarasho lacag la'aan ah, caafimaad lacag la'aan ah, shaqo iyo addeeg kasta oo ubaahdo halka kan kale intaas lidkeeda jecelyahay oo weliba ka bacmushtaro.

8. Waddanigu waa kan ku faana hiddihiisa, dhaqankiisa, Soomaalinimadiisa. Waxa uu mar walba ku xamdiyaa Allihii ka dhigay Soomaali halka kan kale uu intaas ka shalaayo in uu ka dhashay Soomaali, waxa uu jeclaadaa in dalal kale uu ka dhasho.

9. Waddanigu lama siro, haddii la sirana ma noqdo damane hurda oo dalkiisa wax dhiba uhorseeda halka kan kale uu moodo sharaf, xarako iyo ammaan in la burbursho dalkiisa.
10. Waddanigu ma ogola in dadkiisa la dilo bilaa sabab halka kan kale uu ku farxo haldoor hebel waa la dilay iyo heblaayo.
11. Wadddanigu waxa uu fishaa kheyr, waa nin ama gabadh isku kalsoon oo leh qiyam iyo mab'da ay dalkeeda ku ilaashato halka kan kale uusan lahayn qiyam iyo ujeedo fog oo ku saabsan mustaqbalka dalkiisa iyo dadkiisa.
12. Waddanigu waa kan xataa hadduu awoodi waayo in dalkiisa u difaaco ku difaaca af iyo adin ama qallin iyo bug halka kan kale uusan ku jirin himadaas.

Alle ha unaxariisto abwaankeeni ku caan baxay waddaniyadda iyo doorkii uu ka qaatay Halgankii guumaysi la dirirka Cali Xuseen Xirsi oo ku magac dheeraa {Cali Makaadsade} gabay uu tiriyay ayaan ka sooqaadan tix yar oo uu ku baraarujinaayay bulshada in wax lawada qabsado oo wadajir wax lagu hagaajiyo. Wuxuu yiri:-

Hantidaan wadaagniyo haddaan hawsha socodsiino
Oo aad hirgelisaan mabda'a lagu hayaamaayo
In horumar lagu waarayaa hubanti weeyaane.

13. Waddanigu waa midka dalkiisa ficil iyo fikirba ku taageera, hadday ahaan lahayd suugaan, adin iyo qallinba halka kan kale uusan kala jeclayn waxaas oo dhan.

14. Waddanigu dib uma milicsado qabiilka iyo qabyaaladda, waxa uu ogyahay waxa ay tahay iyo in aysan faa'ido lahayn. Waxaana mar walba qalbigiisa ku soodhacaya islaweyni, qab iyo quursi, qashin, qabyaalad, qaracan, qeylo, qamuunyo, gaajo, haraad, hoy la'aan, hu'laan, silac iyo diif, barakac iyo tuugsi iwm.

15. Muwaadin kasta waddani ma ahan, waddanigu sifo gooniya ayuu leeyahay kuwa kor ku xusan iyo kuwa kale oo badan.

Kuma soo kooobi karo macnaha waddaniyad iyo addeegsigeeda, waxaan intaas kor ku soo koobay bal in fahan guud laga fahmo macnaha waddaniyad iyo qiimaha ay leedahay. Ma ahan wax la dhayal sankaro waddaniyadda waana waajib qof kasta oo muwaadin ah in uu la yimaado waddaniyadda.

Haddaan Soomaali nahay waxa dadyowga kale ee dunida ku nool naga reebay waa qabyaalad iyo waddaniyad la'aan. Ilmaha kolka uu adduunka ku soobiiro waxa lagu ababiyaa qabiil iyo qabyaalad, iskuulka haddii uu tagana waxaa

naloo dhigaa quruumo kale, nalama baro qiyamka iyo mabda'a iyo shuruucda dalka. Burburkii iyo kolkii aan dawladdeeni iska ridnay waxaa waddanka ka dhacay boob iyo burbur joogta ah iyo wax aanan dib ugu noqonayn haddeertaan.

Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa {Wixii kugu dhici lahaa kun sanay kaa weeyihiin}, waa wax noo qornaa in aan rafaad iyo silicaas marno. Haddaba wax kasta oo dhacay waa in aan ka barano cashar, waa in aan dib isugu noqono oo dhahno maxaa inaga qaldan? Maxaan ubaahanahay in aan samayno si aan uga hortagno in ay dhib dambe dhacdo?

Su'aalahaas dhammaan waa in uu ka jawaabo akhriste kasta oo arka, waayo waa kuu muhiim in aad iswaydiiso.

Dadku waa labo qeybood:-

1. Talo keen: Waa in aad noqoto mid talo keena oo bulshadiisa wax ku sookor dhiya, hadday sax tahayna waa laqaadan, haddii laga maarmi karona dib baa loo dhigan.

2. Talo raac: Haddii aadanba wax talo iyo tusaale ahba aadan ku soo kordhinayn dadkaaga iyo dalkaaga waa in aad noqoto mid taladii wanaagsan oo loo soojeedsho raaca sababtoo ah Fiqi tolkii kama janno tago, dadkaaga waxay

kuula yimaadeen haddayba sax tahay waa in aad qaadato oo aadan noqon khilaaf ujooge iyo talo makeene.

Hanoqon mid naftiisa waxay ugu sheekayso oo khaldan in aad raacdo waayo naftu kulama rabto in aad wanaag samayso, lugooyada ayay kula rabtaa iyo dibin daabyada. Haddii aad raacdona waxaa kuu danbayn doona welwel iyo walbahaar joogta ah iyo ka qoomamayn.

Waa tii uu lahaa Alle ha unaxariistee Abwaankii caanka ahaa Cismaan Yuusuf Cali Keenadiid mar uu lahaa:-

Naftuna caasi weeyiyo sidii cado shisheeyaahe
Intay caaq sidiis kaa dhigtay kugu cayaartaaye
Markii taladu kula caaridaa la caqli yeeshaaye.

Haddaba qof kasta oo Soomaaliyeed waa in uu noqdaa muwaadin uhalgama dhulkiisa iyo dadkiisa waxaa ku qorin taariikhda. Ninkii tiin talaaliyo kii timir beera taariikhdu way qorin. Noqo mid dalkiisa wax walba ugu hura, naftiisa ka hormariya, difaacda, ka ilaashada cadowga doonaya in uu dalkiisa burbursho, noqo waddani ee honoqon muwaadin keliya.

Waddaniyad Xumada Maxaan Ka Dhaxalnay?

Bini'aadanka sidiisaba waa hadba sida uu iska dhigo haddii uu ku talo galo in uu wanaag sameeyo waxaa uu helaa miraha samaha uu sameeyay balse haddii Bini'aadanku ku kaco wax aan uhaboonayn mustaqbalkooda iyo tan guud waxay halis gelin karaan jiritaankooda iyo in ay noqdaan dad iyo dal jira.

Haddii inta waddaniyadda leh ay ka badanyihiin inta aan waddaniyada lahayn waxa ay saamayn kartaa in laga takhaluso inta aan waddaninimo kujirin. Waxaase daran dadka aan lahayn waddaniyad haddii uu hormuud unoqdo qaran ama ummad waxaa imaan doonta jiritaankooda fog oo mustaqbal in mugdi galo.

Haddaba haddii aan usoo daadego hadafkayga iyo yoolkayga aan usocdo, maxay keentay waddaniyad xumadu? Waxay keentay waxyaalo badan oo aan la soo koobi karin gaar ahaan dadkeena Soomaaliyeed.

1. Qabyaalad: Waxyaalaha ugu xun ee laga dhaxlo qabyaalada waxaa asal u ah waa iyada oo la tuuro danta guud, lagana tago wada dhalashadii iyo hilib wadaagii ay

qowmiyad lahayd taas oo lagu beddeshay damiir qabyaalad ka buuxdo iyo in si khaldan loo addeegsado qabiilkii iyadoo laga talaabayo xadkii ay lahayd laguna dhiirado hannaan aan haboonayn.

In adoo ujeeda waddo sax ah oo kuu muuqata oo aad ogtahay waddadaan halka ay tagto iyo amnigeeda oo aysan wax dhib ah kaaga imaan karayn mariddeeda haddii aad ka leexato oo aad qaado waddo ama wadiiqo mariddeeda aad ogtahay in uu dhib yahay, lana kulmi doontid wax aadan ku faraxsanayn, ciribteeduna tahay halaag iyo qun goyn sow ma haboona in aad ka leexato una weecato tan habboon.

Dhibka ugu weyn ee haysta dadka waxa weeye iyagoo og falka ay samaynayaan waxa ka dhalan kara ayay haddana ku dhiiradaan in dadkooda u horseedo murugo iyo qaran jab. Haddii aan ka eego xagga Soomaalida, xaqiiqdii waxay dadka inta badan jecelyihiin qabiilka balse qabiilkii loogu talagalay in laysku garto kan xigtada ah haddii aad ubeddesho kawaran oo aad dhahdo, qabyaaladda kasiiwacan, sow dhib nagu ma ahan jiritaankeena iyo mustaqbalkeena fog. Adduunka waxay noo arkayaan in aan nahay dal aan jirin oo aan lahayn mabda' iyo waddaninimo.

Sow nacas walba iyo dal walba kugu soodhiiran maayo oo inta kuu yimaado oo ku dhaho waxaad tahay laandheere, adoo laan-dheeraa maxaa halkaan ku dhigay kac oo shaqeyso oo wax walba oo aad rabto baabi'i annaguna garab iyo gaashaan baanu kuu noqon iyo baalal aad ku duusho. Waxayna kugu dhiirigelinayaan in aad dalkaaga burburiso, qoriga iyo buntukha ku garaacdo oo aad layso xigaalkaa iyo dadkii aad isirka wadaagteen iyo burburka dalkaaga.

Adiguna aad madaxa ruxdo yeeshana wadiiqada xun, kuna kacdo fal xun, sow ma ahan damiir xumo iyo waddaniyad la'aan, damiirkaaguna kuma siin xaalka aad hadda ku jirto oo nacasnimo.

Qabiilka Rabbi waxa uu nagu yiri isku garta balse ma oran qabyaalad u addeegsada oo ku burbursha dalkiina, dadkiinana ku laaya, kuna dulmiya. Qabiil aragnay halka uu nadhigay iyo waxa uu na dhaxalsiiyay, sow ma haboona in aan garano wixii adduunkaan naloo keenay, sababta aan ujirno iyo dalka waxa naloogu sameeyay oo la yiri isaga noolaada dushiisa waxa uu idin yahay firaash. Haddii aad firaashkii ama meeshii aad seexan lahayd iska burburiso sow dhib kuma ahan adi?

Alle Qur’aankiisa waxa uu ku dhahay:-

يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنَّا خَلَقْنَاكُم مِّن ذَكَرٍ وَأُنثَىٰ وَجَعَلْنَاكُمْ شُعُوبًا وَقَبَائِلَ لِتَعَارَفُوا ۚ إِنَّ أَكْرَمَكُمْ عِندَ اللَّهِ أَتْقَاكُمْ ۚ إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ خَبِيرٌ

"War dadow waxaan idinka Abuurnay lab iyo dhedig, waxaan idinka yeelnay dadyow iyo qabaa'il, si aad isugu garataan. Midkiina idinku karaamada iyo sharafta badan waa midkiina idinku Alle ka cabsiga badan, Illaahay waa mid og oo khabiir ku ah waxaad samaynaysaan".

Haddaba, sow kuma caddaan qabiil in uusan waxba kuu tarayn iyo qabyaalad toona, Alle ka cabsiga un ayaad ku liibaanaysaa oo meel ku gaaraysa waa in aad isaga ku dhegtaa.

2. Addeecid la'aan: Bini'aadamka waxaa la faray in ay addeecaan madaxdooda, dadka hoggaamiya amarkoodana qaataan wax walbana looga dambeeyo iyaga. Haddii aad khilaafto mar walba, kana hortimaado wixii lagu amray waxay dhib ku tahay jiritaankaaga. Alle marwalba waxa uu ku celceshay Aayaad ka mida Qowlka Alle, in la addeeco Uulul amriga yacni madaxdooda, waxaan ka ahayn macsi iyo xumaan.

Waxa uu yiri:-

قال تعالى: ﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا أَطِيعُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا الرَّسُولَ وَأُولِي الْأَمْرِ مِنْكُمْ فَإِنْ تَنَازَعْتُمْ فِي شَيْءٍ فَرُدُّوهُ إِلَى اللَّهِ وَالرَّسُولِ إِنْ كُنْتُمْ تُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ ذَلِكَ خَيْرٌ وَأَحْسَنُ تَأْوِيلًا ﴾ النساء: 599.

"Kuwii Illaahay addeecay iyo Rasuuulkiisa iyo Uluul amrigooda yacni madaxdooda oo idinka idin kamida, haddii aad ku murataan shay dhexdiis oo isku qabataan, ula noqda Allaah iyo Rasuulka, haddii aad tihiin mu'miniin rumeeyay Allaah iyo maalinta qiyaame, taas ayaa idin kheyr badan idina suurad wacan".

Alle Subxaana watacaalaa, wuxuu Qur'aankiisa noogu caddeeyay in aan addeecno madaxdeena.

Nebigeena "NNKH" wuxuu yiri:-

وقال صلى الله عليه وسلم: ((السمع والطاعة حق على المرء المسلم فيما أحب وكرِه، ما لم يؤمر بمعصية، فإذا أُمِر بمعصية، فلا سمع عليه ولا طاعة)

"Dhagaysta oo addeeca qof kasta oo Muslim ah xataa haddii aad jeceshihiin ama necebtihiin, haddii uusan idin amrin macsi, haddii uu idin amro Macsi, yaan la dhagaysan, lana Addeecin".

Haddaba waan fahmaynaa heerka uujoogo addeecidda madaxda iyo hoggaamiyaha in ay tahay lamataabtaan oo ay

ku dhisantahay jiritaanka ummadda, haddii la caasiyana waxaa ka dhalan kara wax aan haboonayn oo aan la mahadin.

3. Xumaanta oo la banaysto: Dembiyada aan ku dhacnay haddii aan nahay islaamka waxaa kamida in aan banaysanay xumaanta oo aan xalaashanay wax Eebbe naga xarimay. Waxaa haboon in aan Alle unoqono, kana waan towno xumaha iyo waxkasta oo Alle ka caraysiin kara. Haddii aan nahay Muslim wax badan buu Alle noo banneeyay, wax yarna waa naga xaraam yeelay. Soomaaliduna intii yarayd ee laga xarimay ayay ka dhigteen xalaal oo waa bannaysteen.

Waxaana ku dhacday carradii Alle, waxaana nagu habsaday Amni xumo, dagaal joogto ah, dulmi, abaaro joogta ah, fatahaado, damiir xumo, gaajo, faqri iwm. Alle wuxuu naga xarimay xumaanta oo dhan, hadday ahaan lahayd mid muuqata, mid qarsoon, iyo waxkasta oo aan xaq ahayn. Sidoo kalena Alle ayaan wax lawadaajinay, kuwaas oo Alle ku caddeeyay xujooyin cadcad iyo daliilo looga digaayo dadka. Alle waa mid og wax kasta oo aad ku hadasho, samayso, ku fekerto, iwm. Haddaba saw

damiirkaagu kuma siinaayo in aad iska dhaafto xumahaan oo idil, una weecato wanaaga iyo wixii lagu farad yeelay.

Alle wuxuu Qur'aankiisa ku yiri isaga oo Nebiga ku leh usheeg in xumaanta mideeda muuqata iyo midda qarsoonba xaaraanyihiin.

قُلْ إِنَّمَا حَرَّمَ رَبِّيَ الْفَوَاحِشَ مَا ظَهَرَ مِنْهَا وَمَا بَطَنَ وَالْإِثْمَ. (33) الاعراف

"Ku dheh Nebi Allow, wax kale maahane Alle wuxuu idinka xarimay xumaanta, midda muuqata oo aad samaysaan iyo midda qarsoon oo uurka ku haysaan iyo dembiyada".

Alle waxaan ka baryaynaa in uu xaqa nawaafajiyo, Alle kacabsigana quluubteenana joogteeyo.

Markale Alle Qur'aankiisa wuxuu ku yiri:-

وَأَطِيعُوا اللَّهَ وَالرَّسُولَ لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ

"Addeeca Allaah iyo Rasuulkiisa waxaad mudantihiin in Alle idin naxariisto".

Waa in aan xumaha iska dayno, Alle usoo noqono oo dembi dhaaf waydiisano, kana joojino wax ummaddeena halaag ukeeni kara, dib udhac iyo damiir xumo. Waa in aan dalkeena u addeegno si Alle ka cabsi leh, dadkeenana unasteexayno si niyad furan, una addeegno si niyo ah. Waxaan gaaraynaa barwaaqo iyo nimco Eebbe, haddii kale

waxaan ku jiraynaa dhibkaas aad aragteen iyo imtixaan joogto ah.

4. Tanaasul la'aan:- Qaran burburka ugu weyn ee ina haysta waxaa ka mida in aan danta guud laysugu tanaasulin, dadkana la boobo, lana dhaco. Haddii amar uu ka soo baxo madaxa sare waa la khilaafayaa bilaa sabab, waxaana ka dhalan kara cadaab iyo dhib joogto ah.

Alle Qur'aankiisa wuxuu ku yidhi isagoo ka digaya in aan la khilaafin madaxdooda, haddii kale ay asiibayso fitno ama ay asiibayso cadaab kulul.

وقال سبحانه: ﴿ فَلْيَحْذَرِ الَّذِينَ يُخَالِفُونَ عَنْ أَمْرِهِ أَنْ تُصِيبَهُمْ فِتْنَةٌ أَوْ يُصِيبَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴾ [النور

Waa in aan ka digtoonaano in aan ka hornimaadno madaxdeena, una tanaasulno qaranimadeena, iskana dhaafno damaca khaaska ah, waxaan hubaa in aan gaarayno heer sare, waxaan la tartamaynaa dunida waayo dadka Soomaalidu waa dad maskax badan, caqli badan, aadna ufirfircoon, hal-abuurna leh.

Allena wuxuu Qur'aankiisa ku yidhi:-

وقال تعالى: ﴿ لَقَدْ كَانَ لَكُمْ فِي رَسُولِ اللَّهِ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ لِمَنْ كَانَ يَرْجُو اللَّهَ وَالْيَوْمَ الْآخِرَ وَ ذَكَرَ اللَّهَ كَثِيرًا ﴾ [الأحزاب}

“Waxaa xaqiiqo ah in aad ku dayataan Rasuulka Alle, kudayasho wanaagsan, ruuxi rajaynaya in uu la kulmo Allaah iyo maalinta qiyaame, waa in aad xustaan Allaah inbadan”.

Waa in aan ka fekerno aakhiradeena, una shaqeysano adduun iyo aakhiro. Kana fekerno aayaheena fog si cilmiyaysan, raacnana talaabooyinkii uu Suubanaheenii qaaday, waxaa xaqiiq ah in aan liibaanayno.

5. Run l'aan:- Qofka damiirkaleh oo Alle ka cabsiga badan oo jecel dadkiisa, dalkiisa, diintiisa waxa uu sheegaa runta, ma kagabado. Waxkasta oo dalkiisa uu u arko dhib, waxa uu ku dhiiradaa in uu sheego xataa haddii uu naftiisa ku waayayo. Qofka aan lahayn waddaniyadda waa midka daboola xaqa, muujiya xumaha, ummaddana ku maaweeliya been iyo marin habaabin. Waxkasta oo dadkiisa, dalkiisa, diintiisa dhib ku ah ma sheego oo runta waa dhibtaa, beenta ayuu ku raaxaystaa xumaha dalkiisa ayuu faafiyaa, waa ku farxaa dhibka soogaara dadkiisa, dalkiisa iwm.

Waxayna caddayn utahay qofka waxa uu yahay shaqsiyaddiisa iyo damiirkiisa. Soomaalidu waxay ku maah maahdaa " **Runi rag kama nixiso**" oo ula jeedaan in

runta laysku sheego oo la caddeeyo xaqiiqada waayo horaa loo dhahay "**Run iyo ilkaba waa lacaddeeyaa**", waa in runta la sheego lagana gaban.

وفي الحديث الشريف: " قل الحق ولو كان مرا

Xadiiskaan Waxa uu oranaya "Sheeg xaqa haba kharaaraadee".

Yacni in la sheego runta xataa haddii ay ka dhalanayso dhib, ama ayba ka kharaartahay dacarta halagaban ee sheeg xaqiiqada iyo sida ay wax ujiraan, haddii kale wixii aad qarsato way ku qarsadaan.

6. Cafis la'aan: Bulshada Soomaaliyeed waxay ubaahantahay oo qudha dad waxkasta oo soomaray in ay iska cafiyaan, iskana ilaawaan waxkasta oo horay usoomaray. Bulshada Soomaaliyeed weli taasi kama hirgelin siguud balse waxaad moodaa in muddadaan danbe in waxbadan iska beddeleen oo hadda hayaan waddadii isku cafin lahaayeen.

Balse ruuxii laga waayo intaas oo ku siidhiirada in uu horay usii wado gabood falada ka dhex dhaca bulshada iwm, waxaan oran karaa waa qeyb kamida waddaniyad la'aanta, waxaana haboon in bulshadu iscafiyaan oo wax wada qabsadaan. Waa tii hore utiri Soomaalidu "**Gacmo**

wadajir bay waxku gooyaan". Bini'aadankuna waxa sal u ah in ay iscafiyaan oo dar Allaah isugu tanaasulaan. Waxaa Alle ugu beddelayaa wax ka kheyr badan, diinteenu aad bay udhiirigelisay cafiska, xoogga ayayna saartay. Waxayna ummadda islaamka ku boorisay in ay iscafiyaan cafis waafi ah.

Xadiis laga sooweriyay Suubanaheena {NNKH} wuxuu yiri:-

عن أبي ذَرٍّ جُنْدُبِ بْنِ جُنَادةَ، وأبي عبْدِالرَّحْمنِ مُعاذِ بْنِ جبلٍ رضيَ اللَّه عنهما، عنْ رسولِ اللَّهِ ﷺ، قَالَ: اتَّقِ اللَّهَ حَيْثُمَا كُنْتَ وأَتْبِعِ السَّيِّئَةَ الْحسنةَ تَمْحُهَا، وخَالقِ النَّاسَ بخُلُقٍ حَسَنٍ رواهُ التِّرْمذيُّ

“Alle ka cabso meel kasta oo aad joogto, xumaantana raacsii wanaag way tiraysaaye, dadkana kula dhaqan dabeecad wanaagsan”.

Xadiiskale oo laga sooweriyay Rasuulka {NNKH}, oo ku saabsan carada iyo xanaaq iyo in uu qofku isdejiyo haddii uu dareemo xumaan iwm. Wuxuuna yiri:-

عن أبي هريرة رضي الله عنه: أن رجلًا قال للنبي صلى الله عليه وسلم: أوصني، قال: ((لا تغضب))، فردد مرارًا، قال: ((لا تغضب))؛ رواه البخاري

Abuu Hurayra Alle raali haka noqdee, waxaa laga weriyay: In nin Rasuulka “NNKH” u yimid oo ku yiri "Rasuul Allow

ii dardaaran, Rasuulka “NNKH” wuxu ninkii ku yiri: Ha caroon, Su'aashii buu ku celceliyey, Nebiguna “NNKH” wuxuu ku celceliyey ha caroon”.

Waxaan kaloo sooqaadan xadiiskale oo uu sooweriyay saxiixu Muslim waxaa uu sooqaatay xadiis caddaynaya wanaagu in uu yahay samafal oo dembi kasta oo aad gasho in aad Alle utoobad keento, dembi dhaafna waydiisato qofka aad waxkagashay waa muhiim.

عن النواس بن سمعان رضي الله عنه، عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: ((البر حُسن الخُلق، والإثم ما حاك في نفسك وكرهت أن يطلع عليه الناس))؛ رواه مسلم.

Nawaas Bin Samcaan (Alle raali haka noqdee) waxaa laga weriyey in Nebigu “NNKH” uu yiri "Wanaagu waa dabeecadda wanaagsan, dembiguna waa wixii nafsadaada dhibaya oo nacaysid in dadku kugu arkaan”.

Waa in qofkaska wanaag ka shaqeeyo, waxkasta oo aad ka tabanayso qof, bulsho iyo qaran in aad Alle dartiis isaga cafiso, waxaa laga yaabaa in maalin aan maalintaas ahayn aad hesho, adigana faa'ido ayay kuu tahay oo qalbigaagu wuxuu noqonayaa mid saafiya oo ka madax bannaan calool xumo iyo gocosho.

7. Xishood la'aan: Waa muhiim in bini'aadanku kala xishoodo, kana xishoodo waxkasta oo u arko in falcelis ka imaan karo, waana muhiim in sharaftaada, karaamadaada, iyo mustaqbalkaaga ilaashato. Waa muhiim qofkasta oo Muslim ah in uu xishoodo, kana xishoodo waxkasta oo keeni karta dib udhac, karaamo darro iwm. Waddaniyad xumada waxay keentay in nin lagu tuhmaayo aqoon, garasho, muwaadinimo in uu dalkiisa usoohago wax dhib ukeeni kara, hadday ahaan lahayd qaranka ama bulshada iyo dhaqanka. Waa muhiim in qofka waddaniga ah ka fogaado waxkasta oo carqalad u keeni kara oo dib udhac iyo gocosho keeni kara waa in aad ka dheeraato.

Xishoodku aad bay noogu boorisay diinteena suuban, waxaana waajib ah qof kasta oo Muslim ah in uu xishoodo kana xishoodo waxkasta oo dembi ukeeni kara.

عَنْ ابْنِ مَسْعُودٍ عُقْبَةَ بْنِ عَمْرٍو الْأَنْصَارِيِّ الْبَدْرِيِّ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صلى الله عليه وسلم "إِنَّ مِمَّا أَدْرَكَ النَّاسُ مِنْ كَلَامِ النُّبُوَّةِ الْأُولَى: إِذَا لَمْ تَسْتَحِ فَاصْنَعْ مَا شِئْت" . رَوَاهُ الْبُخَارِيُّ.

Abuu Mascuud Cuqbata Bin Camrin Al-Ansaariyi Albadriye (Alle raali haka noqdee) waxaa laga wariyey in Rasuulku (NNKH) uu yiri "Dadku waxay ka helaan

Anbiyadii hore hadalkoodii ahaa: Haddii aadan xishoonayn samee wixii aad doonto”.

Qofka damiirkiisa waxa uu ku xidhanyahay hab dhaqankiisa, hadday ahaan lahayd hadal wanaagsan, ficil wanaagsan iyo aragti wanaagsan. Waa in aad ka fekerto hadafkaaga iyo yoolkaaga mustaqbal.

8. Xaaraan: Waxaa inbadan ummadda halaagay in ay cunaan wax aysan xaq ulahayn hadday ahaan lahayd in ay sadbursi iyo caddaalad daro waxay ku helaan in ay quutaan, xirtaan una hoydaan.

Qof kasta oo islaam ah waxaa ka mamnuuc ah in uu la yimaado waxkasta oo xaaraan ah. Waxaana waajib ah in uu ka dheeraado falkasta oo Alle uga caroonaayo. Waxyaalaha xaaraanta ah ma ahan oo keliya in aad macsi ku dhacdo balse waxaa ka mida in aad afka iska mariso wax aadan lahayn xoolaha dadweynaha, wax lagugu aaminay oo sigooniya uqaadato iwm. Diinta Islaamka aad bay noogu boorisay in aan isaga dheeraano waxkasta oo xaaraan ah oo aan haboonayn, waxaana soo qaadanaynaa xadiis iyo aayado.

"قوله تعالى : يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُلُوا مِنْ طَيِّبَاتِ مَا رَزَقْنَاكُمْ

Alle wuxuu yiri "Kuwii Illaahay rumeeyayow cunna wixii wanaagsan oo aan idinku arsaaqnay".

عَنْ النُّعْمَانِ بْنِ بَشِيرٍ -رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَاقَالَ: سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ يَقُولُ وَأَهْوَى النُّعْمَانُ بِإِصْبَعَيْهِ إِلَى أُذُنَيْهِ:" إِنَّ الْحَلَالَ بَيِّنٌ، وَإِنَّ الْحَرَامَ بَيِّنٌ، وَبَيْنَهُمَا مُشْتَبِهَاتٌ، لَا يَعْلَمُهُنَّ كَثِيرٌ مِنَ النَّاسِ، فَمَنِ اتَّقَى الشُّبُهَاتِ، فَقَدِ اسْتَبْرَأَ لِدِينِهِ وَعِرْضِهِ، وَمَنْ وَقَعَ فِي الشُّبُهَاتِ وَقَعَ فِي الْحَرَامِ، كَالرَّاعِي يَرْعَى حَوْلَ الْحِمَى، يُوشِكُ أَنْ يَقَعَ فِيهِ، أَلَا وَإِنَّ لِكُلِّ مَلِكٍ حِمًى، أَلَا وَإِنَّ حِمَى اللَّهِ مَحَارِمُهُ، أَلَا وَإِنَّ فِي الْجَسَدِ مُضْغَةً، إِذَا صَلَحَتْ، صَلَحَ الْجَسَدُ كُلُّهُ، وَإِذَا فَسَدَتْ فَسَدَ الْجَسَدُ كُلُّهُ، أَلَا وَهِيَ الْقَلْبُ. مُتَّفَقٌ عَلَيْه

Abuu C/llaahi Nucmaan Bin Bashiir Alle raali haka noqdee wuxuu yiri "Waxaan maqlay Rasuulkii Illaahay "NNKH" oo oranaya: " Xalaashu waa caddahay, xaaraantuna waa caddahay, dhexdoodana waxaa ah shubuhaad, mana oga in badan oo dadka kamid ah, ruuxii ka dhowrsada isu-ekaantaas wuxuu la bari noqday diintiisa iyo sharaftiisa balse ruuxii ku dhaca shubuhaadkaas wuxuu ku dhacay xaaraan, wuxuuna lamid yahay Ari raacii ku raacay Ariga beerta hareeraheeda, waxaa dhow in arigu beerta daaqo, Baraaruga' e boqor kastaa wuxuu leeyahay seero, Illaahay seeradiisu waa xaaraanta, baraaga e,. Xubnaha qofka waxaa ku sugan cad yar oo hilib ah, oo haddii uu wanaagsanaado xubnaha kale oo dhan way

wanaagsanaanayaan, haddii uu xumaadana xubnaha kale oo dhan way xumaanayaan, baraaruga xubintuuse waa qalbiga".

Haddaba sida ku cad xadiiskaan dheer waxa uu inoo sheegaya in ay kala cadyihiin xaaraanta iyo xalaasha, waxyaalaha isu eg ee tushuushku ku jiro in laga dheeraado, laga fogaado inta laga dhowrsanaan karo, haddiise aadan ka dhowrsan in aad goysay soohdintii Alle oo waxaad ka talowday waddo lagaa joojiyay, waxaana ku dhacaysaa dembi iyo gabood fal.

8. Nadaafad xumo: Astaamaha lagu garto waddaniyad xumada waxyaabaha ka dhasha waxaa ka mida in waddooyinka iyo goobaha aan loogu talagalin qashinka in la dhigo. Waxaad arkaysaa qof muwaadin ah oo Soomaali ah oo inta biyo xal ah aadna wasakh u ah ku daadinaya waddada ay dadku marayaan ama waxaad arkaysaa muwaadin inta qashin sooqaada oo dhiga waddooyinka iyo faras magaalaha. Muwaadinka waddaniga ah waxaa lagu gartaa waa midka ka dhiidhiya in uu qashinka dhigo meesha loogu talo galay meel aan ahayn waayo waxkasta waxaa loo sameeyay goob lagu uruursho wixii aan loo baahnayn.

Iimaanka waxaa ugu hooseeya waa in aad ka qaado waddada wixii dhibaya ummadda Islaamka ah, waa adoo ka leexiya waddada shay dhibaya waa meesha ugu hoosaysa iimaanka. Kawaran haddii lagaawaayo adi oo ah qof Muslim ah oo inta aad qashin ama wasakh sooqaado lana soo aado waddada? Ruuxa waddaniga ah waa midka ka ilaasha waddankiisa, hoygiisa waxkasta oo aan araga uroonayn, caafimaadka udaran, bulshada kugu xeerana dhibsanayso.

عَنْ أَبِي مَالِكٍ الْحَارِثِ بْنِ عَاصِمٍ الْأَشْعَرِيِّ قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ الطَّهُورُ شَطْرُ الْإِيمَانِ

Abuu Maalik Alle raali haka noqdee waxaa laga soo weriyay in Rasuulku (NNKH) yiri "Nadaafaddu waa iimaanka barkiisa".

Qofkasta oo islaam ah waa in uu xoogga saaraa sida uu u ilaalin lahaa faya dhowrka deegaankiisa, naftiisa iyo hoygiisa, Waana qeyb kamida Islaamnimada iyo waddaniyadda.

9. Jidgooyo ama Isbaaro: Waxyaalaha lagu garto in waddaniyaddii dhimatay, iimaankiina naaqusay waxaa ka mida in qofku noqdo qaadicul dariiq, isbaaro dhigte oo ummaddii islaamka oo safarka ah ama maraayay

waddooyinka in jidgooyo loo dhigto, lagana qaato wixii uu haystay oo idil, haddiiba uu naftiisa ka badbaado ayuuba burosidaa. Waana qeyb kamida oo ka dhashay waddajiyada la'aanta.

Diinteenu suuban aad bay inoogu sheegtay in la sameeyo jidgooyo oo islaamka xoolihiisa oo aan raali ka ahayn la dhaco, ayna ka dhalato carro Eebbe iyo naxariis la'aan waayo majiro dembi kaweyn. Kaba sooqaad qof maskiin ah oo xamaali ah ayaa quudiya agoon ama dad tabaalaysan oo aan waxba haysan, ka bacdiina waxa uu soohelay kis yar oo ay halmar quutaan, isaga oo soowada ayuu soomaray waddo ay joogaan qowlaysato dadka dhaca, kadibna waxay ka qaateen intii uu haystay oo idil. Kawaran qalbiga dulmanaha oo maskiinka ah oo u soodhididay kista yar una waday masaakiin balse dhanka kale kawaran masaakiintii loowaday oo rafaadsanaa? Sow ma dhihi karno waxaaba ku dhacaysa cuquubadii dadkaas intaan lagaarin aakhiradiisa?

Alle wuxuu yiri “ kuwii abaalkoodu wuxuu noqonayaa Alle iyo Rasuulkiisa ladagaalamaya, soconaayay arlada dhexdeeda fasaad, waa in la dilo, ama la salbiyo ama lagooyo lug iyo gacan isdhaaf ah ama laga ma saafuriyo

arlada, arrinkaas waa qeyb kamida abaalmarinta adduunyada, aakhirana waxaa usugnaaday Cadaab daran. Allow naga badbaadi.

فقوله تعالى:]إِنَّمَا جَزَاءُ الَّذِينَ يُحَارِبُونَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَيَسْعَوْنَ فِي الأَرْضِ فَسَادًا أَنْ يُقَتَّلُوا أَوْ يُصَلَّبُوا أَوْ تُقَطَّعَ أَيْدِيهِمْ وَأَرْجُلُهُمْ مِنْ خِلافٍ أَوْ يُنْفَوْا مِنَ الأَرْضِ ذَلِكَ لَهُمْ خِزْيٌ فِي الدُّنْيَا وَلَهُمْ فِي الآخِرَةِ عَذَابٌ عَظِيم

Haddaba waad dareemi kartaa cawaaqib xumada ka dhalan karta in aad noqoto ruux dadka dhaca oo hantidooda banaysta adoo addeegsanaya xoog iyo xeelad. Mana wacna in adoo Muslim ah og heerka ay diinta islaamka ka joogto jidgooyada in aad haddana aad dhigato jidgooyo, wixii aad ka sooheshana quudiso dadka kale oo aad ka dherjiso xaaraan, miyaysan kula haboonayn in aad ka waantowdo taas.

10. Jaajuus: Jaajuus waxaa la dhahaa ruuxa ka socda waddan, ama koox oo rabba in uu dad kale ama waddan kale xogtiisa iyo siraha uqarsoon ugudbiyo dadka uu ka socdo. Haddaba qofka jaajuuska sidiisaba ma ahan ruux haboon, waxa uu war ka qaadaya ruux aanba hayn war oo wuxuu aaminayaa ruuxaan isagoo siinaya sirtiisa oo idil si daacadnimo ku jirto, kan lagu sir qarsadayna wixii uu helay oo dhan ayuu ugudbin meeshii laga soodirsaday. Haddaba

haddii aan isla garanay ereyga jaajuus, kawaran adiga oo Soomaali ah haddii aad dalkale ka socoto oo aad timaado dalkaagii hooyo, kadibna aad gudbiso xogaha sirta ah ee dalkeena uqarsoon, maxaa ka dhalanaya? Miyaa lagu dhihi karaa waxaad tahay muwaadin ama waddani?

Haddiise dawladdu ku ogaato waxaad tahay khaa'in waddan oo waxaad khiyaantay waddankaagii iyo dadkaagii oo idil, waxaana tahay dil toogasho ah. Waana qeyb kamida damiir xumida ka dhalata waddaniyad la'aanta, waxaa haboon in laga waantoobo arrintaas oo aan lagu xadgudbin sharafka iyo karaamada dalkaaga, dadkaaga iyo diintaada.

وعن أبي هرير ةقَالَ: قَالَ رسولُ اللَّه ﷺ: لا تَحاسدُوا، وَلا تناجشُوا، وَلا تَباغَضُوا، وَلا تَدابرُوا، وَلا يبِعْ بعْضُكُمْ عَلَى بيْعِ بعْضٍ.

Abuu Hurayra Alle raali haka noqdee waxaa laga soo weriyay in Rasuulka yiri (NNKH) "Ha is xaasidinina, ha is jaajuusinina, ha isku caroonina, ha isku dhabar jeedinina, yuusan gadan qaarkiin qaarka kale".

Haddaba qofkasta oo Muslim ah waa in ay ka dheeraadaan xaasidnimada, jaajuusnimada, carrada iyo dhabar jeedinta.

11. Caddaalad darro: Waxaa jira caddaalad darro baahsan oo ka dhex jirta bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda, wayna

isdulmiyeen mid aad udaran oo xoogan. Waana nasiib darada xun ee nagu habsatay iyo masiibadaan aan ka bixi la'nahay. Waxaan ka dhaxalnay abaaro joogta ah, dagaalo, amni darro, cuduro aan la aqoon iyo cabsi joogto ah waayo haddii aan la helin caddaalad waa adagtahay in aad hesho waxa aad doonayso waxaadna ku noolaan inta kor kuxusan iyo kabadan. Waxaana kuu dheer tan Alle oo xisaab daran ayaa kaa dambayn doonta.

Haddii aan Soomaalinahayna waxaanba ku faanaa caddaalad darrada, waxaan ku dhaqanaa wax aan haboonayn, maskiinkii aan tabar lahayn ayaan dhacnaa, kii xoogleh ayaan ugu kaalmaynaa dulmi iyo sadbursi waxaana ka dhaxalnay dhibkaan aan faraha kula jirno diiniyanna aan haboonayn.

قوله تعالى: وَلاَ تَأْكُلُواْ أَمْوَالَكُم بَيْنَكُم بِالْبَاطِلِ

Alle Qur’aankiisa wuxuu ku yiri "Ha cuninina maalkiina dhexdiina baadilnimo”.

Alle wuxuu nooga digay in aynaan cunin maal si baadil ah oo aan ahayn xaq, inta qof la dulmiyo laga qaato xaqiisa lana siiyo mid kale oo aan xaq ulahayn.

12. Laaluushka: Waxyaalaha aan ka dhaxalnay waddaniyad xumada waxaa kamida in aan ku shaqeyno

laaluush anagoo mid ka qaadanayna lacag si aan danihiisa ugu fulino, waxaa laga yaabaa ruuxaas in uu dhib iyo fasaad ku hayo dadka, diinta iyo dalkaba. Waxaa lagayaabaa in uu bann-aysanaayo wax uusan xaq ulahayn isagoo lacag laaluusha siinaayo qof kale si uu arrin ugu fuliyo.

Waxaa ugu badan oo laaluushka bixiya waa kuwa xilal doonka ah, kuwa raba xaq waxaysan ulahayn in ay dhacaan si ay uhelaana dantooda waxay baxshaan lacag iyo wax udhigma. Diinta islaamka aad bay uga soo horjeesatay in la baxsho laaluushka, diinteenu ma ogola.

الحديث الشّريف قوله عليه الصّلاة والسّلام: (لعنةُ اللهِ علَى الرَّاشي والمُرتشي) صحيح

Xadiis saxiix ah ayaa laga soo weriyay suubanaheena (NNKH) wuxuu yiri "Nacalad haku dhacdo ruuxa baxsha laaluushka iyo kan qaataba".

Alle hanaga najeeyo nacalad iyo wixii lamida waayo erayga nacalad waa erey muujinaya heerka uu gaarsiisanyahay laaluushka. Waxaa haboon ruux kasta oo Alle garanaya, muwaadin ah oo waddani ah in uu ka dheeraado laaluush iwm.

13. Tuuganimo: Tuuganimo waa in aad xado shay ama wax udhigma adoo ku qaadanaya sifo aan sharci ahayn iyo tuuganimo. Qofka dadka xoolahooda xada isagoon loojeedin ayaa la dhahaa **Tuug**. Haddaba diiniyan maxay ka qabtaa tuuganimada? Sida cad diinteenu waa ay sheegtay abaalmarinta qofka tuuga ah, sidaas darteed waa in qofka islaamka ah uusan samayn xatooyo isagoo la arkaayo iyo isagoon la arkaynba.

قال تعالى (والسارق والسارقة فاقطعوا أيديهما جزاء.

Alle wuxuu Qur'aankiisa ku yiri: "Tuuga iyo tuugada waxaa la jarayaa gacmaha qeyb kamida".

Haddaba waxaan fahmaynaa farqiga udhexeeya tuuganimo, laaluush qaate iyo musuq maasuqe. Musuqu waa in aad xoolo dadweyne xado. Tusaale ahaan waxaad Bangiga kala baxday **100,000** doolar sifo aan sharci ahayn waxaana la dhahaa **Musuq-maasuq**, waxaana dadka kula og siisay qeyb kamida lacagtii oo aad usiisay intaana qaata iga aamusa waxaa la dhahaa **Laaluush. Tuuganimo** waa in aad xoolo meel yaala aragto ama dafto ka dibna aadba qaadato wixii oo dhan.

14. Qaran dumin: Waddaniyad xumada waxaan ka dhaxalnay in aan qarankeena dumino, kuna dumino Qori,

Qallin. Waxaan dhulkeena quruxda badnaa ku burburinay qori, waxaana intaas usiiraacinay qallin oo waxaan sheegnay xumaha waddankeena, waxaana buunbuuninay meelaha aan ku liidano, waxaana ku soohagnay dad shisheeye si waddankeena uboobaan.

Waxaa jira dad xun oo dadka walaalaha ah kala geeya, isku dira, jaajuus ah oo aan ka shaqeyn wanaag iyo midnimo. Waxa uu kala qeybiyaa dad walaalo ah oo hilbo wadaag ah, wuxuuna isku diraa kuwa wada dhashay, wuxuuna kala fogeeyaa dad Muslim ah, wuxuuna hubka isugu dhiibaa hilbo wadaag, waxayna ka bacmushtaraan dhiiga dadka qubanaya, iyagoon garanayn waxa ay ku dilayaan ama uqubayaan dhiigga qofka islaamka ah, iyadoo diinteena Islaamka ah sharaftay qofka oo dhiigiisana iyo cirdigiisa dhowrtay.

عَنِ ابْنِ مَسْعُودٍ ـ رضي الله عنه ـ قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ: لَا يَحِلُّ دَمُ امْرِئٍ مُسْلِمٍ; يَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ، وَأَنِّي رَسُولُ اللَّهِ، إِلَّا بِإِحْدَى ثَلَاثٍ: الثَّيِّبُ الزَّانِي، وَالنَّفْسُ بِالنَّفْسِ، وَالتَّارِكُ لِدِينِهِ; الْمُفَارِقُ لِلْجَمَاعَةِ. مُتَّفَقٌ عَلَيْه

Ibnu Mascuud Alle raali haka noqdee waxaa laga wariyey in Rasuulku (NNKH) yiri "xalaal ma ahan dhiigga muslimka ah saddex xaaladood midkood maahane. Garoob

sinaysatay, naf naf dishay iyo qof diinkiisa ka tagay oo Jamaacadda laga waayay".

Haddaba saw ma haboona in aan iska ilaalino dhiigga qofka, xataa saddexda qof ee la sheegay in dhiigoodu bannaanyahay qof walba ma samayn karo ilaa qaadiga waddankaas ama wadaadka haysta meeshaas usareeya maahane cid kale oo fulinaysa ma jirto. Waa in aan iska ilaalino qof islaam ah in aan dhiigiisa qubno, waayadaan danbe waxaa batay in dhiiga qofka islaamka ah iska daato bilaa macne, taas oo ah dulmi iyo xadgudub bini'aadanimo.

Waxaa kale oo Alle Qur'aankiisa ku yiri

وفي القرآن الكريم: إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ إِخْوَةٌ فَأَصْلِحُوا بَيْنَ أَخَوَيْكُمْ [الحجرات}

"Muuminiintu waa walaalo, wanaag dhex dhiga walaalaha".

Alle mar kale oo uu ka hadlaayay isku duubnida iyo in xariga Eebbe la qabsado waxa uu ku yiri Qur'aankiisa.

وَاعْتَصِمُوا بِحَبْلِ اللَّهِ جَمِيعًا وَلَا تَفَرَّقُو.

"Qabsada Xarigga Eebbe dhammaantiin, hana kala taganina".

Aayad kale waxay leedahay Alle wuxuu idin amrayaa caddaalad iyo in aad isku asxaan fashaan.

قال الله تعالى: إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُ بِالْعَدْلِ وَالْإِحْسان

“Alle wuxuu idin amray caddaalad iyo wanaag in aad samaysaan”.

Qof kasta oo islaam ah waddani ah waa in uu ka shaqeeyo wanaaga, dadkiisa, diintiisa iyo dalkiisa dhistaan oo wanaagna muujiyaan. Waa in qof walba oo islaam ah ka shaqeeyo wanaaga, kana fogaado waxa keeni kara burbur, kala yaac iyo kala fogaansho. Waa in aan ka shaqeyno sidii aan isugu keeni lahayn dhammaan islaamka una fari lahayn wanaaga.

حديث أنس ت عن النبي ﷺ قال: لا يؤمن أحدكم حتى يحبَّ لأخيه ما يحبُّ لنفسه

Rasuulka (NNKH) wuxuu yiri "Axadkiina ma rumayn ilaa wuxuu jecelyahay la jeclaado walaalkiis”.

Cutubka 6-aad
Aaladaha wax la isugu gudbiyo

Sida idaacadaha, baraha bulshada, tiiviyada, taleefoonada iyo shirkadaha bixiya kaararka lagu wada xiriiro IWM.

Sidee uga qayb qaadan karaan sidii loo joojin lahaa ama loo yarayn lahaa dilaaga dahsoon?

Aalladaha wax la isugu gudbiyo waa meelaha ugu fiican oo aan isleeyahay waa lagu joojin karaa amaba way yarayn kartaa khatar tiisu dilaaga dahsoon.

Bulshada Soomaaliyeed waxay ahaayeen inta uusan soo bixin baraha bulshada tiifiyada, taleefoonada, idaacadaha, waxay lahaayeen geed halkaas oo lagu kala war heli jiray. Waxaa loo xil saari jiray dad lagu kal soonyahay hadhowdii markii geedka la isugu tago ayaa waxaa laga dhagaysan jiray dadkii markii hore loo xilsaaray in ay soo ururiyaan xogta loo diray, warka qofka mida usoo jeedin jiray waxa uu soo maqlay, soona arkay. Waxay kaloo warqaade ahaan jiray in intii lagasoo qaado Raas-casayr ilaa Raas-karbooni la keeno iyada oo aan gaari jirin, diyaarad jirin.

Kadib isticmaarkii waddanka yimi Soomaalida wuxuu baray amaba usameeyay aaladahan casriga ah oo lagu wada

xiriiro sida idaacadaha, tiifiiyada, mobilada walow uu baraha bulshada oo adduunkiiyoo dhan ka dhigay hal tuulo uu dhawaan soo baxay.

Haddan gudagalo su'aasha jawaabteedii aaladahaan wax la'isugu gudbiyo waxay uga qaybqaadan karaan siyaabo kala duwan oo midba si ka duwan ayay uga qayb qaadan kartaa haddii aan gudagalno midkasta iyo sida ay uga qayb qaadan karto.

Idaacadaha

I daacadaha: Idaacaduhu way ka horeeyaan qaybaha kale, idaacaduhu waxay uga qayb qaadan karaan in ay wacyigalin soo galiyaan marka aysan war soo gudbinayaan taas oo ka hadlaysa qabyaaladda iyo dhibaatadeeda, waxyaalaha ay ku xuntahay, siyaabaha la isaga daynkaro, in ay sameeyaan ruwaayado ay kaga dhiirigalinayaan dilaaga dahsoon waayo umadda Soomaaliyeed meesha ay aad ugu kalsoonyihiin waa idaacadaha. Maxaayeelay waxay inta badan raadiyaan warar sugan oo ay ku kalsoonaan karaan, waxaan aaminsanahay haddii ay waqtigaliyaan in wacyigalin dilaaga dahsoon ay qaadan lahaayeen umadda fahmi lahaayeena hagar daamadiisa iyo inuu waxaani yahay wax aan fiicnayn oo dib noo dhigaya. Idaacaduhu waa aaladda keliya ay umadda aaminsanyihiin, waxaan qabaa in ay qaadan lahaayeen iyaga laftirkooduna ay isku sii gudbin lahaayeen, waxaan qabaa meelaha ugu fudud oo haddii loo adeegsado dilaaga dahsoon in lagu joojiyo in ay tahay idaacaddu waayo dadku meel aysanba aaminsanayn amaba ku kalsoonayn way adagtahay si ay uqaataan waxyaalaha ay dhagaystaan.

Tiifiiyada

Tiifiiyadda iyagana waddanka waxay yimaadeen waqtigii uu haystay madaxweynihii ka caanka hoggaaminayay Maxamed Siyaad Barre Illaahay ha unaxariisto waxaa keenay Ingiriis markii ugu horaysay waxa tijaaabin lagu sameeyay tiifiigii ugu horreeyay Hargaysa, caasimadda labaad Soomaaliya halkaas oo Ingiiriisku guumaysan jiray kadib markuu si fiican ushaqeeyay ayaa waxaa loo soo wareejiyay Muqdisho caasumadda koowaad ee Soomaaliya.

Tiifiyada wax laga daawado waqtigaa waxa laga heli jiray labada caasimadood kaliya inta kale waddanka, waxaa laga dhagaysan jiray idaacadda BBC ayadaa ayaa aad loo wada dhagaysan jiray oo lagala socon jiray, waxa waddanka gudihiisa ka dhacaya iyo dibadiisaba.

Maanta tiifiga meelkasta waa yaalaa, waxaa fududaatay helidiisa xitaa reer uusan u oolayn waa yaryahay amaba majiro.

Soomaalidu waxay aad udanaysaa in ay isku darsato in ay aragto, maqasho, taabatona badanaa dadka Soomaalida ah waxay arkaan ayay rumaystaan amaba markay arkaan

iyada oo wixii gacanta laga qabanayo intooda badan dabeecadooda ayaa sidaa ubadan.

Maadaama ay umadda Soomaaliyeed sidaa ubadan yihiin tiifiyada laftarkoodu waxay ka qayb qaadan karaan sidii loo joojin lahaa amaba loo yarayn lahaa qabyaaladda maxaayeelay tiifiga intiiba way ka dheehan karaan waayo waa maqal, muuqaal iyo taabashoba, waana meesha ay sifudud ugu fududahay waayo waxaan niri Soomaalida dabeecadeeda ayaa ah in ay saddexdaa eray kulan sato marka tiifiyadu waa meel ay kumanaan si toosa uga qaadan lahaayeen haddii bilaabaan wacyigalin toosa xilliyada ay firaaqada yihiin, soo galiyaan waxyaalo ay dadka ku tusinayaan in uusan ahayn wax aan fiicnayn, soo galiyaan siyaabaha uu hardaamaynayo, soo galiyaan siyaabaha ay uga baxeen dalalka shisheeye waayo umadda Soomaaliyeed waa dad jecel in ay latartamaan haddii wax latuso dalalka horumaray.

Waayo waxay arki lahaayeen in aysan waxaan iyaga kaliya soo marin laakiin ayba dadka horumarayna soo mareen, waxay sifudud uga dawoobil lahaayeen dilaaga dahsoon.

Tiifiyada waxaa kaloo uga qaybqaadan karaan iyagoo soo galiya muxaadarooyinka ka hadlaya qabyaaladda ay

jeedinayaan culimada Soomaaliyeed, waayo waxaan nahay umad islaama, dadkeenana intooda badan waa islaam, waa Illaahay mahadii ,wayna jecelyihiin diintooda, haddii loosoo galiyo muxaadarooyin loogaga digayo qabyaaladda looguna sheegayo xumaanteeda iyo in aysan wanaagba lahayn adduun iyo aakhiroba way qaadan lahaayeen.

Idaacaddu waxay kaga fiicantahay tiifiiga miyi iyo magaalo ayaa la dhagaysanayaa oo cod baahinta ayay kaga duwan tahay iyada ayaa ka balaaran tiifiga.

Tiifiga waa magaalooyinka waayo wuxuu ubaahan yahay koronto iyo wixii lamida, reer baadiyuhu ma heli karaan aaladda tiifiga way ku adag tahay laakiin wax kasta waxay kala socdaan idaacadaha. Shirkadaha bixiya kaararka lagu ridanayo taleefoonka sida **Golis, Talesoom, Hormuud, Talecom, Amtel, Somnet** IWM.Waxay uga qayb qaadan karaan umadda Soomaaliyeed meelay joogaan ba isaga ayay isku la xiriiraan booskii warqadda isaga ayaa noo beddelay.

Shirkadaha bixiya kaarka lagu wada xiriirayo, waxay ka qayb qaadan karaan in ay ka wacyigaliyaan dadka cudurkaan maskaxdooda daashaday kaliya iyagu waxay soo dirikaraan Fariimo oo wax maqala ma samayn karaan.

Waxaa ugu dhaw iyaga oo soowaca oo sameeya kaar ushaqaynaya bulshada kaasoo u qaabilsan dhanka wacyigalinta qabyaaladda ama sidii Caronaha in cod ahaan loogu xiro kaararka way qaadanayaan umadda, maqalkaa ama wicitaankaa hadday arkaan laakiin badanaa uma badna wax akhriska oo maahan dad jecel wax akhriska intooda badan waa reer magaalka laakiin reer baadiyaha dantu waxay ugu jirtaa in lawaco waayo waxba ma akhrin karaan, waxna maqori karaan, laakiin dadka intaba garanaya laguna soo kari la'yahay waa reer magaalka.

Baraha Bulshada

Baraha bulshada umadda Soomaaliyeed wuu ku cusub yahay, waana seef laba afleh, dhankii loo adeegsadoba ay seeftu qaadayso waayo waa meel kulmisay adduunka oo dhan, kana dhigtay hal tuulo, meeshaa aad aragtay islaam iyo gaal way ku dhan yihiin, midkastana diintiisa ayuu ku faafinayaa. Waxaa iyadana ka faa'idaysanaysa cilmi qofkii maanta yaqaana luuqadaha sida Carabiga iyo Ingiriiska ama luuqadaha dadyowgu isku fahmaan.

Waa meel uu yaalo cilmi noocuu doono ha ahaado, dhanka kale haddii aan ka fiiriyo waa meel uu yaalo fusuq iyo wax wanaagsan yaalaan.

Haddaan gudagalo wuxuu uga qayb qaadan karaa baraha bulshada, waa meel ay kuwada dhanyihiin Soomaalida qaybeheeda kala duwan dal iyo dibadba. Baraha bulshadu waa meesha haddii loo adeegsado maanta in looga qaybqaato sidii loo joojin lahaa amaba loo yarayn lahaa dilaagga dahsoon ay tahay meesha ugu dhaw ay ka qaadan karaan amaba ay wax ka dhaadhici karaan, sida aynu lawada socono baraha bulshada, waxaa ugu badan oo isticmaalaa waa da'yarta Soomaaliyeed badanaana waxay qaataan waxyaalaha halkaas la soo galiyo waayo wali

malahan go'aan ay is dhahaan waxaan wuu xunyahay, kaga tag ama wuu fiicanyahay kusii soco.

Baraha bulshadu maanta wuxuu noqday meel lagu kala warqaato oo hadhow xitaa bulshada qaybeheeda kala duwan oo aan haysan ama isticmaalin baraha bulshada ay la socdaan waxyaalaha ka jira iyo waxa lasoo dhigo.

Haddii ay umadda Soomaaliyeed qaybeheeda kala duwan ay u adeegsadaan sida culumada, macalimiinta, siyaasiyiinta, dhalinyarada, haweenka, ururada bulshada, dhaqaatiirta iyo dadka iyagu horta naftooda ka sifeeyay dilaaga dahsoon.

Haddii aynu u adeegsano baraha bulshada in aynu iskaga dhiirigalino qabyaaladda iyo xumaanteeda, haddii aynu ka sheekayno waddankeenu waqtiyadii fiicnaa uu soo maaray.

Haddii aynu markasta rajayno in uu xaalka waddanku soo fiicnaanayo, siina fiicnaan doonto, haddii aynu yarayno dhaliilaha, cayda iyo waxkasta oo bulshada Soomaaliyeed sii kala kaxaynaya, baraha bulshadu wuxuu noqonayaa in aan uga faa'idaysano kuna jirno seefta dhankeeda fiican.

Haddii qofkii qabiil ka hadlaya laga dhigo mid ceeboobay oo ay sanba waxba udhimanayn ileen wali wuxuu taagan yahay meel qayrkii ka tagay.

Waxaan aaminsanahay in uu baraha bulshadu uyahay casrigaan meesha ugu saamaynta badan laakiin aynaan fahansanayn ama inagoo fahansan aynaan danba ka lahayn waayo qofkasta oo kamida qaybaha kala duwan oo bulshada Soomaaliyeed waa in ay udiirnaxaan dadkooda iyo dalkooda. Waa in ay eraygaan burbur oo nadaashaday ku beddelaan **qaran dhismay, waa in loo wada guntadaa** sidii loogu heli lahaa dad midaysan oo kamida qabyaalad iyo waxkasta oo umadda dilaya qarankooda, waxkasta oo dib udhac ku keenaya dadkooda waa in ay ahaadaan, ka dhiidhiiya.

Waxyaalaha ay ka faafiyaan dadkooda iyo dalkooda waa in aysan iyagu isu arag cadow laakiin ay ogaadaan in ay leeyihiin cadow shisheeye kaasoo tartan kula jira dhankasta, waa in aan baranaa in aan isu tanaasulno si qarankeenu unoqdo mid taabogalay.

Talo soojeedinta waxaan ugu talogalay bulshada qaybeheeda kala duwan oo kuwada xiriirta baraha bulshada, waa in qofkasta oo kamida dadka isticmaala baraha bulshada ay soo galiyaan waxyaalo maqal iyo muuqaal, ruwaayado ka hadlaya qabyaaladda iyo

xumaanteeda waayo dal walba umaddiisu dhaqan bay leeyihiin Soomaliduna.

Intaas oo dhan waxay naga caawinaysaa dadkeena isticmaala baraha bulshada in aan marka hore inagu iska saarno waayo qof naftiisa isaga ay ku jirto qabyaaalad cidka le waxba uma gudbinkaro.

Marka aad naftaada iska sifaysid ayaad dadka kalena wax uga sheegikartaa sida kor ku xusanba. Dadkeena baraha bulshada isticmaalna waa in aan kawada qayb qaadanaa sidii uu waddankeena, dadkeena uga bixi lahaayeen, waxyaalaha ragaadiyay ugana tashan lahayn si uu waddanku guul iyo horumarna ugaari lahaa waddan keena.

Xigashada Buugga

1. Kitaabka Qur’aanka kariimka ah
2. Saxiixul Bukhaari
3. Saxiixul Muslim
4. Taariikhda Ambiyada
5. Kitaabka Riyaadul Saalixayn
6. Buugga Waddani Kaab oo aan ka soo xigtay

- Waddaniyad xumada maxaa ka dhaxalnay?
- Tobanka Dhib Ee Haysta Waddanka
- Fahamka waddaniyadda

7. https://www.diblomaasi.com

DHAMMAAD